Ku dhaqan Xafiis D.

# FAAFINTA RASMIGA AH

# الجريدة الرسمية

# OFFICIAL BULLETIN

## EE JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Sanadka 7aad** **FAAFIN SANADLE** **Muqdisho** **2019**

**Waaxda Maamulka Faafinta Rasmiga ah**
**Ee Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda**

**Uruurinta Sharciyada iyo Wareegtooyinta ee Jan-December 2019**

Qiimaha waa $XXX Dollar, lambar waliba – **RUKUNKA**: Sanaddii waa $XXX Dollar, Soomaaliya gudaheeda – Dibaddeedana waa $XXX Dollar.
Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo. Qiimaha Qoritaanku F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa $XXX Dollar – Rukunka iyo Qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah – Lacagta waxaa lagu bixiniyaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Maaliyadda.

# KOBNIIN

**BOGGA KOOWAAD**

**SHARCI**

W.M

**BOGGA LABAAD**

XEER

**BOGGA SEDDEXAAD**

**TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGAYSIIS, IWM**

# SANADKA

# 2019

Ku dhaqan Xafiis D.

# FAAFINTA RASMIGA AH

# الجريدة الرسمية

# OFFICIAL BULLETIN

## EE JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Sanadka 6aad** **Muqdisho, 31 September 2019** **Lr. 7**

**Waaxda Maamulka Faafinta Rasmiga ah**
**Ee Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda**

**FAAFIN BIL SOO BAXA**

Qiimaha waa $XXX Dollar, lambar waliba – **RUKUNKA**: Sanaddii waa $XXX Dollar, Soomaaliya gudaheeda – Dibaddeedana waa $XXX Dollar.

Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo. Qiimaha Qoritaanku F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa $XXX Dollar – Rukunka iyo Qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah – Lacagta waxaa lagu bixiniyaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Maaliyadda.

# KOBNIIN

## BOGGA KOOWAAD

## SHARCI

W.M

## BOGGA LABAAD

XEER

## BOGGA SEDDEXAAD

## TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGAYSIIS, IWM

# BILAHA

## *Janaayo - Juun*

---

# 2019

**XEER MADAXWEYNE LR. 117** Taariikh: 15/08/2018
MAGACAABIS KU-XIGEENKA AGAASIMAHA GUUD
EE MADAXTOOYADA **Bog 6**

**XEER MADAXWEYNE LR. 136** Taariikh: 02/01/2019
*DALLACSIIN SARKAAL*

**XEER MADAXWEYNE LR. 143** Taariikh: 03/03/2019
*KU QAADASHO IYO DALLACSIIN SARAAKIIL*
**Bog 8**

**XEER MADAXWEYNE LR. 145** Taariikh: 25/03/2019
MAGACAABIS TALIYAHA CIIDANKA BADDA **Bog 9**

**XEER MADAXWEYNE LR. 146** Taariikh: 25/03/2019
MAGACAABID TALIYAHA CIIDANKA DHULKA
XOOGGA DALKA SOOMAALIYEED **Bog 10**

**XEER MADAXWEYNE LR. 147** Taariikh: 25/03/2019
MAGACAABIS TALIYE KU-XIGEENKA CIIDANKA
XOOGGA DALKA SOOMAALIYEED **Bog 11**

**XEER MADAXWEYNE LR. 148** Taariikh: 25/03/2019
DALLACSIIN SARKAAL **Bog 12**

**XEER MADAXWEYNE LR. 151** Taariikh: 20/04/2019
AQBALID GO'AANKA GOLAHA WASIIRRADA EE
MAGACAABIDDA GUDDOOMIYAHA BANKIGA DHEXE
EE SOOMAALIYA **Bog 13**

**XEER MADAXWEYNE LR. 153** Taariikh: 14/05/2019
DALLACSIIN SARKAAL **Bog 14**

**XEER MADAXWEYNE LR. 154** Taariikh: 14/05/2019
U QIIMEYN IYO KU QAADASHO DARAJO

**XEER MADAXWEYNE LR. 155** Taariikh: 15/05/2019
MAGACAABIS KU-XIGEENKA AGAASIMAHA GUUD
EE MADAXTOOYADA **Bog 18**

**XEER MADAXWEYNE LR. 156** Taariikh: 23/05/2019
MAGACAABIS KU-XIGEENKA GUDDOOMIYAHA GOBOLKA BENAADIR EE ARRIMAHA MAAMULKA IYO MAALIYADDA **Bog 19**

**XEER MADAXWEYNE LR. 157** Taariikh: 10/06/2019
DALLACSIIN SARKAAL **Bog 25**

**XEER MADAXWEYNE LR. 158** Taariikh: 10/06/2019
DALLACSIIN SARAAKIIL IYO L/SARAAKIIL **Bog 26**

**SHARCI LR. 11** Taariikh: 02/06/2019
ANSIXINTA HESHIISKA [CAHDIGA] XUQUUQDA DADKA NAAFADA AH 61/106 EE DISEMBAR 2006 **Bog 23**

**XEER RA'IISUL WASAARE LR. 067** Taariikh: 28/02/2019
GO'AAN GOLE: 'ANSIXINTA SIYAASADDA SAMAYNTA HAY'ADDA MAAL-GELINTA GANACSIGA YAR-YAR IYO KUWA DHEXE **Bog 23**

**XEER RA'IISUL WASAARE LR. 068** Taariikh: 28/02/2019
GO'AAN GOLE: 'ANSIXINTA SIYAASADDA QARAN EE KOBCINTA AWOODAHA DOWLADAHA HOOSE **Bog 23**

**XEER RA'IISUL WASAARE LR. 069** Taariikh: 28/02/2018
GO'AAN GOLE: 'ANSIXINTA SIYAASADDA AQOONSIGA DADWEYNAHA **Bog 23**

**XEER RA'IISUL WASAARE LR. 070** Taariikh: 21/03/2019
GO'AAN GOLE: 'ANSIXINTA SIYAASADDA HANNAANKA DHAB-U-HESHIISIINTA QARAN **Bog 23**

**XEER RA'IISUL WASAARE LR. 071** Taariikh: 21/03/2019
GO'AAN GOLE: 'ANSIXIN MAGAC BEDELIDDA HAY'ADDA DUULISTA RAYIDKA IYO SAADAASHA HAWADA SOOMAALIYEED; LOONA BEDELAY HAY'ADDA DUULISTA RAYIDKA SOOMAALIYEED

**XEER MADAXWEYNE LR. 117** Taariikh: 15/08/2018

**MAGACAABIS KU-XIGEENKA AGAASIMAHA GUUD EE MADAXTOOYADA**

**MADAXWAYNAHA J.F.S**

**MARKUU ARKAY**: Qodobka 87aad ee Dastuurka KMG ah ee Dalka, Farqadda 1aad Xarafkiisa C

**MARKUU ARKAY**: Qodobka 90aad ee Dastuurka KMG ah, Xarafkiisa L

**MARKUU TIXGELIYAY**: Baahida loo qabo magacaabista Ku-xigeenka Agaasime Guud ee ay yeelato Madaxtooyada

***Madaxweynuhu waxa uu soo saaray Xeerkaan***

**Qodobka 1aad**

Laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 15-ka Ogosto 2018, Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed waxa uu u magacaabay **Cabdirisaaq Xuseen Aadan** in uu noqdo Ku-Xigeenka Agaasimaha Guud ee Madaxtooyada JFS

**Qodobka 2aad**

Xeerkaan waxa uu Dhaqan Galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S

**MUQDISHO: 15/08/2018**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
WAA LA DIIWAAN GELIYEY
DIIWAAN NO: HAN/19/2019
TAARIIKH: 26/7/2019
SAXIIXA HANTIDHAWRKA GUUD

Madaxweynaha J.F.S
Maxamed Cabdullaahi Maxamed (Farmaajo)

**XEER MADAXWEYNE LR. 136** Taariikh: 02/01/2019

**DALLACSIIN SARKAAL**

**MADAXWAYNAHA J.F.S**

**MARKUU ARKAY**: Qodobka 87aad, Farqadda 1aad, Xarafka 'C' iyo Farqadda 2aad ee Dastuurka KMG

**MARKUU ARKAY**: Qodobka 90aad, Xarafka 'B' ee Dastuurka J.F.S

**MARKUU ARKAY**: Sharci Lr. 49 ee soo baxay 1970, kuna saabsan Dhismaha Ciidanka Asluubta Soomaaliyeed

**MARKUU TIXGELIYAY**: Soo jeedinta Taliyaha Ciidanka Asluubta Soomaaliyeed Ref: T/G/C.A.S/X/T/G/7/27/2018 Taariikh: 13/11/2018 kuna saabsan Dallacsiin Sarkaal

**MARKUU GARWAAQSADAY**: Mudnaanta uu mudan yahay in la Dallacsiiyo Sarkaal

***Waxa uu soo saaray Xeerkaan***

**Qodobka 1aad**

Laga bilaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo Xeerkaan, waxaa Sarkaalka Magaciisa hoos ku qoran loo dallacsiiyey darajada ku hor qoran kana tirsan Ciidanka Asluubta Soomaaliyeed

| ***No*** | ***Darajada*** | ***Magaca*** | ***Loo Dallacsiiyay*** |
|---|---|---|---|
| 1. | Dhamme | Suleymaan Maxamed Axmed | G/Le |

**Qodobka 2aad**

Sarkaalka ku tilmaaman xeerkaan wuxuu xaq u yeelanayaa wixii xuquuq oo ay kafaalo qaadayaan Shuruucda Xagga sare ku xusan & wixii xuquuq oo xeerka ciidamadu tilmaamayo

**Qodobka 3aad**

Waxa uu Xeerkaan dhaqangelayaa isla maalinta uu Madaxweynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabaci doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S

**MUQDISHO: 02/01/2019**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
WAA LA DIIWAAN GELIYEY
DIIWAAN NO: HAN/2015/2019
TAARIIKH: 20/7/2019
SAXIIXA HANTIDHAWRKA GUUD

Madaxweynaha J.F.S
Maxamed Cabdullaahi Maxamed (Farmaajo)

## KU QAADASHO & DALLACSIIN SARKAAL

**MADAXWAYNAHA J.F.S**

**MARKUU ARKAY**: Qodobka 87aad, Farqadda 1aad, Xarafka 'C' iyo Farqadda 2aad ee Dastuurka KMG

**MARKUU ARKAY**: Qodobka 90aad, Xarafka 'B' ee Dastuurka J.F.S

**MARKUU ARKAY**: Sharci Lr. 49 ee soo baxay 1970, kuna saabsan Dhismaha Ciidanka Asluubta Soomaaliyeed

**MARKUU TIXGELIYAY**: Soo jeedinta Taliyaha Ciidanka Asluubta Soomaaliyeed Ref: T/G/C.A.S/X/T/357/2019 Taariikh: 14/02/2019 kuna saabsan Dallacsiin & KU qaadasho Saraakiil

**MARKUU GARWAAQSADAY**: Mudnaanta ay mudan yihiin in la Dallacsiiyo Saraakiishaan

***Waxuu Madaxweynuhu soo saaray Xeerkaan***

**Qodobka 1aad**

Laga bilaabo marka uu Madaxweynaha saxiixo Xeerkaan, waxaa Saraakiisha Magacyadoodu hoos ku qoran loo dallacsiiyey darajada ku hor qoran kana tirsan Ciidanka Asluubta Soomaaliyeed

| *No* | *Darajada* | *Magaca* | *Loo Dallacsiiyay* |
|---|---|---|---|
| 1. | Marwo | Xaliimo Cabdulle Cali | L/x/Le |
| 2. | K/s | Maajid Cabdalla Nuuradiin | x/Le |
| 3. | K/s | Raage Cali Maxamed | x/Le |
| 4. | K/s | Bakar Cabdulqaadir Muuse | x/Le |
| 5. | K/s | Axmed Cabdi Abuukar | x/Le |
| 6. | K/s | Cabdi Dhicisow Maxamuud | x/Le |

## Qodobka 2aad

Saraakiishaan ku tilmaaman xeerkaan waxay xaq u yeelanayaan wixii xuquuq oo ay kafaalo qaadayaan Shuruucda Xagga sare ku xusan & wixii xuquuq oo xeerka ciidamadu tilmaamayo

## Qodobka 3aad

Waxa uu Xeerkaan dhaqangelayaa isla maalinta uu Madaxweynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabaci doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S

**MUQDISHO: 03/03/2019**

Madaxweynaha J.F.S
Maxamed Cabdullaahi Maxamed (Farmaajo)

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
WAA LA DIIWAAN GELIYEY
DIIWAAN NO: HAN/121/2019
TAARIIKH 20/7/2019
SAXIIXA HANTIDHAWRKA GUUD

**XEER MADAXWEYNE LR. 145** Taariikh: 25/03/2019

# MAGACAABID TALIYAHA CIIDANKA BADDA

## MADAXWAYNAHA J.F.S

**MARKUU ARKAY**: Qodobka 87aad, Farqadda 1aad, Xarafka 'C' iyo Farqadda 2aad ee Dastuurka KMG

**MARKUU ARKAY**: Qodobka 90aad, Xarafka 'B' ee Dastuurka J.F.S

**MARKUU ARKAY**: Sharciga Lr. 15 ee soo baxay 06/04/1960 ee lagu dhisay Xoogga Dalka Soomaaliyeed

Soo jeedinta Taliyaha Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed Lr: XTC/XDS/247/2019 kuna saabsan Magacaabis Taliyaha Ciidanka Badda

**MARKUU GARWAAQSADAY**: Inay muhiim tahay in la magacaabo Taliye Cusub ee uu yeesho ciidanka Badda.

***Waxuu Madaxweynaha soo saaray Xeerkaan***

**Qodobka 1aad**

1. Waxaa **G/sare Cabaas Amiin Cali** loo dallacsiiyey darajada S/Guuto isla markaana loo magacaabay inuu noqdo Taliyaha Ciidanka Badda

**Qodobka 2aad**


Xeerkani waxa uu baabi'inayaa wixii xeer ah ee ka hor imaanaya

**Qodobka 3aad**

Waxa uu Xeerkaan dhaqangelayaa isla maalinta uu Madaxweynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabaci doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S

**MUQDISHO: 25/03/2019**

Madaxweynaha J.F.S
Maxamed Cabdullaahi Maxamed (Farmaajo)



**XEER MADAXWEYNE LR. 146** Taariikh: 25/03/2019

## MAGACAABID TALIYAHA CIIDANKA DHULKA XOOGGA DALKA SOOMAALIYEED

### MADAXWAYNAHA J.F.S

**MARKUU ARKAY**: Qodobka 87aad, Farqadda 1aad, Xarafka ‘C’ iyo Farqadda 2aad ee Dastuurka KMG

**MARKUU ARKAY**: Qodobka 90aad, Xarafka ‘B’ ee Dastuurka J.F.S

**MARKUU ARKAY**: Sharciga Lr. 15 ee soo baxay 06/04/1960 ee lagu dhisay Xoogga Dalka Soomaaliyeed

Soo jeedinta Taliyaha Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed Lr: XTC/XDS/247/19 taariikh 25/03/2019 kuna saabsan Magacaabid Taliyaha Ciidanka Dhulka Xoogga Dalka Soomaaliyeed

**MARKUU GARWAAQSADAY**: Inay muhiim tahay in la magacaabo Taliyaha Ciidanka Dhulka Xoogga Dalka Soomaaliyeed.

### *Waxuu Madaxweynaha soo saaray Xeerkaan*

### Qodobka 1aad

1. Laga Bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 25/03/2019 waxa uu Madaxweynuhu u magacaabay **S/Guuto Odowaa Yuusuf Raage** in uu noqdo Taliyaha Ciidanka Dhulka Xoogga Dalka Soomaaliyeed

### Qodobka 2aad

Xeerkani waxa uu baabi’inayaa wixii xeer ah ee ka hor imaanaya

### Qodobka 3aad

Waxa uu Xeerkaan dhaqangelayaa isla maalinta uu Madaxweynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabaci doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S

**MUQDISHO: 25/03/2019**

Madaxweynaha J.F.S
Maxamed Cabdullaahi Maxamed (Farmaajo)

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
WAA LA DIIWAAN GELIYEY
DIIWAAN NO:
TAARIIKH
SAXIIXA HANTIDHAWRKA GUUD

**XEER MADAXWEYNE LR. 147** Taariikh: 25/03/2019

# MAGACAABID TALIYE KU-XIGEENKA CIIDANKA XOOGGA DALKA SOOMAALIYEED

## MADAXWAYNAHA J.F.S

**MARKUU ARKAY**: Qodobka 87aad, Farqadda 1aad, Xarafka ‘C’ iyo Farqadda 2aad ee Dastuurka KMG

**MARKUU ARKAY**: Qodobka 90aad, Xarafka ‘B’ ee Dastuurka J.F.S

**MARKUU ARKAY**: Sharciga Lr. 15 ee soo baxay 06/04/1960 ee lagu dhisay Xoogga Dalka Soomaaliyeed

Soo jeedinta Taliyaha Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed Lr: XTC/XDS/247/19 taariikh 25/03/2019 kuna saabsan Magacaabid Taliye ku-xigeenka Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed – Chief of Staff (COS)

**MARKUU GARWAAQSADAY**: Inay muhiim tahay in la magacaabo Taliye ku-xigeenka Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed – Chief of Staff (COS)

***Waxuu Madaxweynaha soo saaray Xeerkaan***

### Qodobka 1aad

1. Laga Bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 25/03/2019 waxa uu Madaxweynuhu u magacaabay **S/Gaas Cabdi Xasan Maxamed [Xijaar]** in uu noqdo Taliye ku-xigeenka Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed – Chief of Staff (COS)

### Qodobka 2aad

Xeerkani waxa uu baabi’inayaa wixii xeer ah ee ka hor imaanaya

### Qodobka 3aad

Waxa uu Xeerkaan dhaqangelayaa isla maalinta uu Madaxweynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabaci doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S

**MUQDISHO: 25/03/2019**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
WAA LA DIIWAAN GELIYEY
DIIWAAN NO: ________
TAARIIKH ________
SAXIIXA HANTIDHAWRKA GUUD ________

Madaxweynaha J.F.S
Maxamed Cabdullaahi Maxamed (Farmaajo)

**XEER MADAXWEYNE LR. 148** Taariikh: 25/03/2019

**DALLACSIIN SARKAAL**

**MADAXWAYNAHA J.F.S**

**MARKUU ARKAY**: Qodobka 87aad, Farqadda 1aad, Xarafka ‘C’ iyo Farqadda 2aad ee Dastuurka KMG

**MARKUU ARKAY**: Qodobka 90aad, Xarafka ‘B’ ee Dastuurka J.F.S

**MARKUU ARKAY**: Xeer Lr. 15 ee 06/04/1960 kuna saabsan Dhismaha Xoogga Dalka Soomaaliyeed

**MARKUU TIXGELIYAY**: Soo jeedinta Taliyaha Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed Lr: XTC/XDS/247/19 Taariikh: 25/03/2019 kuna saabsan Dallacsiin Sarkaal

**MARKUU GARWAAQSADAY**: Mudnaanta uu mudan yahay in la Dallacsiiyo Sarkaalkaan

***Waxa uu soo saaray Xeerkaan***

**Qodobka 1aad**

Laga bilaabo marka uu Madaxweynaha saxiixo Xeerkaan, waxaa Sarkaalkaan Magaciisa hoos ku qoran loo dallacsiiyey darajada ku hor qoran kana tirsan Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed

| *No* | *Darajada* | *Magaca* | *Loo Dallacsiiyay* |
|---|---|---|---|
| 1. | G/sare | **Cabdirashiid Cabdullaahi Shire** | S/Guuto |

**Qodobka 2aad**

Sarkaalkaan ku tilmaaman xeerkaan wuxuu xaq u yeelanayaa wixii xuquuq oo ay kafaalo qaadayaan Shuruucda Xagga sare ku xusan & wixii xuquuq oo xeerka ciidamadu tilmaamayo

**Qodobka 3aad**

Waxa uu Xeerkaan dhaqangelayaa isla maalinta uu Madaxweynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabaci doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S

**MUQDISHO: 25/03/2019**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
WAA LA DIIWAAN GELIYEY
DIIWAAN NO: HAN/125/2019
TAARIIKH: 20/7/2019
SAXIIXA HANTIDHAWRKA GUUD

Madaxweynaha J.F.S
Maxamed Cabdullaahi Maxamed (Farmaajo)

**XEER MADAXWEYNE LR. 151** Taariikh: 20/04/2019

**AQBALID GO'AANKA GOLAHA WASIIRRADA EE MAGACAABIDDA GUDDOMIYAHA BANKIGA DHEXE EE SOOMAALIYA**

**MADAXWAYNAHA J.F.S**

**MARKUU ARKAY**: Qodobka 87aad, Farqadda 1aad, Xarafka 'C' iyo Farqadda 2aad ee Dastuurka KMG

**MARKUU ARKAY**: Qodobka 90aad, Xarafka 'K' ee Dastuurka J.F.S

**MARKUU ARKAY**: Xeer Madaxweyne Lr. 130 ee soo baxay 22.04.2012 kuna saabsan sharciga Bankiga Dhexe ee Soomaaliyeed iyo Hey'adaha Maaliyadda Soomaaliya

**MARKUU TIXGELIYAY**: Soo jeedinta Xafiiska Ra'iisal Wasaare ku-xigeenka Xukuumadda JFS TEX:XRW/0122/04/2019 iyo Go'aanka Golaha Wasiirrada ee Summaddiisu tahay SHGW.00.69.04.19 kuna saabsan ansixinta Magacaabidda Guddoomiyaha Bankiga Dhexe ee Soomaaliya

**MARKUU OGAADAY**: In ay lagama maarmaan tahay in la magacaabo Guddoomiyaha Bankiga Dhexe ee Soomaaliyeed

**MARKUU TIXGELIYAY**: Aqoonta iyo waayo-aragnimada uu leeyahay Guddoomiyaha loo magacaabyo Xilkan.

***Waxa Madaxweynuhu uu soo saaray Xeerkaan***

**Qodobka 1aad**

Laga bilaabo marka uu Madaxweynaha saxiixo Xeerkaan, waxaa mudane **Cabdiraxmaan Maxamed Cabdullaahi** loo magacaabay inuu noqdo Guddoomiyaha Bankiga Dhexe ee Soomaaliyeed

**Qodobka 2aad**

Xeerkani waxa uu baabi'inayaa wixii xeer ah ee ka hor imaanaya

**Qodobka 3aad**

Waxa uu Xeerkaan dhaqangelayaa isla maalinta uu Madaxweynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabaci doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S

**MUQDISHO: 20/04/2019**

Madaxweynaha J.F.S
Maxamed Cabdullaahi Maxamed (Farmaajo)

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
WAA LA DIIWAAN GELIYEY
DIIWAAN NO: [illegible]
TAARIIKH: 20/7/2019
SAXIIXA HANTIDHAWRKA GUUD

**XEER MADAXWEYNE LR. 153** Taariikh: 14/05/2019

**DALLACSIIN SARKAAL**

**MADAXWAYNAHA J.F.S**

**MARKUU ARKAY**: Qodobka 87aad, Farqadda 1aad, Xarafka ‘C’ iyo Farqadda 2aad ee Dastuurka KMG

**MARKUU ARKAY**: Qodobka 90aad, Xarafka ‘B’ ee Dastuurka J.F.S

**MARKUU ARKAY**: Sharciga Lr. 49 ee soo baxay 1970 kuna saabsan Dhismaha Ciidanka Asluubta Soomaaliyeed

**MARKUU TIXGELIYAY**: Soo jeedinta Taliyaha Ciidanka Asluubta Soomaaliyeed Ref,T/G/C.A.S/X/T/7/415/2019 Taariikh: 28/04/2019 kuna saabsan Dallacsiin Mudnaan Gaar ahaaneed

**MARKUU GARWAAQSADAY**: Mudnaanta uu mudan yahay in la Dallacsiiyo Sarkaalkaan

***Waxa uu soo saaray Xeerkaan***

**Qodobka 1aad**

Laga bilaabo marka uu Madaxweynaha saxiixo Xeerkaan, waxaa Sarkaalkaan Magaciisa hoos ku qoran loo dallacsiiyey darajada ku hor qoran kana tirsan Ciidanka Asluubta Soomaaliyeed

| ***No*** | ***Darajada*** | ***Magaca*** | ***Loo Dallacsiiyay*** |
|---|---|---|---|
| 1. | G/le | **Eng. Ciise Maxamed Cabdiraxmaan** | G/dhexe |

**Qodobka 2aad**

Sarkaalkaan ku tilmaaman xeerkaan wuxuu xaq u yeelanayaa wixii xuquuq oo ay kafaalo qaadayaan Shuruucda Xagga sare ku xusan & wixii xuquuq oo xeerka ciidamadu tilmaamayo

**Qodobka 3aad**

Waxa uu Xeerkaan dhaqangelayaa isla maalinta uu Madaxweynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabaci doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S

**MUQDISHO: 14/05/2019**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
WAA LA DIIWAAN GELIYEY
DIIWAAN NO.
TAARIIKH
SAXIIXA HANTIDHAWRKA GUUD

Madaxweynaha J.F.S
Maxamed Cabdullaahi Maxamed (Farmaajo)

**XEER MADAXWEYNE LR. 154** Taariikh: 14/05/2019

**U QIIMEYN & KU QAADASHO**

**MADAXWAYNAHA J.F.S**

**MARKUU ARKAY**: Qodobka 87aad, Farqadda 1aad, Xarafka 'C' iyo Farqadda 2aad ee Dastuurka KMG

**MARKUU ARKAY**: Qodobka 90aad, Xarafka 'B' ee Dastuurka J.F.S

**MARKUU ARKAY**: Sharci Lr. 49 ee soo baxay 1970, kuna saabsan Dhismaha Ciidanka Asluubta Soomaaliyeed

**MARKUU TIXGELIYAY**: Soo jeedinta Taliyaha Ciidanka Asluubta Soomaaliyeed Ref: T/G/C.A.S/X/T/7/414/2019 Taariikh: 29/04/2019 kuna saabsan ku qaadasho Saraakiil

**MARKUU GARWAAQSADAY**: Mudnaanta ay mudan yihiin in lagu qaato Darajadaan

***Waxuu Madaxweynuhu soo saaray Xeerkaan***

**Qodobka 1aad**

Laga bilaabo marka uu Madaxweynaha saxiixo Xeerkaan, waxaa Saraakiishaan Magacyadooda hoos ku qoran lagu qaatay darajada ku hor qoran kana tirsan Ciidanka Asluubta Soomaaliyeed

| *No* | *Darajada* | *Magaca* | *Loo Dallacsiiyay* |
|---|---|---|---|
| 1. | Eng. | Cabdullaahi Axmed Ibraahim | Dhamme |
| 2. | Eng, | Axmed Saciid Jabriil | Dhamme |


**Qodobka 2aad**

Saraakiishaan ku tilmaaman xeerkaan waxay xaq u yeelanayaan wixii xuquuq oo ay kafaalo qaadayaan Shuruucda Xagga sare ku xusan & wixii xuquuq oo xeerka ciidamadu tilmaamayo

**Qodobka 3aad**

Waxa uu Xeerkaan dhaqangelayaa isla maalinta uu Madaxweynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabaci doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S

**MUQDISHO: 14/05/2019**




Madaxweynaha J.F.S
Maxamed Cabdullaahi Maxamed (Farmaajo)

## MAGACAABIS AGAASIMAHA GUUD EE MADAXTOOYADA

## MADAXWAYNAHA J.F.S

**MARKA UU ARKAY**: Qodobka 87aad ee Dastuurka KMG ah ee Dalka

**MARKA UU ARKAY**: Qodobka 90aad ee Dastuurka KMG ah

**MARKA UU ARKAY**: Aqoonta iyo waayo-aragnimada uu leeyahay mudanaha loo magacaabayo xilkan

**MARKA UU TIXGELIYAY**: Baahida loo qabo magacaabista Agaasime Guud oo ay yeelato Madaxtooyada JFS

***Madaxweynuhu Waxa uu soo saaray Xeerkan Magacaabis***

### Qodobka 1aad


Laga billaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 15ka Maajo 2019, Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed waxa uu u magacaabay mudane **Prof. Nuur Diiriye Xirsi (Fuursade)** in uu noqdo Agaasimaha Guud ee Madaxtooyada JFS

### Qodobka 2aad

Xeerkan waxa uu dhaqangelayaa marka uu Saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ee JFS.

**MUQDISHO: 15/05/2018**

Madaxweynaha J.F.S
Maxamed Cabdullaahi Maxamed Farmaajo



**XEER MADAXWEYNE LR. 156** Taariikh: 23/05/2019

MAGACAABIS KU-XIGEENKA GUDDOOMIYAHA GOBALKA BENAADIR EE
**ARRIMAHA MAAMULKA & MAALIYADDA**

**MADAXWAYNAHA J.F.S**

**MARKUU ARKAY**: Qodobka 87aad, Faqrada 1aad, Xarafka ‘C’ iyo Faqradda 2aad ee Dastuurka

**MARKUU ARKAY**: Qodobka 90aad, Xarafka ‘K’ ee Dastuurka J.F.S

**MARKUU ARKAY**: Qodobka 8aad, Faqradda 4aad, ee Xeer Lr. 6 ee soo baxay 12/02/1980 kuna saabsan in G/Benaadir iyo Dowladda Hoose ay hoos yimaadaan Madaxtooyada J.F.S

**MARKUU GARWAAQSADAY**:In ay jirto baahi loo qabo in loo magacaabo G/Banaadir ku-xigeen Arrimaha Maamulka & Maaliyadda

**MARKUU TIXGELIYAY**: Waayo-aragnimada uu mudanaha xilkan loo magacaabayo u leeyahay howlaha loo magacaabayo

***Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray Xeerkan***

**Qodobka 1aad**

Waxaa Mudane **Ibrahim Omar Mahadale** loo magacaabay in uu noqdo **Guddoomiye Ku-Xigeenka Arrimaha Maamulka & Maaliyadda** ee Gobolka Benaadir.

**Qodobka 2aad**


Xeerkan waxa uu burinayaa dhammaan wixii xeer ah ee aan waafaqsaneyn

**Qodobka 3aad**

Waxa uu Xeerkan Madaxweyne dhaqan gelayaa marka uu Madaxweynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

**MUQDISHO: 23/05/2018**

Madaxweynaha J.F.S
Maxamed Cabdullaahi Maxamed Farmaajo



**XEER MADAXWEYNE LR. 157** Taariikh: 10/06/2019

**DALLACSIIN SARKAAL**

## MADAXWAYNAHA J.F.S

**MARKUU ARKAY**: Qodobka 87aad, Farqadda 1aad, Xarafka 'C' iyo Farqadda 2aad ee Dastuurka KMG

**MARKUU ARKAY**: Qodobka 90aad, Xarafka 'B' ee Dastuurka J.F.S

**MARKUU ARKAY**: Sharciga Lr. 2 ee 23/12/1973 kuna saabsan Dhismaha Ciidanka Booliiska Soomaaliyeed

**MARKUU TIXGELIYAY**: Soo jeedinta Taliyaha Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed Lr. XTC/XDS/323/19 Taariikh: 14/04/2019 kuna saabsan Soo Jeedin Dallacsiin Sarkaal

**MARKUU GARWAAQSADAY**:Mudnaanta uu mudan yahay in la Dallacsiiyo

### *Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray Xeerkaan*

### Qodobka 1aad

Laga bilaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo Xeerkaan, waxaa Sarkaalkaan Magaciisa hoos ku qoran loo dallacsiiyey darajada ku hor qoran kana tirsan Ciidanka Booliiska Soomaaliyeed

| *No* | *Darajada* | *Magaca* | *Loo Dallacsiiyay* |
|---|---|---|---|
| 1. | G/dhexe | **Abshir Maxamed Xuseen Barre** | G/sare |

### Qodobka 2aad

Sarkaalkaan ku tilmaaman xeerkaan wuxuu xaq u yeelanayaa wixii xuquuq oo ay kafaalo qaadayaan Shuruucda Xagga sare ku xusan & wixii xuquuq oo xeerka ciidamadu tilmaamayo

### Qodobka 3aad

Waxa uu Xeerkaan dhaqangelayaa isla maalinta uu Madaxweynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabaci doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S

**MUQDISHO: 10/06/2019**

Madaxweynaha J.F.S
Maxamed Cabdullaahi Maxamed (Farmaajo)

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
WAA LA DIIWAAN GELIYEY
DIIWAAN NO: HAW/31/2019
TAARIIKH 20/7/2019
SAXIIXA HANTIDHAWRKA GUUD

**XEER MADAXWEYNE LR. 158** Taariikh: 10/06/2019

**DALLACSIIN SARAAKIIL & L/SARAAKIIL**

**MADAXWAYNAHA J.F.S**

**MARKUU ARKAY**: Qodobka 87aad, Farqadda 1aad, Xarafka 'C' iyo Farqadda 2aad ee Dastuurka KMG

**MARKUU ARKAY**: Qodobka 90aad, Xarafka 'B' ee Dastuurka J.F.S

**MARKUU ARKAY**: Xeer Lr. 15 ee 06/04/1960 kuna saabsan Dhismaha Xoogga Dalka Soomaaliyeed

**MARKUU TIXGELIYAY**: Soo jeedinta Taliyaha Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed Lr. XTC/XDS/519/19 Taariikh: 22/05/2019 kuna saabsan Soo Jeedin Dallacsiin Saraakiil & L/Saraakiil

**MARKUU GARWAAQSADAY**: Mudnaanta ay mudan yihiin in la Dallacsiiyo Saraakiishaan

***Waxuu Madaxweynaha soo saaray Xeerkaan***

**Qodobka 1aad**

Laga bilaabo marka uu Madaxweynaha saxiixo Xeerkaan, waxaa Saraakiisha Magacyadooda hoos ku qoran loo dallacsiiyey darajada ku hor qoran midwaliba kana tirsan Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed

| ***No*** | ***Darajada*** | ***Magaca*** | ***Loo Dallacsiiyay*** |
|---|---|---|---|
| 1. | G/le X 10734 | Cabdullaahi Nuur Cawaale | G/dhexe |
| 2. | Dhamme X31862 | Ibraahim Maxamed Maxamuud | G/le |
| 3. | L/X/le X 7169 | Saciid Ibraahim Maxamed | Dhamme |
| 4. | L/X/le X 10734 | Axmed Saacid Cali | Dhamme |
| 5. | X/le X 6959 | Cabdi Xassan Xaayoow | L/x/le |
| 6. | Dr | Ayuub Xasan Cilmi Cumar | L/x/le |
| 7. | Dr | Xasan Cabdullahi Aadam Cali | L/x/le |
| 8. | Dr | Cabdikaamil Cabdullaahi Maxamed Raage | L/x/le |
| 9. | Dr | Xasan Cabdullahi Aadam Diini | L/x/le |
| 10. | Dr | Cabdirashiid Cali Casir Raage | L/x/le |
| 11. | Dr | Shukri Xasan Axmed Cumar | L/x/le |

| | | |
|---|---|---|
| 12. Dr | Saddaam Cabdullahi Cusman Hilowle | L/x/le |
| 13. Dr | Faysal Cabdi Maxamed Hiraabe | L/x/le |
| 14. Dr | Maxamed Cusman Cosoble Raage | L/x/le |
| 15. Dr | Cabdulgaadir Mire Rooble Cilmi | L/x/le |
| 16. Dr | Maxamed-amiin Cali Rooble Cilmi | L/x/le |
| 17. Dr | Mahad Axmed Sabriye Jimcaale | L/x/le |
| 18. Dr | Cabdiwali Maxamed Maxamud Ismaaciil | L/x/le |
| 19. Dr | Caisha Cali Maxamuud Cumar | L/x/le |
| 20. Dr | Cabdisalaan Muuse Faarax Xeyd | L/x/le |
| 21. Dr | Cali Cabdullaahi Warsame Faarax | L/x/le |
| 22. Dr | Sharma'arke Abuukar C/Raxman Good | L/x/le |
| 23. Dr | Cabdinaasir Ciise Maxamud Dhicisow | L/x/le |
| 24. Dr | Saalax Axmed Saalax Nuur | L/x/le |
| 25. Dr | Cabdimaalik Maxamed Xashi Cilmi | L/x/le |
| 26. Dr | Xasan Maxamed Maxamud Kulmiye | L/x/le |
| 27. Dr | C/Raxmaan Axmed Maxamud Maalin | L/x/le |
| 28. Dr | Cabbaas Cumar Maxamuud Muumin | L/x/le |
| 29. Dr | Faadumo Cabdisamad Max'ed Salm | L/x/le |
| 30. Dr | Maxamed Cali Cabdullahi Maxamed | L/x/le |
| 31. Dr | Cabdiraxman C/llaahi Max'uud Baraale | L/x/le |
| 32. Dr | Farduus C/raxmaan C/llaahi Kaamil | L/x/le |
| 33. Dr | Mustaf Xuseen Cabdulle Aadan | L/x/le |
| 34. Dr | Cabdullahi Xasan Maxamed Cilmi | L/x/le |
| 35. Dr | C/fataax Sacdi Maxamed Cilmi | L/x/le |
| 36. Jaamici | ibraahim Maxamed Axmed Xasan | L/x/le |
| 37. Jaamici | Cali Baashi Sheekh Xuseen Afoow Caddow | X/le |
| 38. Jaamici | Faiso Cumar Aadan Xasan | X/le |
| 39. Jaamici | Cabdirisaaq Xuseen Cadow Maxamed | X/le |
| 40. Jaamici | Mustaf Calas Jimcaale Rooble | X/le |
| 41. Jaamici | Axmed Cali Aadam Ibraahim | X/le |
| 42. Jaamici | Nuuradiin Mustaf Cabdulqaadir Cali | X/le |
| 43. Jaamici | Axmed cabdullahi Cismaan Cali | X/le |
| 44. Jaamici | Ceyni Aweys Axmed Isaaq | X/le |
| 45. Jaamici | Ismaaciil Cabdi Maxamed Maxamuud | X/le |
| 46. Jaamici | Zakariye Xuseen Geedi Faarax | X/le |
| 47. Jaamici | Maxamed Cabdullaahi Muuse Diiriye | X/le |
| 48. Jaamici | Ikraam Maxamed Qaasim Cabdullahi | X/le |
| 49. Jaamici | Maxamed Cali Maxamed Axmed | X/le |

| | | | |
|---|---|---|---|
| 50. | Jaamici | Cabdicasiis Maxamuud Maxamed Warsame | X/le |
| 51. | Jaamici | Cabdiraxman Mandi Jabiin Xerow | X/le |
| 52. | Jaamici | Nuur Maxamuud Maxamed Axmed | X/le |
| 53. | Jaamici | Cali Maxamed Abukar Maxamed | X/le |
| 54. | Jaamici | Xasan Cali Maxamed Jimcaale | X/le |
| 55. | Jaamici | Cabdiraxman Xasan Jimcaale Maxamed | X/le |
| 56. | Jaamici | Ubax Maxamud Xuseen raage | X/le |
| 57. | Jaamici | Deeqo Saacid Saciid Ciise | X/le |
| 58. | Jaamici | Cabdullahi Cabdirashiid Jaamac Faarax | X/le |
| 59. | Jaamici | Idil Maxamed Xasan Yusuuf | X/le |
| 60. | Jaamici | Sahro Xasan Macalim Ibraahim | X/le |
| 61. | Jaamici | Muno Cali Beere Caddow | X/le |
| 62. | Jaamici | Yuusuf cabdullahi Aadam Xasan | X/le |
| 63. | Jaamici | Maxamed Bile Xasan Mursal | X/le |
| 64. | Jaamici | Cabdirisaaq Macalim Isxaaq Ibrahim Salaad | X/le |
| 65. | Jaamici | Ciise Macalim Isxaaq Xasab Cabdiraxman | X/le |
| 66. | Jaamici | Suldaano Macalim Shariif Maxamed | X/le |
| 67. | Jaamici | Suleymaan Abuukar Haashim Cabdi | X/le |
| 68. | Jaamici | Cabdullaahi Nuur Mahadalle Dhiblaawe | X/le |
| 69. | Jaamici | Axmed Ibraahim Xasan Cabdulle | X/le |
| 70. | Jaamici | Suleymaan Cabduulahi Maxamed Xasan | X/le |
| 71. | Jaamici | Cabdikariim Xashi Kaariye Cumar | X/le |
| 72. | Jaamici | Cabdirisaaq Cabdullahi Maxamed Muuse | X/le |
| 73. | Jaamici | Cali Cabdinuur Jaamac Xersi | X/le |
| 74. | Jaamici | Sadiiq Maxamed Faarax Maxamuud | X/le |
| 75. | Jaamici | Istaahil Cumar Maxamed Guuleed | X/le |
| 76. | Jaamici | Cabdirisaaq Maxamuud Xeyle | X/le |
| 77. | Jaamici | Cabdixafiid Axmed Maxamed Faarax | X/le |
| 78. | Jaamici | Cumar Axmed Maalin Waasuge | X/le |
| 79. | Jaamici | Yaxye Xasan Cabdi Xiireey | X/le |
| 80. | Jaamici | Abshir Xuseen Xasan Timacadde | X/le |
| 81. | Jaamici | Idil Iraad Maxamed Cali | X/le |
| 82. | Jaamici | Yaasmiin Yuusuf Caddow Abuukar | X/le |
| 83. | Jaamici | Aadam Cismaan Ibraahim Soomane | X/le |
| 84. | Jaamici | Maxamed Macalim Isxaaq Xasan Guure | X/le |
| 85. | Jaamici | Jaamac Maxamud Maxamed Yuusuf | X/le |
| 86. | Jaamici | Muxubo Maxamed Xasan Salaad | X/le |
| 87. | Jaamici | Iqra Macow Siyaad Guuto | X/le |

| | | |
|---|---|---|
| 88. Jaamici | Khaalid Cabdi Shariif | X/le |
| 89. Jaamici | Salaado Maxamed Xaashi Xasan | X/le |
| 90. Jaamici X28604 | Maxamuud Axmed Cali Muxumed | X/le |
| 91. Jaamici X28823 | Xasan Maxamuud Maxamed | X/le |
| 92. Jaamici X28247 | Liibaan Maxamed Cabdulle Xirsi | X/le |

## Qodobka 2aad


Sarkaalkaan ku tilmaaman xeerkaan wuxuu xaq u yeelanayaa wixii xuquuq oo ay kafaalo qaadayaan Shuruucda Xagga sare ku xusan & wixii xuquuq oo xeerka ciidamadu tilmaamayo

## Qodobka 3aad

Waxa uu Xeerkaan dhaqangelayaa isla maalinta uu Madaxweynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabaci doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S

**MUQDISHO: 10/06/2019**

Madaxweynaha J.F.S
Maxamed Cabdullaahi Maxamed (Farmaajo)



**SHARCI LR. 11** TAARIIKH: 020/06/2019

# ANSIXINTA HESHIISKA (CAHDIGA) XUQUUQDA DADKA NAAFADA AH 61/106 EE DISEMBAR 2006

## MADAXWAYNAHA J.F.S

**MARKUU ARKAY**: Qodobka 87aad, Faqradda 1aad, iyo Faqradda 2aad ee Dastuurka KMG

**MARKUU ARKAY**: Qodobka 90aad, Xarafka 'F' iyo Xarafka "q" ee Dastuurka KMG

**MARKUU ARKAY**: Xeer Lr. 10aad, 11aad iyo 12aad ee Dastuurka KMG

**MARKUU ARKAY:** Warqadda Gudmoomiyaha Golaha Shacabka Ref: 5/1STDS/B-10/19, Taariikh 21/05/2019 kuna Saabsan Ansixinta HESHIISKA (CAHDIGA) XUQUUQDA DADKA NAAFADA AH 61/106 EE DISEMBAR 2006

**MARKUU TIXGELIYAY**: Baahida loo qabo in la Meelmariyo HESHIISKA (CAHDIGA) XUQUUQDA DADKA NAAFADA AH 61/106 EE DISEMBAR 2006

## WUXUU SOO SAARAY SHARCIGAN:

## Qodobka 1aad

Laga Bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 20/06/2019, Madaxweynaha JFS waxa uu saxiixay HESHIISKA (CAHDIGA) XUQUUQDA DADKA NAAFADA AH 61/106 EE DISEMBAR 2006

## Qodobka 2aad

Waxa uu Sharcigan dhaqan gelayaa isla marka uu madaxweynuhu saxiixo waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed.

**MUQDISHO: 20/06/2019**

Madaxweynaha J.F.S
Maxamed Cabdullaahi Maxamed (Farmaajo)

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
WAA LA DIIWAAN GELIYEY
DIIWAAN NO: HAN/18/20 19
TAARIIKH 20/7/2019
SAXIIXA HANTIDHAWRKA GUUD

# Heshiiska Xuquuqda Dadka Naafada ah

Waxaa lagu qabatimay qaraarkii golaha loo dhanyahay ee tirsigiisu ahaa 61/106 ee 13 December 2006

## GOGOLDHIG

**Dowladaha ku jira heshiiskaan:**

(a) Iyadoo la tixgalinayo mabaadii'da ku xusan xeerka qarammada midoobay ee aqoonsanaya sharafta soo jireenka ah iyo xuquuqda maguurtada ah ee ay leeyhiiin dhammaan xubnaha qoysaska bini'aadamka ah, asaaskana u ah xorriyadda, cadaaladda iyo nabadda caalamka;

(b) Iyadoo la garawaaqsanayo in baaqa caalamiga ah ee qarammada midoobay ee xuquuqda aadanaha iyo labadii qaraar ee caalamiga ahaa ee khuseeyay xuquuda aadanaha ay qeexayaan in qofkasta xaq u leeyahay ayadoo aan la kala sooceyn inuu helo dhamaan xuquuqda iyo xorriyadaha bini'aadanimo ee loo abuuray;

(c) Iyadoo la xoojinayo caalaminamada, qaybsanaan la'aanteeda, isku xirnaanteeda, iskaabiddeeda dhamaan xuquuqda aadanaha ah xoriyadaha asaasiga ah iyo sida ay laga mamaarmaanka u tahay in ay dadka naafada ahi helaan xuquuqda asoo dhameystiran si aan faquuq lahayn;

(d) Iyadoo dib loo eegayo heshiiska caalamiga ahaa ee xuquuqda dhaqaalaha, bulshada iyo hidaha (dhaqanka), heshiskii caalamiga ahaa ee xuquuqda madaniga ah iyo siyaasadda, heshiiska caalamiga ahaa ee cirib tirka dhamaan noocyada takoorka ee ku saleysan isirka, heshiiska cirib-tirka dhamaan noocyada takooridda haweenka, heshiiska kasoo horjeeda jirdilka iyo dhamaan hab dhaqan kasta noocuu doono ha ahaadee ee ku dhisan naxariis darro; bani'aadantimo la'aanta iyo quursi ama bahdil, heshiiska xuquuqda caruurta, iyo heshiiska caalamiga ah ee ilaalinta xuquuqda dhamaan shaqaalaha soo galootiga ah iyo xubnaha ka tirsan qoysaskooda;

(e) Iyadoo la garwaasanayo in naafanimadu ay tahay fikrad wali horumareysa, islamarkaana in naafanimadu ka timaado islafalgalka dadka naafada ah iyo xannibaadaha, duruufaha iyo deegaanka ku xeeran taas oo u diidaysa in ay la sameeyaan bulshadooda ka qeybgal dhameystiran oo wax ku ool ah oo ku dhisan sinnaan;

(f) Iyadoo la qirayo ahmiyadda ay leedahay mabaadii'da iyo siyaasadaha tusaaleynta ah ee ku xusan barnaamijka waxqabadka caalamiga (world program of action) ee quseeya dadka naafada ah iyo xeerarka mideysan ee la xiriira helitaanka fursadaha ay u simmanyihiin dadka naafada ah si loo xoojiyo dejinta iyo qiimeynta siyaasadaha, qorshayaasha, barnaamijyada iyo talaabooyinka heer qaran, gobol iyo caalami, si sare loogu qaado fursadaha sinaanta ee dadka naafada ah;

(g) Iyadoo hoosta laga xariiqayo muhiimadda ay leedahay in arrimaha quseeya dadka naafada ah laga dhigo qeyb muhiim ah oo ay tahay in ay qeyb ka noqdaan istiraatiijiyadda horumarka waarra ( ee la wada hiigsanayo);

(h) Iyadoo sidoo kale loo aqoonsanayo in takoorka ama fuquuqidda loogu gaysto qof naafada ah naafanimadiisa awgeed ay macnaheedu tahay xad-gudub ka dhan ah sharafta iyo qiimaha ma guurtada ah ee qofka bini'aadamka ah leeyahay;

(i) Iyadoo sidoo kale si qoto dheer loo aqoonsanayo kala duwnaanshaha dadka naafada ah;

(j) Iyadoo la qirayo baahida loo qabo sii xoojinta iyo ilaalinta xuquuqda aadanaha ee dadka naafada ah kuwaas oo ay ka mid yihiin dadka u baahan taageerada xoogan ama in fiiro gaar ah loo yeesho;

(k) Iyadoo xisaabta lagu darsanayo walwalka ka jira ee ah in ay jiraan heshiisyadaas iyo qoraaladaas caalamiga ah ee kala duwan, haddana ay

dunida daafaheeda wali kasii socdaan meel ka dhacayo iyo caqabado lid ku ah xuquuqda ay leeyihiin dadka naafada ah iyo in ay ka mid noqdaan bulshada (dhib iyo dheefba) si la mid ah sida dadka kale (ee lixdooda lixaad qaba);

(l) Iyadoo la garwaaqsanayo muhiimadda uu leeyahay iskaashi caalami oo heersare ah oo dunidu ka yeelato sidii sare loogu qaadi lahaa loona horumarin lahaa duruufaha nololeed ee dadka naafada ahi ay ku sugan yihiin dal kasta, gaar ahaan kuwa wadamada soo koraya;

(m) Iyadoo la aqoonsanayo kaalinta wax ku ool ka ah ee hadda iyo hadhwba ay suura galka tahay in dadka naafadu ay ka galaan horumarinta, barwaaqeynta iyo kala duwanaanshaha bulshooyinkooda iyo dhiirigelinta in dadka naafada ahi ay helaan xuquuqdooda aadamiga iyo xorriyadda asaasiga ah iyo in kaalin buuxda laga siiyo naafadasidii ay gacan uga geysanlahaayeen xoojinta dareenkooda lahaanshaha waddaniyadeed, iyo xaqiijinta horumar la taaban karo oo laga gaaro horumarinta dhaqan dhaqaale ee bulshada iyo ciribtirka saboolnimada;

(n) Iyadoo la garowsanayo muhiimadda ay leedahay in dadka naafada ah ay helaan madaxbanaani iyo awood ay aayahooda kaga tashankaraan;

(o) Iyadoo ay muuqato in ay haboon tahay in fursad loo siiyo dadka naafada ah sidii ay si firfircoon uga qeyb qaadan lahaayeen arrimaha go'aan qaadashada siyaasadaha iyo barnaamijyada, oo ay ku jiraan kuwa sida khaaska ah u khuseeya iyaga;

(p) Iyadoo laga walaacsanayahay duruufta adag ee ay ku sugan yihiin dadka naafad ahi kuwaas oo ay soo wajahaan noocyo farabadan oo meel ka dhacyo ah oo kala duwan oo ku salaysan faquuq dhanka isirka, midabka, jinsiga (lab iyo dhadigg), luuqadda, diinta, fikir siyaasadeed ee ay aaminsanyhiin iyo fikir kaleba, ama qowmiyadda isir ama dal ee ay

kasoo jeedaan, xaaladda hantida, goobta ay ku dhasheen dhalashada ama xaalad kale oo ay ahaatoba;

(q) Iyadoo la garwaaqsanyahay in ay inta badan haweenka iyo gabadhaha naafada ahi ay khatar badan kala kulmaan guriga dhexdiisa iyo dibaddiisaba, taasoo isugu jirta dhaawac loo gaysto ama xadgudub, dayac iyo hab dhaqan aan habooneyn oo lagula kaco si xun oo loola dhaqmo iyo dhiig miirasho lagu sameeyo (hadday ahaan lahayd ini si xaq darro ah loogu shaqeysto, xuquuqdooda loo duudsiiyo ama xitaa si xaqdaro ah galmo ahaan looga faa'ideysto);

(r) Iyadoo garwaaqsanaayo in ay haboon tahay in caruurta naafada ah ay si buuxda ugu raaxaystaan dhamaan xuquuxda aadamiga iyo xorriyadaha aasaasiga ah ee ay kala simmanyhiin caruurta kale iyadoo la tixraacayo waajibaadka iyo mas'uuliyadda ay dusha u riteen dawladaha qeybta ka heshiiska xuquuqda caruurta si loo gaaro yoolkaas isaga ah (dhowrista xuquuqda caruurta naafada ah);

(s) Iyadoo la adkaynayo baahida loo qabo in lagu daro fikradad jinsiga (lab iyo dhadigg) dhamaan dadaalada lagu doonayo in lagu dhiirigeliyo in ay dadka naafada ah ay si buuxda u helaan dhamaan xuquuqdooda aadamiga iyo xorriyadahooga aasaasiga ah;

(t) Iyadoo hoosta laga xariiqayo in dadka naafada ah badankoodu ay ku noolyihiin duruufo saboolnimo iyo ayagoo isla markaa la qirayo baahida dareen loo qabo in xal laga gaaro ama layareeyo saameynta xun ee ay saboolnimadu ku leedahay dadka naafada ah;

(u) Iyadoo maanka lagu hayo in hirgelinta xaalad nabadgeliyo iyo amni oo ku dhisan xushmad buuxda oo loo hayo ujeedooyinka iyo mabaad'iida ku xusan qaraarka qaraamada midoobay iyo qoraalada taabagalka ah ee ka hadlaya dhawrista xuquuqda aadamaha ay kuwaasi yihiin kuwa laga mamaarmaanka u ah in ilaalin buuxda loo helo dadka naafada ah

gaarahaan marka lagu jiro xaaladaha isku dhacyada hubeysan iyo dulaanka iyo qabsashada shisheeye;

(v) Iyadoo la qirayo in suurtagalnimada ah in la gaaro jawi la taaban karo oo dadka naafada ah ay ku helaan deegaan ka tarjuma xaaladooda dhaqan dhaqaale iyo bulsho iyo adeegyada caafimaad, waxbarasho war helid iyo xiriir ay muhiim u tahay in loo suurtagaliyo dadka naafada ah sidii ay ku hanan lahayaayeen dhamaan xuquuqdooda aadamiga iyo xorriyadahooda asaasiga ah;

(w) Iyadoo la ogsoonyahay in qofka waajib ka saaranyahay shakhsiyaadka kale iyo bulshada uu ka tirsan yahay, uu dhabarka u ridanayo mas'uuliyadda ah in uu isku taxaluujiyo sidii uu gacan uga geysan lahaa xoojinta xuquuqda lagu aqoonsaday sharciga caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha;

(x) Iyadoo laga dheregsanayahay in qoysku yahay unugga dabiiciga ah, asaasigana ahee bulsho, iyo in uu mudanyahay in bulshada iyo dawladuba difaacaan, iyo in dadka naafada ah iyo xubnaha qoyskoodu ay mudan yihiin difaac iyo kaalmo laga mamaarmaan ah si loogu suurta galiyo qosaska in ay si simman oo dhamaystiran uga qayb qaataan xuquuqda dadka naafada ah;

(y) Iyadoo lagu qanacsanyahay in si loo horumariyo loona ilaaiyo xuquuqda iyo sharafta dadka naafada ah heshiiskan caalamiga ah oo dhameystiran iskuna xiran uu si wayn uga qaybqaadan doono wax ka qabashada dayaca haysta dadka naafada ah, iyo dhiiri galinta sidii dadka naafada ah ay kaalin firfircoon uga qaadan lahaayeen dhinacyada madaniga, siyaasadda, dhaqaalaha, bulshada iyo dhaqanka iyadoo ku saleysan fursado loo simanyahay, haddii ay ahaan lahaayeen dawladaha soo koraya iyo kuwa horayumaray.

**WAXAY DAWLADAHAASI ISKU RAACEEN SIDAN SOO SOCOTA:-**

## Qodobka 1-aad

## Ujeedo

Ujeedada laga leeyahay axdigaan ama heshiiskan waa in kor loo qaado la ilaaliyo, la dammaanad qaado, in dhaman dadka naafada ah ay ku raaxeystaan dhamaan xuquuqaha aadamiga iyo xorriyadaha aasaasiga, iyadoo loo simanyahay iyo xoojinta iyo xushmeynta karaamada aasaasiga ee maguurtada ah.

Waxaa soo galaya eray cilmiyeedka (dadka naafada ah) dhamaan dadka la il-daran cillado jir ahaaneed, caqli, maskaxeed ama dareen oo mudo dheer dhantaashay, taasoo ka hor istaagikarta in ay kaalin firfircoon ka galaan bulshada ay ku dhex nool yihiin si la simman dadka aan naafada ahayn.

## Qodobka 2-aad

## Qeexitaan / Ereybixin

**Ujeedooyinka heshiiskaan:-**

**"**Is-gaarsiin waxaa soo hoos galaya luqadaha, qoraalada la soo bandhigo, xarfo la taaban karo oo (dadka indhaha la' wax lagu baro) hab farriimeed ama xiriir dareenka taabashada ku dhisan, weeraha ama ereyada farta waaweyn lagu daabaco, aaladaha tiknoolojiyada ee la heli karo (sida kumbiyuutarka, si kasta wax usoo gudbiyo ama u shaaciya sida cod, sawir, qoraal iyo filim ahaan intaba), iyo sidoo kale moodooyin iyo hanaan farriimo la isugu gudbiyo oo xooggan ( sida qalab weeyneeya qoraalka ama codka) bedelna u noqon kara sida qalab fariimaha maqal ahaan u tabiya sidii qof wax u akhriya ama wax ku tabinaya luqad si fudud loo fahmi karo iyo hab ama hanaan kasta oo la heli karo in fariin lagu gudbiyo iyadoo la adeegsanayo xog maalka iyo isgaarsiinta uu fududeeyay cilmiga farsamada iyo agabka isgaarsiinta casriga ah.

**"Afka/Luqadda":** waxaa soo galaya hadalka timaamaha iyo wixii kale oo habab la isku fahmi karo ah oo aan hadal ahayn.

**“Faquuqidda ku salaysan Naafanimada”;** waxaa loola jeedaa takoor dayrin, xayiraad ama xannibaad ku salaysan naafanimo taasoo ujeedada ama raadka ka dhalanaya uu yahay awood dhimid ama dhiciseyn lagu sameeyo aqoonsiga ku raaxaysiga xuquuda aadanha ee asaasiga ah taasoo naafadu ay dadka kale ula simmanyihiin dhinacyada siyaasadda, dhaqaalaha, bulshada dhaqanka, arrimaha bulshada rayidka ah iyo dhinac kale oo kasta. Waxaa kale oo soo galaya nooc kasta oo faquuq ah sida in laga hor istaago naafada helidda talaabooyin ama maamuus macquula ah oo adeegyadooda loogu fududeeyo.

**“tallaabooyinka ama maamuuska macquulka ah”:** waxa laga wadaa dib u habeyn iyo talaabooyin haboon oo macquula oo aan keenayn culeys aan loo baahneyn, meeshii looga baahdo xaalad cayiman si loo damaanaqaado in dadka naafada ah ay ku raaxaystaan ama adeegsadaan dhamaan xuquuqdooda aadanaha ee asaasiga ah iyagoo ula siman dadka kale.

**“naqshadeynta guud”:** Waxaa looga jeedaa in loo qaabeeyo wax soo saarka deegaanka barnaamijyada iyo adeegyada kale ay noqdaan kuwo dadkoo dhan oo ay ku jiraan naafadu ay adeegsn karaan sida ugu wanaagsan uguna macquulsan iyo loo baahanyahay in wax ka bedelid iyo naqshad gooni ah oo la sameeyo. “naqshadeynta guud ah” waxaa soo geli kara qalabka sida gaar ah u caawiya qeybo ka tirsan naafada inta baahida loo qabo ay taagan tahay.

## Qodobka 3-aad

## MABAADII’DA GUUD

**Mabaadii’da heshiiskaan waxay noqoneysaa:**

(a) Xushmeynta karaamada asalka ah ee bini’aadamku leeyahay iyo madaxbanaanida qofka oo ay ka mid tahay xoriyadda qof kastaa u leeyahay inuu aayihiisa ka tashan karo.

(b) Takoorid la’aan;

(c) Inay si buuxda oo wax ku ool ah uga qeyb qaataan islamarkaasna bulshada dhexdeeda loo dhan yahay.

(d) Xushmeynta kala duwanaanshaha iyo in loo aqbalo dadka naafada ah in ay yihiin dad ka mid ah kala duwanaanshaha iyo dabeecadda bini'aadamku usamaysan yahay.
(e) Usinnaanta fursadaha
(f) Suurtagalinta gaaridda (fursadahaas);
(g) Sinaanta raga iyo dumarka
(h) Xushmeynta awoodaha horumaraya ee caruurta naafada ah iyo qaddarinta xaqa ay caruurta naafada ahi u leeyihiin ilaalinta haybtooda;

## Qodobka 4-aad

## WAAJIBAADKA GUUD

1. Waxay ballan qaadanayaan dawladaha ku jira heshiiska inay hubiyaan oo ay sara u qaadaan ka shaqeysiinta iyo dar-dar-gelinta dhamaan xuquuqda aadanaha iyo xoriyadaha aasaasiga ah ee ay leeyihiin dadka naafada ah ayagoo aan lagu takoreyn naafanimadooda. Si hadaba yoolkaas loo hergeliyo waxa dawladaha qeybta ka ah heshiiskaan balan qaadayaan sida soo socota:-

(a) In ay qaadayaan talaabooyinka ku haboon oo loo qaado dhinacyada sharci dejinta maamulka iyo tallaabooyin kaleba si loo meel mariyo xquuqda lagu aqoonsaday ama lagu xusay heshiiskan;
(b) In ay qaadayaan dhamaan tallaabooyinka munaasibka ah, oo ay ka mid tahay talaabo loo qaado dhanka sharci dejinta; si wax looga bedelo ama loo xoojiyo sharciyada jira xeerarka caadooyinka, iyo dhaqamada kuwaas oo keenaya faquuqidda dadka naafada ah;
(c) In ay xaqiijinyaan in dhamaan siyaasadahooda iyo barnaamijyadooda ay ku ilaalinayaan oo ay ku xoojinayaan xuquuqda aadanaha ee ay leeyihiin dadka naafada ah;
(d) In ay joojiyaan ku dhaqaaqidda fal ama dhaqan kasta oo ka hor imaanaya heshiiskan, iyo in ay damaanad qaadaan in madaxda iyo haya'daha dawladda ay u dhaqmayaan si waafaqsan heshiiskan;

(e) In ay qaadaan dhamaan talaabooyinka munsaasibka ah si loo cirib-tiro takooridda ku saleysan naafanimada, taasoo ay u geystaan qof, hay'ad ama shirkad kasta oo gaar loo leeyahay;

(f) Inay dhiri galiyaan korna u qaadaan cilmi barista iyo tayaynta badeecadaha adeegyahda, qalabka iyo fududeeyayaasha dhamaantood si guud loo qaabeeyo; sida lagu qeexay qodobka 2-aad ee heshiiskaan kasoo u baahan qabatinka ugu yare e suurta galka ah iyo in uu ku fadhiyo kharashka ugu yar si loo kaafiyo baahida khaaska ah ee qofka naafada ah qabo iyadoo adeegyadaas laga dhigayo kuwa la heli karo lana adeegsan karo iyo in la dhiiri galiyo habka naqshadeynta caalamiga ah marka la dajinayo halbeegyada iyo mabaadiida tusmaynta ama hagidda;

(g) Inay xoojiyaan kuna sameeyaan cilmibaaris iyo tayeeyan farsamada casriga ah iyo in farsamadaas ay helikaraan naafadu, adeegsan karaana iyadoo ay ku jiraan farsamada casriga ah ee dhanka isgaariinta iyo xogaha iyo qalab kasta oo u sahlaya isu socodka iyo farsamooyinka casriga ah ee caawiya kuna habboon naafada iyo wixii kale oo hababab qalab ama adeeg ah oo caawin kara naafada;

(h) In ay siiyaan dadka naafada ah warbixin iyo xog la helikaro oo ku saabsan qalabka iyo hababka u sahleya socodka iyo wixii farsamo cusub ah ama adeegyo ah ee gacan siinaya naafada;

(i) In ay kor u qaadaan tababarrada ay siiyaan shaqaalaha takhasuska leh ( si xeel dheer wax u bartay) iyo xirfadlayaasha la shaqeeya dadka naafada ah iyadoo lagu tababarayo xuquuqda lagu aqoonsaday heshiiskan; si loo hagaajiyo kaalmada iyo adeegyada ee ay kafaalo qaadayso xuquudaas.

2. Arrimaha ku saabsan xuquuqda dhaqaalaha bulshada iyo hiddaha, dawlad kasta oo ka mid ah dawladaha ku jira heshiskan waa inay balanqaadaan in ay si tar-tiib tar-tiib ah intii karaankooda ah iyagoo la kaashaneysa caalamka, hirgaliso gabi ahaan xuquuqda naafada iyadoo

aan meel lagaga dhicin waajibaadyada ku xusan heshiiskaan ee ay khasabka tahay in dhaqso loo fuliyo si waafaqsan qaanuunka caalamiga ah.

3. Dawladaha ku jira heshiiskan waa in ay si buuxda ugala tashadaan iyagoo u maraya hay'adaha matalaya dadka naafada ah oo ay ka mid yihiin caruurta nafada ah sharci dejinta iyo fulinta siyaasadda looga gol leeyahay hirgelinta heshiiskan iyo in si buuxda looga qeyb galiyo naafada iyo hay'adaha matala wxii hawlo go'aanqaadasho ah oo kale ee khuseeya dadka naafada ah.
4. Ma jiro qeyb heshiiskan ka mid ah oo loo fasiran karo in uu saameynayo ama wax u dhimi karo shuruuc kasta oo si ka badan (sida heshiiskan qabo) u xaqiijinaya xuquuqda dadka naafada ah, kaas oo ku xusan sharciga lagaga dhaqmo dawladda qeybta ka ah heshiiskaan ama sharciyada caalimiga ah ee looga dhaqmo dawladaas. Ma banana in lagu soo rogo xanibaad ama ka talaabsasho xaq kasta oo ka mid ah xuquuqda aadamaha iyo xoriyaadka aasaasiga ah ee la aqoonsanyahay ama ka jira dawlad kasta oo qeyb ka ah heshiiskan ayadoo lagu dhaqmayo sharci heshiis xeer ama caado iyadoo xujo laga dhiganayo in heshiiskan hada ah aanu aqoonsanayn xuquuqdaas iyo xorriyadkaas, ama uu u aqoonsan yahay si kooban.
5. Qodobbada heshiiskaan waxa uu ku fuulayaa (loo addgsanayaa) dhamaan qeybaha dawladaha federaalka ah ka kooban yihiin iyadoo aysan jirin wax xaddidnaan ah ama wax laga soo reebayo toona.

## Qodobka 5-aad
## SINNAANTA IYO TAKOORID LA'AANTA

1. Dawladaha ku jira heshiiskaan waxa ay aqoonsanyihiin in dadka oo dhan u simanyihiin sharciga hortiisa iyo waxa u sababayo , iyo in ay xaq u leeyihiin inay ilaalin ka helaan sharciga iyo inay ka faa'ideystaan sharciga iyadoon fuquuq cid gaar ah loo geysanayaa jirin.

2. Dawladaha ku jira heshiiiska waa in ay mamnuucaan dhamaan noocyada takooridda ku saleysan naafanimada iyo in ay u damaaanad qaadaan dadka naafada ah sharci wax ku ool ah oo ka ilaaliya faquuqa.
3. Si kor loogu qaado sinnaanta lona ciribtiro takooridda waa in dawladaha ku jira heshiiska qaadaan talaabooyin munaasib ah si ay ugu xaqiijiyaan dadka naafada ah talaabooyinka loogu fududayn karo adeegyada macquulka ah.
4. Lagama soo qaadi karo (looma tix galin karo) takoori sida heshiiskaan ku cad talaabooyinka cayiman kuwaas oo laga mamaarmaan u ah in la dar dar geliyo oo laxaqiijiyo sinaan dhab ah (de facto) oo loo helo dadka naafada ah.

**Qodobka 6-aad**

**HAWEENKA NAAFADA AH**

1. Waxaa ay dawladaha qeybta ka ah heshiiskaan aqoonsanayaan in haweenka iyo gabdhaha naafada ah la kulmaan qeybaha kala duwan ee takooridda, sidaa daraadeedna ay qaadayaan talaabooyin si buuxda loogu xaqiijiyo haweenka iyo gabdhaha naafada ah helidda iyo ku raaxeysiga xuquuqdooda aadanimo iyo xoriyadahooda asaasiga ah si loo wada simanyahay.
2. Dawladaha qeybta ka ah heshiiskani waa in ay qaadaan talaabooyinka laga mamaarmaanka ah si loo damaanad qaado in horumar buuxa iyo awood siin loo sameeyo haweenka naafada ah si haweenka loogu xaqiijiyo adeegsiga xuquuqda aadamaha iyo xorriyadaha aasaasiga ah ee ku xusan heshiiskaan.

**Qodobka 7-aad**

**CARUURTA NAAFADA AH**

1. Dawladaha qeybta ka ah heshiiskan waa in ay qaadaan talaabooyinka laga mamaarmaanka ah si carruurta naafada ah ay si buuxda ugu

raaxeystaan dhamaan xuquuqda aadamaha iyo xorriyadaha asaasiga ah ee ay kala simanyihiin caruurta kale.

2. Waa in tixgalinta iyo mudnaanta ugu muhiimsan la siiyaa danta ugu wanaagsan ee carruurta marka ay timaado hirgalinta talaabooyin ama hanaanka quseeya caruurta naafada ah.
3. Dawaladaha qeybta ka ah heshiiskan waa in ay hubiyaan in carruurta naafada ahi ay si xor ah u cabiri karaan fikradahooda ku aadan dhamaan arrimaha khuseeya iyadoo fikiradahooda lagu qiimaynayo hadba da'da ay jiraan iyo caqligooda taasna waa in ay kala simmanyihiin caruurta kale, waana in la siiyaa caruurtaas adeegsiga xaqaas iyadoo la jaanqaadaysa hadba heerkooda da'da iyo naafanimadooda.

## Qodobka 8-aad

## WACYI GELINTA

1. Dawladaha qeybta ka ah heshiiskaan waa inay ballan qaadaan in ay qaataan tallaabooyin degdeg ah oo ku haboon siloo:-
   (a) wacyi geliyo bulshada dhmaantood laguna booriyo ilaalinta xuquuqda carruurta naafada ah oo ay ka mid tahay ilaa heer qoys iyo sare u qaadida xushmeynta xuquuqda dadka naafada ah iyo sharaftooda;
   (b) lala dagaalamo dacaayada (laga aaminsan yahay naafada) iska necbaanta iyo dhaqamada wax yeelaya dadka naafada ah oo ay ka mid tahay tan ku salaysan jinsiga ama da'da dhamaan dhinacyada nolosha;
   (c) In la xoojiyo wacyi gelinta la iskuna baraarujiyo awoodaha iyo waxqabadka dadka naafada ah ay leeyihiin.
2. Si loo gaaro arrrintaasi tilaabooyinka loo baahanyahay Waxaa ka mid ah:-
   (a) Bilaabidda iyo hirgelinta qabasha olole wacyigelineed oo wax ku ool ah oo guud taas oo looga gol leeyahay:

      (i) Xoojinta aqbalaadda xuquuqda dadka naafada ah;

(ii) Faafinta fikrado wanaagsan iyo wacyi-gelin bulsho oo qoto dheer oo ku aadan dadka naafada ah;

(iii) Dhiirrigelinta aqoonsiga xirfadaha kartida iyo aqoonta dadka naafada ah leeyihiin iyo ka qeybgalintooda goobaha shaqo iyo suuqa shaqada;

(b) Qaadashada mawqifka xushmeynta xuquuqda dadka naafada ah ee dhamaan heerarka waxbarasho oo ay ku jiraan dhamaan carruurta laga soo bilaabo marka ay aad u yar yaryihiin;

(c) Dhiirigelinta faafinta iyo soo deynta dhamaan qalabka warbaahinta in ay shaaciyaan sawir ama muuqaal ka tarjumaya dadka naafada ah oo la jaanqaada ujeedooyinka heshiiskaan;

(d) Dhiirigelinta qabashada barnaamijyo iyo tababarro wacyigelineed ee la xiriira dadka naafada ah iyo xuquuqdooda.

**Qodobka 9-aad**

**LA GAARI KARO**

1. Si awood loogu siiyo dadka naafada ah in ay u noolaadaan si madax banan hadana ay kaalintooda si buuxda uga qaataan dhamaan dhinacyada nolosha dowladaha qeybta ka ah heshiiskaan waa in ay qaadaan dhamaan talaabooyinka munaasibka ah si loo xaqiijiyo in dadka naafada ah ay u helaan si la siman dadka kale, bii'ada(deegaan) ku xeeran (sida hawada, dhulka, dhirta, biyaha IWM) habka isku socodka, xog iyo isgaariin oo ay ka mid tahay farsamada casriga ah iyo hababka isgaarsiinta iyo xogta iyo wixii adeegyo ah oo ufuran ama looqoondeeyay dadweynaha miyi iyo magaaloba. Talaabooyinka oo ay ku jirto ogaanshaha iyo ciribtirka caqabadaha ka hortaagan naafada sidii ay u gaari lahaayeen ama uga faa'ideysan lahaayeen adeegyada soo socda:-

   (a) Dhismayaasha, wadooyinka gaadiidka iyo adeegyada kale ee ku yaala guryaha gudahooda iyo dibadooda oo ay ka mid yihiin iskuulada, xarumaha caafimaadka iyo goobaha shaqada;

(b) Warbixinada iyo isgaarsiinta iyo adeegyada kale ee ka midka yihiin adeegyada elektarooniga ah iyo adeegyada loo baahdo marka xaalad deg deg ah dhacdo.

2. Sidoo kale waxay qaadayaan dawladaha qeybta ka ah heshiiskani tallaabooyin ku haboon oo looga gol leeyahay;
   (a) Dajinta halbeegyo lagu cabiro heerarka ugu hooseeya ee adeegyada iyo mabaadii'da ama xeerar hagayaal ah si loo suurta galiyo gaaridda iyo isticmaalka adeegyada gud iyadoo la faafinayo halbeegyadaan iyo mabaadii'daan lana hubinayo fulintooda;
   (b) Damaanad qaadidda shirkadaha ama wakaaladaha gaarka ah (orivate entities) ee bixiya adeegyada bulshadu inay xil iska saaraan oo xisaabta ku darsadaan sidii ay adeegyadooda uga dhigi lahaayeen kuwa gaari kara dadka naafada ah;
   (c) Siinta tababarro dhinacyada adeegyada bixiya oo ku saabsan sidii ay adeegyadooda u gaarsiin lahaayeen dadka naafada ah;
   (d) Dhajinta ama adeegsiga boorar lagu qoro luuqadda ay wax ku fahmaan indhoolayaashu iyo naafada kale oo lagu dhajiyo dhismayaasha goobaha bixiya adeegyada dadweynaha;
   (e) Diyaarinta dad iyagu takhasus ama aqoon xeeldheere u leh luqadda tilmaamaha ee wax loogu sheego naafada (indhoolayaasha, dhagoolada IWM) si khubaradaasi u hagaan dadka naafada ah ee iyaga dantu ka soo gasho goobaha bixiya adeega dadweynaha;
   (f) Dhiirigelinta dhamaan noocyada kala duwan ee kaalmo iyo taageero ee la siiyo dadka naafada ah si loo xaqiijiyo in ay helaan wixii isgaarsiin ama xiriir ah;
   (g) Dhiirigelinta dadka naafada ah inay helaan aqoonta farsamada cusub (tiknoolojiyada) hababka xogta iyo xiriirka sida interneetka IWM.
   (h) Dhiirigelinta naqshadeynta, horumarinta soo saaridda iyo qeybinta agabka hababka xogta iyo xiriirka farsamada casriga ah si waqtiba oo ay ku helaan qiima jaban.

## Qodobka 10-aad

## XAQA NOLOSHA

Dawladaha qeybta ka ah heshiiskan waxay dib u xaqiijinayaan in qof kasta uu xaq u leeyahay in uu noolaado iyagoo qaadaya talaabooyinka laga mamaarmaanka ah si loo hubiyo in dadka naafada ah ay helaan xaqaas wax ku ool ka ah si la siman dadka kale.

## Qodobka 11-aad

## XAALADAHA KHATARTA IYO XAALADAHA BANI'AADANIMO EE DEG DEGGA AH

Dawladaha qeybta ka ah heshiiskaan waxay ballan qaadayaan iyagoo eegaya waajibaadka ka saaran fulinta xeerarka caalamiga ah oo uu ka mid yahay xeerka caalamiga ah ee xuquuqda bani'aadanimada iyo xeerka caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha in ay qaadayaan talaabooyinka laga maarmaanka ah si loo hubiyo difaacidda iyo badbaadinta dadka naafada ah kuwaasoo ku sugan xaalad khatar ah, sida xalad dagaal hubaysan iyo xaalada bani'aadannimo iyo masiibooyin dabiici ah.

## Qodobka 12-aad

## AQOONSIGA SINNANTA AY DADKA NAAFDAA AH IYO DADKA KALE SHARCIGA HORTIISA USIMMAN YIHIIN

1. Dawaladaha qeybta ka ah heshiiskaan waxay dib carrabka ugu adkeynayaan in dadka naafada ah ay leeyhiin xaqa ah in loo aqoonsado dad sharcigu qabto (oo wana ku dacwoon kara lana dacweyn karo) meel kasta oo ay joogaan.
2. Dawladaha qeybta ka ah heshiiskaan waxay qirayaan inay tahay in dadka naafada ay ku raaxeystaan awooda sharciga ee dhammaan dhinacyada nolosha iyagoo taasi kala siman dadka kale.
3. Dawladaha heshiiskan qeybta ka ah waxay qaadayaan talaabooyinka ku haboon si ay ugu helaan dadka naafada ah kaalmada ay u baahan karaan markay adeegsanayaan awoodooda sharciga.

4. Dawladaha heshiiskaan qeybta ka ah waxay hubinayaan qaadidda dhamaan talaabooyinka la xiriira adeegsiga awoodda sharciyadeed iyagoobixnaya damaanadqaada ku haboon oo waxtar leh, si looga hortago in si xun loo adeegsado talaabooyinkaas si Waafaqsan xeerka caalamiga ah ee xquuqda aadanaha. Damaanadqadayaas waxa ay xaqiijinayaan in talaabooyinka la xiriira adeegsiga awood sharciyeedka ay xushmeenayaan xuquuqda rabitaanka iyo doorbididda qofka, waana in ay ka fogtahay iska hor imaad dhanka danaha ah (dano is diidan), saameyn ama wax u yeerin aan jid hayn (aan gar ahayn) waana in (talaabooyinkaasu) yihiin kuwa ku haboon oo la jaanqaadaya duruufta qofku ku sugan yahay oo ku hirgali karta waqti yar oo suurta gal ah, iyadoo ay dib u eegis iyo la socod ay ku sameynayso hay'adda markaas awooda u leh madaxbanaan oo dhexdhexaadna ka ah ama Waxaa dabagalkaas iyo dib u eegistaa sameyn kara hay'ad garsoor waana in damaanad qaadkaasu ahaadaa mid u dhigma heerka talaabooyinkaasu ay u saameyn karaan xuquuqda iyo danaha qofka.
5. Iyadoo la raacayo axkaamta qodobkaan, dawladaha qeybta ka ah heshiiskaan waa in ay qaadaan talaabooyinka ku haboon oo wax ku ool ah si loo xaqiijyo xuquuqda dadka naafada ah iyadoo ku salaysan sinnaan ay naafadu dadka kale ula simman yihiin in ay hanti yeeshaan ama dhaxal ahaan u heli karaan maamushaan hantidooda ama ay heli karaan amaahda iyo kharashaadka uu baxsho bangigu iyo noocyada kale ee amaahda maaliyeed ah, iyo in ay hubiyaan (dawladaha heshiiska ku jiraa) in dadka naafada ah aan looga qaadin hantidadooda sifo aan sharciga waafaqsaneyn oo aan laga baaraandegin.

## Qodobka 13-aad

### GAARITAANKA AMA HELITAANKA ADEEGGA GARSOORKA

1. Dawladaha heshiiskan qeybta ka waa in ay xaqiijiyaan in dadka naafada ah ay u helaan habab wax ku ool ah oo ay ku gaarsiin karaan garsoor si la simman dadka kale oo ay ka mid tahay siinta habab hawl fududayn oo la jaanqaadeysa da'dooda iyadoo looga gol leeyahay in la fududeeyo doorka wax ku ool ka ah ee ay naafadu si toos ah iyo si

dadbanba uga qeybqaadan karaan dhamaan hababka Garsoorka sharciga iyo heerarka baaritaanka danbiyada iyo heerarka kale ee bilawga ah, sida in ay markhaatiyaal noqdaan oo kale.

2. Si loo hubiyo helitaanka dadka naafada ah ee khuseeya adeega Garsoorka waxa ay dhiirigelinayaan dawladaha qeybta ka ah heshiiskan siinta tababaro ku habboon oo loo qabto dadka ka shaqeeya caddaaladda oo ay ka mid yihiin Booliska iyo shaqaalaha xabsiyada.

## Qodobka 14-aad

### XORRIYADDA QOFKA IYO AMNIGIISA

1. Dawladaha qeybta ka ah heshiiskaan waa in ay xaqiijiyaan in dadka naafada ah si la simman dadka kale sida inay:-
   (a) ku raaxeystaan xaqa xorriyadda iyo amniga ee qof ahaaneed;
   (b) Waa in aan lagaga qaadin xorriyadooda si sharci daro ah ama si aan sabab ku saleysneyn, waa in hadiiba xorriyadooda laga qaadayo ay noqotaa mid sharciga Waafaqsan waana in aanay sinnaba naafanimadu u noqon mid xujo looga dhigto in xorrioyadda qofka loogaga qaado.
2. Dawladaha qeybta ka ah heshiiskaan waa in ay xaqiijiyaan, haddii loo diido dadka naafada ah xorriyadooda iyadoo ka dhalatay talaabo (shrci) oo la qaaday damaanado (qofkaas xaqiisa sugayaa) sida uu dhigayo xeerka caalamiga ah ee xuquuqda aadamiga iyo in ay dhamaan (dawladahaasu) si Waafaqsan ujeedooyinka iyo mabaadii'da heshiiskan ku soo arooray oo ay ka mid tahay siinta talaabooyinka iyo maamuus macquula (oo ka tarjuma naafanimadooda si ay u helaan wixii ay u baahan yihiin si la simman dadka lixda lixaad qaba ee ay isku duruufta yihiin).

## Qodobka 15-aad

### REEBANAANTA HAB-DHAQAN KASTA OO JIRDIL AH CIQAAB AH NAXARIIS DARRO AH, AAN BINI-AADANIMO XUMO, BAHDILNA KU AH SHARAFTA QOFKA.

1. Ma jiro qof loo geysan karo jirdil ama falal xun iyo Sharaf dhac ama ciqaab ka baxsan bani'aanimada si gaar ah waa in aan qof loogu geysan tijaabo

caafimaad iyo mid cilmi baarisba, hadii aanu oggalaansho bixin xorriyaddiisa oo dhammeystiran.

2. Waxay qaadayaan dawladaha qeybta ka ah heshiiskan dhamaan talaabooyinka sharci dejineed Maamul garsoor iyo talaabooyinka kale oo wax ku ool ah oo naafada iyo dadka kale u simman yihiin si loo joojiyo in loo geysto dadka naafada ah jirdil silicin ciqaab adag oo ka baxsan bani'aadanimada ama quursi iyo bahdil ku ah sharafta qofka.

## Qodobka 16-aad

**REEBANNAANTA DHIGG MIIRASHADA, XOOG KU MUQUUNISKA IYO XADGUDUBKA.**

1. Dawladaha qeybta ka ah heshiiskan waa in ay qaadaan dhamaan talaabooyinka munaasibka ah ee sharci-dajin, maamul, bulsho waxbarasho iyo talaabooyin kaleba, si looga difaaco dadka naafada ah gudaha guryahooda iyo banaankaba dhamaan noocyada dhiigmiirashada, xoog ku muquuniska iyo xadgudubka, oo uu ku jiro xadgudubka jinsiga (lab ama dheddig ahaashaha) ku salaysan;

2. Dawladaha qeybta ka ah heshiiskaan waa in ay sidoo kale qaadaan dhamaan talaabooyinka munaasibka ah si looga hortago dhamaan noocyada kale ee dhiigmiirashada xoog ku maquunsika iyo xadgudubka iyadoo la qaadayo talaabooyin ay ka mid yihiin bixinta taageero iyo kaalmo ku haboon oo la siiyo naafada, qoysaskooda iyo kuwa naafada daryeela si loo xaqiijiyo si gaar ah hababka ku haboon ee jinsiga iyo da'da caawinaadka iyo taageeridda dadka naafada ah qoysaskooda iyo dadka xanaaneeya oo tixgalinaysa jinsiga (lab iyo dhedig) iyo da'da waxaa kaloo ka mid ah in la suurta galsho bixinta xog iyo wacyigelin ku saabsan hababka laga hortago falalka dhiigmiirashada, xadgudubka iyo xoog muquuniska dawaladaha qeybta ka ah heshiskaan waa in ay dammaanad qaadaan in adeegyada ay bixinayaan ay noqdaan kuwa tixglin siiya da'da naafada iyo jinsiga (lab iyo dhidig) ay yihiin.

3. Si looga hortago falalka dhiigmiirashada xad-gudubka iyo xoog ku muquuniska dawladaha qeybta ka ha heshiiskan waa in ay xaqiijiyaan

in dhamaan agabka iyo barnaamijyada loo qoondeeyay in ay u adeegan dadka naafada ah ay noqdaan kuwa ay si wax ku ool ah dabagal ugu sameyso hay'ad madaxbanaan.

4. Dawladaha qeybta ka ah heshiiskaan waa in ay qaadaan talaaboyinka ku haboon si loo dhiirgeliyo in dadka naafada ah ay soo ceshadaan caafimaadkooda jir ahaaneed, garasho iyo nafsi ahaaneed iyo in ay helaan baxnaanin iyo dhex galid bulshada ay dhexgalaan, marka ay la kulmaan nooc kasta oo ka mid ah noocyada dhiigmiirashada, xadgudubka ama xoog ku muquuniska iyadoo ay ku jirto in naafada loo suurta gasho helitaanka adega ilaalinta iyo difaaca soo kabashada ama soo raysashada iyo dhexgalka ay naafadu dadka dhexgelaan waa in ay ku timaadaa jawi dhiirigalinaya caafimadka qofka, daryeelkiisa ixtiraamkiisa aaya ka talintiisa islamarkaasna daboolaya baahiyaha gaarka ah ee jinsiga (lab iyo dhedig) ama da'da naafonimo ee uu qofku ku jiro.

5. Dawladaha qeybta ka ah heshiiskan waa in ay dajiyaan sharciyo, siyaasado wax ku ool ah oo ay ka mid yihiin sharci dejinta iyo siyaasada xoogga saaraya haweenka iyo caruurta si loo dammaanad qaado in la ogaado xaaladaha iyo dhacdooyinka dhiigmiirasho xad gudub ama xoog muquunis ee lasoo darista dadka naafada ah iyo sidii baaritaan loogu samayn lahaa falalkaasi, iyadoo maxkamadda lala tiigsanayo cidda lagu helo falalkaasi mar alla iyo marka ay suurta gal noqoto.

## Qodobka 17-aad

### ILAALINTA SHARAFTA QOFKA

Qofkastoo naafo ahi waxuu xaq u leeyahay in la xushmeeyo nabad galyadiisa qof ahaaneed iyo tiisa caqli si la simman dadka kale.

## Qodobka 18-aad

### XORRIYADDA ISKU SOCODKA IYO JINSIYADDA

1. Dawladaha qeybta ka ah heshiiskaan waxey qirayaan xaqa dadka naafada ah ay u leeyhiin in ay ku raaxeystaan xorriyadda isu socodka iyo xorriyadda ay ku doorankaraan meesha ay degayaan iyo helitaanka jinsiyada ama dhalasho si la siman dadka kale oo ay ka mid tahay damaanad qaad ah in ay naafadu ku raaxeystaan oo helaan waxyaabaha soo socda:-

(a) Xaqa helitaanka jinsiyad iyo badelitaankeeda iyo in aan lagaga qaadi karin jinsiyadooda si sharci darro ama naafanimadooda awgeed;

(b) In aan loogu diidi Karin naafanimo, awoodda ay leeyihiin in ay helaan mulkiyaan adeegsadaan dukumeentiga jinsiyadooda iyo dokumeentiyada kale ee aqoonsiga ama in ay ka faa'iideysan karaan hababka kale ee socdaalka taas oo ay ku fududeysan karaan adeegsiga iyo xaqa ay u leeyhiin in ay meeshay doonaan u socdaalaan.

(c) In ay xor u yihiin in ay ka taagaan dalkii ay doonaan oo dalka ay u dhasheen ku jiro.

(d) In aan loogu diidi Karin si sharci darro ah ama ku salaysan naafanimadooda xaqa ay u leeyihiin in ay galaan dalka ay u dhasheen.

2. Caruurta naafada ah waa in la diiwaangaliyaa islamarkaa ay dhashaan sidoo kale waa in ay helaan marka ay dhashaanba xaqa in magac loo bixiyo xaqa helitaanka jinsyad iyo sida ugu suurta galka badan in ay bartaan waalidkooda helaanna xanaanadooda.

## Qodobka 19-aad

### NOLOL MADAXBANAAN IYO KA MID AHAANSHO BULSHO

Dawladaha qeybta ka ah heshiiskan waxay qirayaan xaqa ay u leeyhiin dhamaan dadka naafada ah iyagoo xaqaas kala siman dadka kale in ay ku dhexnoolaadaan bulshada iyagoo helaya ikhtiyaar la mid ah kan dadka kale leeyihiin waxayna qaadayaan (dawladaha heshiska ku jiraa) talaabooyin wax ku ool ah si loo fududeeyo ku raaxeysiga dadka naafada ah si dhameystiran xaquuqdooda ugu raaxeystaan dhexgalka iyo qaadashada kaalintooda ay ku leeyhiin bulshada. Waxaana ka mid ah arrimaha ay dawladahaasu damaanad qaadayaan waxayaalaha soo socda:

(a) Fursad siinta dadka naafada ah in ay doortaan meesha degaan u noqoneysa iyo dadka ay la noolaanayaan si la simman dadka kale iyo in aan lagu khasbi Karin in ay u noolaadaan hab nololeed gaar ah;
(b) In loo suuragaliyo dadka naafada ah helitaanka taxane adeegyo taageero ah oo ay guriga dhexdiisa ku helaan iyo adeegyada kale ee bulsho oo ay ka mid tahay kaalmada laga mamaarmaanka u ah in loo sahlo noloshooda iyo dhex-gelka ay bulshada ku dhex milmaan iyo in laga ilaaliyo in wax kala sooc ah ama saarid bulshada dhexdeeda lagula kaco naafada;
(c) Ka faa'ideysiga dadka naafada ah ay ka faa'ideysan karaan si la simman dadka kale adeegyada iyo agabka bulsho ee la siiyo dadweynaha iyo in la dammaanad qaado sidii adeegyadaa ay u noqon lahaayeen kuwa si buuxda u haqab-tira baahiyadahooda (naafada).

## Qodobka 20-aad

### SOC-SOCODKA QOFKA

Dawladaha qeybta ka ah heshiiskaan waa in ay qaadaan talaabooyinka wax ku ool ah si loo xaqiijiyo guur-guurka qofka naafada ah uu meeshuu dooono ikhtiyaarkiisa hadba u guur-guuri karo sida ugu suurta galsan waxaana ka mid ah arrimahaas waxyaalaha soo socda:

(a) Sahlidda xoriyadda guur guurka ee dadka naafada ah ee ay hadba goorta habka ay doonaan ay u soc-socon karaan iyagoo ku helaya qiimo ay awoodaan;
(b) Sahlidda helitaanka dadka naafada ah ay helikaraan habab iyo qalab tayo leh tasiilaadka cilmiga farsamada iyo wax soo saarka (tiknoljiyada) iyo dad gacan siiya si loogu sahlo naafada guur guurka iyagoo adeegyadaasi ku helaya qiima ay awoodaan;
(c) Siinta tababaro dadka naafada ah iyo dadka la shaqeeyana iyadoo lagu tababarayo xirfadaha soc-socodka;
(d) Ku dhiirigelinta shirkadaha goonida loo leeyahay ee iyagu soo saara qalabka sahla socodka iyo farsamooyinnka cusub (tiknoolijayda) ee sahla socodka inay dhawraan oo ay xil iska saran dhamaan hababka kala duwan ee naafada loogu fududeyn karo soc-socodka.

## Qodobka 21-aad

### XORIYADDA HADALKA, FIKIRKA IYO HELITAANKA XOGTA

Dawladaha qeybta ka ah heshiiskaan waa in ay qaadaan talaaabooyinka ku haboon si loo xaqiijiyo in dadka naafada ah adeegsadaan xaqooda xorriyaddaha dalka (xoryatul-qowl) iyo cabarida fikirkooda oo ay ka mid tahay xorriyadda ay u leeyahiin in ay raadiyaan helaan faafiyaan xogta iyo aragtiyada ay helaan ama qabaan si la simman dadka kale iyagoo adeegsanaya dhamaan hababka wax la isugu gudbiyo ee ay door-bidaan sida ku qeexan qodobka 2-aad ee heshiiskaan oo ay ku jirto:

(a) Siinta dadka naafada ah wararka iyo xogta ku socota dadweyanaha iyadoo la adeegsanayo noocyada farsamo ee la heli karo kuna haboon dadka kala duwan ee naafada ah iyadoo aan kharash dheeraad ah la saareyn naafada;

(b) Aqbalaada iyo sahlida adeegsiga dadka naafada ah ay isticmaali karaan mucaamilkooda rasmiga ah luuqada tilmaamaha iyo faraha indhoolayaashu wax ku aqriyaan ama wax ku fahmaan (Braille). Iyo hababka kale ee naafadu ku wada xiriiri karaan kuwaasoo helitaankoodu sahlanyahay, ahna kuwa aqtiyaarkooda u doorteen dadka naafada ah;

(c) Ku dhiiri gelinta shirkadaha gaarka loo leeyahay ee bixiya adeegyada dadweynaha; iyadoo la adeegsanayo qadka internet-ka, iney ku siiyaan warbaahinada iyo fariimaha dadka naafada ah iyagoo adeegsanayo qalabka ugu sahlan kuwaasoo naftooda si fudud u adeegsan karaan;

(d) Ku dhiirigelinta warbaahinta ay ku jiraan kuwa internet-ka wax ku tabiya in ay ka dhigaan adeegyadooda kuwa ay heli karaan (awoodaan) dadka naafada ahi;

(e) Aqoonsiga luuqadaha tilmaamtooda (luuqada ama afgarad kasta oo qof naafo ah adeegsado) iyo dhiirigelinta adeegsiga afgaradkaasi.

## Qodobka 22-aad

### XUSHMEYNTA KALI AHAANSHO (IN QOFKU KU ADEEGO XORNIMADIISA OO AAN CID KALE FARAGASHIN)

1. Lama oggola in si sabab la'aan ah ama sharci darro ah loo farageliyo iyadoo aan la tixgelineyn meesha uu ku noolyahay ama sida uu u noolyahay, arrimaha qofka (Naafada ah) gaar u ah, qoyskiisa, gurigiisa, ama warqadihiisa, ama habkasta oo isgaarsiin ahaan u adeegsado, sidoo kale lama dhaawici karo sharaftiisa ama sumcadiisa. Dadka

naafada ahi waxay xaq u leeyhiin in ay sharciga ka hoos galaan faragalinta iyo xadgudubka noocaas oo kale ah hadiiba ay la kulmaan;

2. Dawladaha qeybta ka ah heshiiskaan waa inay ilaaliyaan xogaha u gaarka ah ee ku saabsan arrimaha gaarka ah ee dadka naafada ah, caafimaadkooda iyo baxnaanintooda si la mid ah sida loo ilaaliyo arrimaha gaarka u ah dadka kale;

## Qodobka 23-aad

### XISHMEYNTA GURIGA IYO QOYSKA

1. Dawladaha qeybta ka ah heshiiskaan waa in ay qaadaan talaabooyin haboon oo wax ku ool ah si loo ciribtiro faquuqa dadka naafada ah lagula kaco marka ay timado arrin guur qoys, waalidnimo iyo xariir; si ay ula simman yihiin dadka kale, si loo xaqiijiyo arrimaha soo socda:-
   (a) Xaqa dadka naafada ah ee gaaray da'da guurka ay u leeyihiin in ay guursadaan unkaan qoys ku dhisan rabitaan buuxa oo xor ah oo ka soo fulla labaduba doonaya inay is guursadaan;
   (b) Xaqa dadka naafada ah ay u leeyihiin in ay go'aan ka gaaraan ikhtiyaarkooda ah tirada caruurna ay rabaan in ay dhalaan iyo waqtiga ay kala fogaanayaan dhalmada caruurta, iyo in ay helaan xog iyo wacyi gelin da'dooda ku qalanta oo ku saabsan arrimaha taranka iyo qorsheynta qoyska iyo siinta (naafada isqaba) qalabka lagama marmaarmaanka u ah suurta gelinta adeegsiga xaqaan;
   (c) Xaqa dadka naafada ah ay u leeyihiin oo ay ku jiraan carruurtu in la ilaaliyo khusuusiyadooda ama sirtooda (arrimaha u gaarka ah)
2. Dawladaha qeybta ka ah heshiiskaan waxay xaqiijinayaan xaquuqda iyo mas'uuliyada dadka naafada ah qaadi karaan iyagoo mas'uul ka noqonaya xanaanada caruurtooda dardraanka. Kafaala qaadida ama korsashada ilmo (aanay dhalin) iyo caado kasta oo kuwaasi la mid ah oo shuruucda iyo xeerasha dalkaasi qabaan (ay dhigayaan) iyo xaalad kasta oo ahmiyadda ugu weyn siinaysa caruurta. Dawladaha qeybta ka ah heshiiskaan waa in ay siiyaan taageero iyo caawimaad munaasib ah dadka naafada ah si ay ugu sahlaan babaarinta iyo korinta caruurtooda;

3. Dawladaha qeybta ka ah heshiiskaan waa in ay xaqiijiyaan in caruurta naafada ah ay leeyihiin xaquuq simman marka laga hadlayo nolosha qoyska si looga shaqaysiyo xuquuqdaasi, loogana hortago qarinta caruurta naafada ah, cidla uga tagidooda dayacidooda iyo faquuqooda (takooridooda) dawladaha qeybta ka ah waxay balan qaadayan in ay siiyaan waqti hore xog iyo adeegya buuxa carruurta naafada ah iyo qoysaskooda;

4. Dawladaha qeybta ka ah heshiiskaan waa in ay xaqiijiyaan in aan ilmo lagaga qaadin si khasab ah labadiisa waalid; hadii aanay markas go'aamin hay'ad awood u leh sharciga arritaasi oo ku xiran dib u eegis uu garsoorku ariintaas ku sameeyo iyo in ay waafaqsantahay shuruucda iyo xeerarka dalka ka jira iyo in arrintaasi tahay mid loo qaaday ama loo sameeyay danta ilmaha. Sinna uma banana in looga qaado cunuga labadiisa waalid maadaama u naafo yahay ama labadiisa waalid ay naafo yihiin ama midkood naafo yahay.

5. Dawladaha heshiiskaan qeybta ka ah waa in ay balan qaadaan in marka aysan awoodin qoyska ilmaha dhalay inuu si toos ah u xanaaneeyo ilmaha naafada ahi in ay dadaal u galaan sidii ay ilmahaas ku siin lahaayeen daryeel kale, iyadoo ilmuhu ku jirayo gacanta qoys waynihiisa hadii aysan suurta gal ahayn taasi in lagu daryeelo ilmahaasi bulshadiisa dhexdeeda iyo jawi qoys.

## Qodobka 24-aad

### WAXBARASHADA

1. Dawladaha heshiiskaan qeybta ka ah waxay aqoonsanyihiin xaqa ay dadka naafada ah u leeyhiin in ay helaan waxbarasho si looga shaqeysiiyo xaqaan iyadoo faquuq jirin fursadahahaana loo simman yahay dowladahasi waa inay salka u dhigaan hab waxbarasho dhamaan heerarka waxbarasho iyo tacliin xirriir ah iyagoo hiigsanaya arrimaha soo socda:-

(a) Horumarin buuxda oo lagu sameeyo awoodaha bani'aadamka; iyo dareenka sharafeed iyo han-weynida uu bani'aadamka qof ahaan isku qabo iyo xoojin xoshmeynta xaquuqda aadanaha iyo xuriyaadka asaasiga ah;
(b) Kobcinta qofnimada dadka naafada ah awoodahooda iyo hal abuurkooda iyo sidoo kale awoodahooda caqli iyo jir si ay u gaaran awood buuxda iyo isku filnaansho;
(c) U sahlidda dadka naafad ah ka qeybgal wax ku ool ah oo ay ku yeeshaan bulshadaasi xor ah .

2. Iyadoo garwaasan xaqiiqdan dawladaha heshiiskaan qeybta ka ah waa in ay meel mariyaan waxyaabaha soo socda:-
(a) In aan looga cayrin dadka naafada ah nidaamka waxbarashada naafanimo, iyo in aan laga cayrin Karin caruurta naafada ah waxbarashada hoose iyo tan sare tan bilaashka ah iyo tan khasabka ahba naafanimo awgeed;
(b) U sahlidda helitaanka dadka naafada ah ay ka heli karaan waxbarasho bilaash ah oo tayo leh dugsiyada hoose iyo kuwa sare si la simman dadka kale ee ay la noolyihiin,
(c) Ilaalinta baahiyahooda qofeed sida ugu macquulsan;
(d) Helitaanka dadka naafada ah ay helaan kaalmada laga marmaarmaanka ah ee habka waxbarashada gud si loogu sahlo helitaanka waxbarashada oo wax ku ool ah;
(e) Taageero qof qof ah oo wax ku ool ah oo lagu siiyo naafada jawi u oggolaanaya iyaga in ay gaaraan kobac aqooneed iyo mid bulsho oo meesha ugu sarreysa ah oo waafaqsan ujeedada la higsanayo ee ah in la gaaro isdhexgal buuxa (oo dhexmarta bulshada iyo naafada)

3. Dawladaha qeybta ka ah heshiiskaan waa in ay u suurta galiyaan dadka naafada ah in ay baraan xirfado nololeed iyo xirfadaha dhinaca horumarinta bulshada ah si ay ugu sahasho kaalin buuxda oo ay ka qaataan waxbarashada si la siman kaalinta dadka kale iyagoo ah xubno

ka tirsan bulshada. Si ujeedkaas loo xaqiijiyo dawladaha qeybta ka ah heshiiskaan waa in ay qaadaan talaabooyin haboon oo ay ka mid yihiin waxyaalaha soo socda:-

(a) Sahlida wax ku barashada habka farta indhoolyaasha wax lagu baro (Braille) iyo qeybaha qoraalka bedelka ah iyo hababka iyo noocyada kale isgaarsiinada awoodda leh iyo xirfadaha hagidda iyo socodka iyo sahlidda kaalmada iyo hagidda ay ka helayaan dadka ay isku midka yihiin;

(b) Sahlida barashada luuqada tilmaanta iyo dhiirigelinta aqoonsiga luuqadda dhagoolayaasha;

(c) Xaqiijinta in waxbarashada la siiyo dadka indhoolayaasha ah dhagoolayaasha iyo dadka labadaba la'a (indhoole – dhagoole), gaar ahaan kuwa caruurta ah iyadoo wax lagu barayo luqadaha ugu haboon iyo hababka isgaariin ee dadkaasi ay wax ku fahmaan iyadoo lagu siinayo waxbarashadaasi jawi keeni kara koboc aqooneed iyo mid bulsho:

4. Si loo hubiyo ka shaqaysiinta xaqaan dawladaha qeybta ka ah heshiiskani waa in ay qaadaan talaabooyin ku haboon oo ah shaqaaleysiinta macallimiin ay ka mid yihiin macalamiin naafo ah kuwas oo aad u yaqaan luqadda tilmaanta /ama habka farta indhoolayaasha wax lagu baro (Braille), iyo tababaridda iyo diyaarinta khubarada iyo shaqaalaha ka hawl gala dhamaan heerarka waxbarasho waxaa ka mid ah tababarkaas wacyigelinta ku aadan naafanimada iyo adeegsiga hababka qalabka munaasibka ah ee beddelka ah iyo farsamooyin iyo qalabka waxbarashada u sahla dadka naafada ah.

5. Dawladaha heshiiska kujira waa in ay xaqiijiyaan in dadka naafada ahi ka helaan waxbarasho sare oo guud tababaro xirfadeed waxbarashada dadka waaweyn iyo waxbarashao xirriir ah inta uu noolyahay si la simman dadka kale si haddaba loo gaaro ujeedkaas dawladaha ku jira heshiiska waa in ay damaanad qaadaan in ay bixinayaan adeegyada iyo

maamuuska macquulka ah ee u sahlaya naafada helidda waxbarashadaas.

**Qodobka 25-aad**

**CAAFIMAADKA**

Dawladaha qeybta ka ha heshiiskaan waxa ay aqoonsanayaan in dadka naafada ah ay leeyhin xaqa ah in ay ku raaxeysataan heerarka ugu sareeya ee caafimaad iyadoo aanu jirin faquuq loogu geysanayo naafanimadooda awgeed. Dawladaha qeybta ka ah heshiiskaan waa in ay qaadaan talaabooyin ku haboon oo xaqiijinaya helitaanka dadka naafada ah ay helaan adeegyo caafimaad oo tixgalinaya kala duwanaashaha raga iyo dumarka oo uu ku jiro adeegga baxnaaninta caafimaad dawladaha ku jira heshiiska waa in ay si gaar ah uga shaqeeyaan arrimaha soo socda:

(a) Siinta naafada daryeel iyo barnaamijyo caafimaad oo bilaash (lacag la'aan) ah oo kharash macquul ah ku kacaya una dhigma dhanka tayada xaddiga heerka iyo noocaba daryeelka la siiyo dadka kale iyadoo ay ku jirto adeegyada caafimaad ee taranka, kaalmada iyo barnaamijyada guud ee loogu talo galay caafimaadka dadweynaha;

(b) Siinta naafada adeegyada caafimaad ee ay baahida u qabaan maadaama oo ay naafo yihiin awgeed gaar ahaan ogaanshaha hore (in hadii xanuun jiro oo kale isla markaaba la ogaan karo) iyo soo faragelinta (wax ka qabashada) mar alla marka loo baahdo adeeg iyo in la helo adeegyo kale oo wax ka qabanaya ama la tacaalaya yaraynta iyo ka hortagga dhacdooyinka dadku inay naafo ku noqdaan, iyadoo ay soo galayaan dadka waawayn iyo dadka yar-yar;

(c) Ka hirgalinta adeegyadaas caafimaad meesha ugu dhaw oo suurta gal ah ee deegaanada naafada ku nool yihiin oo ay ka mid yihiin goobaha miyiga;

(d) Ku boorinta xirfadlayaasha adeegga caafimaadka bixiya in ay naafada siiyaan daryeel caafimaad oo la mid ah kan ay dadka kale siiyaan o ay

ku jirto in ay daryeelkaas ay ku siiyaan naafada rabitaankooda iyo codsigooda iyagoo ku dhaqaaqaya arrima dhowr ah oo ay ka mid tahay sara u qaadidda wacyiga xuquuqda aadanaha ee dadka naafada ah dhawrista sharaftooda iyo ka talinta aayahooda iyo baahiyahoda iyadoo arrintaa lagu gaaraayo tababarro la siinayo naafada iyo faafinta hal-beegyo akhlaaqda khuseeya oo ku saabsan daryeelka caafimaad ee la siinayo naafada hadii uu ahaan lahaa mid guud ahaan loo leeyahay iyo mid gaar loo leeyahayba;

(e) Xaaranti-nimaynta takooridda dadka naafada ah lagu takooro bixinta adeegga caymiska caafimaad (lacag qofku si joogto ah u bixiyo si hadii uu xanuunsado qofkas loo daaweeyo) iyo caymis noloeedka (lacag si joogto ah qofku u bixiyo si hadii qofka bixinaya dhib gaarto ama uu dhinto lacag qofka ama reerkiisa loo siiyo ) marba hadii arrintaa uu dhigayo sharciga lagaga dhaqmo dalkaas waxaana shardi ah in adeegyadaas lagu siiyo naafada hab caddaalad ah oo macquul ah,

(f) Lama diidi karo bixinta daryeel caafimaad ama adeegyada cuntada iyo cabitaanada dareeraha ah iyadoo sabab looga dhigayo naafanimo.

## Qodobka 26-aad

### BAXNAANINTA IYO DIB U BAXNAANINTA NAAFADA

1. Dawladaha qeybta ka ah heshiiskan waa in ay qaadaan talaabooyin haboon oo wax ku ool ah oo ay ka mid tahay habka caawinta dadka naafada ah si loogu suurta galiyo in ay helaan madaxbanaani buuxda iyo awoodo iyo xirfado buuxa oo ay ku meel maraan iyo xaqiijinta kaalin buuxda oo dadka naafada ah ku yeeshaan dhamaan dhinacyada nolosha. Si haddaba loo gaaro yoolkaas la hiigsanayo, dawladaha qeybta ka ha heshiiskaan waa in ay bixiyaan adeegyo iyo barnaamiyo dhamaystiran oo si balaaran u baxnaaninaya una daryeela naafada gaar ahaan dhinacyada caafimaadka shaqada

waxbarashada iyo adeegyada bulsho iyadoo loo hirgaliyo adeegyadaan sida soo socota:

(a) Mid bilaabmeysa waqtiga ugu horeya ee suurtagal ah iyadoo la bixinayo adeeg ku salaysan qiimeyn lagu sameynayo baahiyaha kala duwan ee qof kasta gaarkisa u qabo;

(b) Gacan ka geysashada in naafada lagu daro bulshada kalin buuxdana la siiyo oo ay kaga qeyb-qaataan dhamaan dhinacyada nolosha bulshooyinkooda si mutadawacnimo ah (iskood isku direen miyi iyo magaaloba.

2. Dawladaha qeybta ka ha heshiiskaan waa in ay dhiiri galiyaan dajinta barnaamijyo tababar oo bilaw ah oo loo qabto dadka khubarada ah iyo shaqaalaha ka shaqeeya bixinta adeegyada baxnaaninta iyo dib-udajinta naafada;

3. Dawladaha qeybta ka ah heshiiskaan waa in ay dhiirigaliyaan helidda la heli karo aqoonta iyo adeegsiga qalabka iyo farsamooyinka cusub ee caawiyayaasha ah kuwaas oo loo naqshadeyaya ama loo sameeyay dadka naafada ah maadaama oo ay la xiriiraan dadaalada loogu jiro baxnaaninta iyo dib u dajinta naafada,

## Qodobka 27-aad

### SHAQADA IYO SHAQAALAHA

**1.** Dawladaha qeybta ka ah heshiiskan waxay aqoonsanyihiin xaqa shaqo ee dadka naafada ahi leeyihiin si la simman dadka kale waxana ka mid siinta fursado ay ku helaan noloshooda iyagoo ka shaqaynaya shaqo markas ay ikhtiyaarkooda ku doorteen oo ay ka hayaan suuq xor ah oo u furan soona dhawaynaya ku soo biiridda naafadu shaqooyinka ku soo biiraan waana in dawladaha heshiiska ku jiraa dhawraan oo xoojiyaan xaqa ah in ay naafu shaqeysan karaan oo ay ku jirto ilaalinta iyo dhawrista xaqa uu yeelanyo qofka naafooba isagoo shaqada ku jira arrintaa oo lagu meel marin karo iyadoo la qaado talaabooyin haboon

sida dajinta shuruuc iyo xeerar (arrin qeexaya si loo gaaro ujeedooyinka dhowr ah oo ay ka mid yihiin :-

(a) Mamnuucidda takorka ku dhisan naafonimada ee khuseeeya dhamaan arriamaha la xiriira shaqaalaha kala duwan oo ay ka mid tahay shuruudaha shaqaaleysiinta magacaabista iyo shaqada, shaqada sii wadiddeeda iyo dalacsiinta shaqada iyo duruufaha baadbaado iyo caafimaad ee shaqada;

(b) Ilaalinta in dadka naafada ah ku shaqeeyaan jawi shaqo oo u qalma kuna haboon duruuftooda si la simman dadka kale oo ay ka mid tahay fursado isku mid ah oo ay helaan mushaar simman oo u dhigma shaqada ay qabtaan iyo duruuf shaqo oo aan dhibka soo gaareyn iyo sidoo kale in shaqaalaha naafada ah laga ilaaliyo kadeed iyadoo magdhaw laga siinayo wixii dhib ku dhaca inta shaqada ay hayaan.

(c) In loo kafaala qaado dadka naafada ah in ay adeegsadaan xaqa ay u leeyhiin helitaanka xuquuqda ururada shaqaalaha (sida in ay ka mid noqon karaan jago ka qaban karan ururadaasi naafada xaqooda usoo celin karaan shaqaale ahaan) si la simman dadka kale;

(d) Usuurta galinta dadka naafada ah in ay helaan si wax ku ool ahna u helaan barnaamijyada guud ee jihaynta iyo farsamo ama xirfadeed adeegyada shaqalaysiinta iyo tababarada shaqo ee joogtada ah;

(e) Xoojinta fursadaha shaqo iyo horumarinta xirfadeed iyo shaqo ee ay helayaan dadka naafada ah ee raba in ay ka shaqeystaan suuqa shaqada iyadoo inta badan la siinayo fursado fasax shaqo oo ay helaan ku nagaadaan shaqadaas kuna noqdaan shaqadooda (hadii markaas duruuf uga maqnaadaan IWM)

(f) Xoojinta iyo dhiirigelinimo in naafadu hesho shaqooyin iskood ay u abuurtaan xameynta shirkado ama iskaashatooyin ganacsi iyo hab kasta oo shaqo xor ah u abuuri kara;

(g) Ka shaqaleysiinta dadka naafada ah waaxaha dawladda;

(h) Dhiirigelinta shaqalaha naafada ah ee ka shaqeeyo goobaha gaarka loo leeyahay iyadoo la raacaayo siyaasado, iyo talaabooyin munaasib ah oo ay ka mid tahay talaabooyin la raacaayo dhiiri gelin iyo wixii talaabooyin kala ah (oo loo baahdo)

(i) Damaanad qaadidda talaabooyinka hawl fududeyn ah oo macquul ah oo lameeyo dadka naafada ah;

(j) Dhiirigelinta in dadka naafada ah ka helaan qibrado shaqo suuq furan ee shaqada;

(k) Xoojinta barnaamijyada lagu barayo ama loogu sameenayo xirfado, sida shaqo loo haysto (xafito) iyo sida shaqo dib loogu noqddo iyadoo la eegayo danaha dadka naafada ah;

**2.** Dawladaha qeybta ka ah heshiiskan waa inay xaqiijiyan in ay dadka naafada la adoonsan Karin iyo in laga ilaalsho, si la mid ah sida dadka kale shaqooyinka qasabka ah.

**Qodobka 28-aad**

**HEER NOLOLEEDKA HABOON IYO ILAALINTA BULSHADA**

1. Dawladaha qeybta ka ah heshiiskaan waxa ay aqoonsanyihiin xaqa dadka naafada ah ay u leeyihiin in ay ku raaxeystaan heer nololeed u qalma iyaga iyo qoyskooda sida in ay helaan cunto, dhar iyo hooy; iyo sii wadidda horumarinta duruufahooda nololeed waana in ay qaadaan talaabooyin ku haboon oo lagu dhawro xaqaas iyo xoojinta sidii looga shaqeysiinlahaa xaqaasi, oo ay ku jiraan talaabooyin lagu hiigsanaayo;
2. Dawladaha qeybta ka ah heshiiskaan waxa ay aqoonsanyihiin xaqa difaaca-bulsho ee dadka naafada,. Ku raaxeysiga xaqaas ayadoo aysan jirin takoor naafo, waxayna qaadayaan talaabooyinka ku haboon ee lagu difaaci karo xaqaas laguna xoojin karo ka shaqeyntiisa oo ay ka mid tahay talaabooyin loola jeedo:-

(a) Dammaanad qaadka sinnaanta dadka naafada ah ay kala simman yihiin dadka kale fursadaha helitaanka biyo nadiif ah adeegyo iyo qalab munaasib ah oo ku kacaya qiimo macquul ah iyo wixii

kaalmooyin kale ah oo ku xiran ka jabaabida baahiyaha la xiriira naafananimada,

(b) Xaqiijinta ka faa'ideysiga dadka naafada, ah gaar ahaan haweenka, gabdhaha iyo dadka waaweyn, ka faa'ideysan Karaan barnaamijyada ilaalinta bulshada (sida barnaamijyada lagu taageero dadka saboolka ah) iyo barnaamijyada yareynta saboolnimada;

(c) Xaqiijinta ka faa'ideysiga naafada ah iyo qoyskooda eek u nooll xaaald saboolnimo ay ka faa'ideysan karaan kaalmada ay dawladda bixiso ee la xiriira kharashaadka ku baxa naafada, waxaa kaloo ku jira tababaro munaasab ah, talo-siin kaalmo maaliyadeed iyo daryeel ku meel gaar ah oo la siiyo naafada;

(d) Xaqiijinta ka faa'ideysiga dadka naafada ah ee ka faa'ideysan karaan barnaamijyada guud ee guruyeenta(hoy-abuurka);

(e) Xaqiijinta ka faa'ideysiga dadka naafada ah ee ka faa'ideysan karaan, si ay ula simman yihiin dadka kale, munaafacaadka barnaamijyada hawl-gabnimada;

## Qodobka 29-aad

**KA QEYBGALKA SIYAASADA IYO NOLOSHA GUUD.**

Dawladaha qeybta ka ah heshiiskaan waa in ay u damaanad qaadaan dadka naafada ah xuquuqdooda siyaasadeed sida dadka kale waxayna ballan qaadayaan arrimaha soo socota:-

(a) Xaqiijinta in dadka naafada ah ay si wax ku ool ah uga qeyb qaadan karaan siyaasadda iyo nolosha guud sida dadka kale iyaga oo si toos ah xor ah wax u dooranaya ama dooranaya cidii iyaga matali lahyd waxaana ka mid ah xaqa iyo fursadda dadka naafa ah ay u leeyihiin in ay wax doortaan lana doorto taas oo lagu xaqiijiyo arrimaha soo socota:-

   (i) Kafaalo qaadidda in talabooyinka iyo agabka codeynta ay yihiin kuwa ku haboon la heli karo si fududna loo fahmi karo loona adeegsan karo;

(ii) ilaalinta xaqa dadka naafa ah u leeyhiin in ay codkooda ku dhiiban karaan waraaq sir ah xiliga doorashooyinka iyo afti qaadida si baqdin la'aan ah iyo xaqa ay u leeyihiin in ay isku soo sharaxi karan qabanna karaan jagooyinka iyo mas'uuliyadaha dawladda heer walba iyo adeegsiga farsamada casriga ah (tiknoolijiyadda ) ee naafada hawshaas u fududeyn karta hadii loo baahdo;

(iii) dammaanad qaadka xorriyadda dadka naafada ah u leeyihiin in ay cabiraan ama muujiyaan doonitaankooda iyagoo codkooda dhiibanaya iyo in loo oggolaado hadii loo baahdo cid ay iyagu dalbadeen oo ku caawiya cod bixinta.

(b) In ay ka shaqeeyaan suurtagalinta jawi u saamaxaya dadka naafada ah in ay si buuxda oo aan faquuq lahayn uga qaybqaataan fulinta hawlaha guud oo ay ka mid yihiin arrimaha soo socda:-

(i) ka qeyb qaadashada ay dadka naafada ah ka qayb gali karaan hay'adaha iyo ururuada aan dawliga ahayn ee ka shaqeeya hawlaha siyaasadda iyo danaha guud, oo ay ku jiraan ka mid noqoshada axsaabta ku lugu leh arrimaha siyaasadda iyo maaraynta arrimahooda;

(ii) yagleelidda ururro ay dadka naafada ah leeyhiin iyo ku biiriddooda si ay u matasho danaha dadka naafa ah gudaha iyo dibada labadaba.

## Qodobka 30-aad

### KA QEYBQAADASHADA NOLOSHA DHAQANKA MADADAALADA IYO CIYAARAHA

1. Dawladaha qeybta ka ah heshiiskaan waxay aqoonsanyhiin xaqa dadka naafa ah u leeyhiin in ay ka qeybqaataan si la simman dadka kale nolsha, dhaqan, waana in ay qaadaan talaabooyin haboon si loo xaqiijiyo in dadka naafada ah ay helaan:

(a) In ay heli karaan qalabka iyo agabka dhaqanka si sahlan;

(b) In ay heli karaan barnaamijyada telefishanka, filimmada, bandhigyada, rawaayadaha iyo noocyada kale ee dhaqanka la xiriira;

(c) in ay heli karaan gelidda goobaha bandhigyada ama adeegyada dhaqanka sida riwaayadaha, matxafyada, goobaha shaneemooyinka

maktabadaha adeegyada dalxiiska iyo goobaha muhiimadda taariikheed iyo soo jireen dhaqanba leh.

2. Dawladaha qeybta ka ah heshiiskaan wa in ay qaadaan talaabooyinka ku haboon si loogu sahlo dadka naafada ah in helaan fursado ay ku hormariyaan kuna adeegsadaan awoodahooda hal-abuurka farsamada iyo awoodaha maskax iyo garaad iyadoo aysan ahayn dantooda oo kaliya balse ay tahay ka dhigidda bulshada mid hodon ka ah dhanka dhaqanka.
3. Dawladaha qeybta ka ah heshiiskaan waxa ay qaadayaan talaabooyin ku haboon si waafaqsan xeerarka caalamiga ah si loo xaqiijiyo in xeerarka ilaalinaya xuquuqda hantida maskaxeed aanay noqon mid caqabad aan munaasib ahayn ama carqalad ku ah in dadka naafada ahi ay helaan wixii qalab ama agab dhaqan ah.
4. Dadka naafada ah waa in ay helaan si la simman dadka kale aqoonsi la aqoonsado iyo taageero ay ku helaan haybtooda dhaqan iyo luqadeed oo ay ka mid tahay faroka hadalka (luqadda calaamadaha jirka la iskula hadlo, sida dhagoolayaasha)
5. Si loogu suurtagaliyo kaalinta firfircoon oo dadka naafada ka ciyaaraan hawlaha madadaalada ciyaaraha iyo isboortiga, si la simman dadka kale dawaadaha ku jira heshiska waa in ay qaadaan talaabooyin ku haboon oo kala ah:-
    (a) Dhiirigelinta in dadka naafada ah ay si buuxda uga qayb galaan dhamaan hawlaha madadaalada iyo ciyaaraha heer kasta;
    (b) Xaqiijinta in dadka naafada ah ay helaan fursad ay isku abaabulaan horumariyaan kana qeyb galaan ciyaaraha iyo madadaalada ugaarka ah naafada iyo in laga shaqeeyo si loo gaaro yoolkaan waa in dhiirigelinta la siiyo naafada hadii macquul ah oo waxbarasho, tababar iyo han sare si la simman dadka kale;
    (c) Xaqiijinta gelitaanka dadka naafada ah geli karaa goobaha ciyaaraha madadaalada iyo dalxiiska;

(d) Xaqiijinta fursad siinta carruurta naafada ah si ay uga qeyb galaan si la simman carruurta kale hawlaha ciyaaraha iyo madadaalada oo ay ka mid yihiin kuwa ka dhaca iskuulka dhexdiisa;

(e) Xaqiijinta helitaanka dadka naafada ah ay helaan adegyada ay bixiyaan dadka ka shaqeeya agaasinaka madadaalada dalxiiska iyo ciyaaraha.

**Qodobka 31-aad**

**TIRO KOOBKA ISTAATIITIKISKA IYO XOG URUURINTA**

1. Dawladaha qeybta ka ah heshiiskaan waxay balan qaadayaan In ay sameeyaan uruurinta xog iyo macluumaad munaasib ah oo ka mid tahay uruurinta xog tirokoobiyo mid cilmi baariseed, si ay ugu suurtagasho dowladaasi inay qaabeeyaan, dajiyaan, fuliyaan, heshiiskaan. Waxaana haboon in hawlaha xog uruurinta ay la tixraaco waxyaalaha soo socda:-

(a) U hogaasamidda damaamanadaha sharci ahaan lagu dhaqmo oo ay ka mid yhiin sharciga macluumaad uruurinta si loo xaqiijiyo ilaalinta sir-qarinta iyo xushmeynta waxyaalaha ugaarka ah (khusuusiyada) dadka naafada ah;

(b) U hogaansanida mabaadii'da caalami ahaan la isku raacsanyahay ee ilaalinta xuquuqda aadanaha, xoriyadda asaasiga ah iyo mabaadi'da anshax ahaaneed ee ku xeeran sameynta tirikoobka iyo adeegsigiisa.

2. Macluumaadka la aruuriyay si waafaqsan qodobkaan waa in la abla-ableeyaa (la kala saaraa) hadba sida ku haboon hadana loo adeegsadaa qiimeynta inta dawladaha heshiiskaan ku jiraa ay ka soo dhalaaleen waajibaadkii saarnaa sida uu dhigayo heshiiskaan, iyo daaha ka qaadida caqabadaha naafada ka haysta adeegsiga xuquuqdooda iyo ka shaqeynta sidii looga gudbi lahaa caqabadahaasi.

3. Dawladaha qeybta ka ah heshiiskan waa in ay ka soo dhalaanaan masuuliyadahooda ah faafinta tiro-koobyada sida kale waa in ay xaqiijiyaan sidii dadka naafad ah ay ku heli lahaayeen tiro-koobkaasi.

## Qodobka 32-aad

### ISKAASHIGA CAALAMIGA AH

1. Dawladaha qeybta ka ah heshiiskaan waxay aqoonsan yihiin ahmiyadda uu leeyahay iskaashiga caalamiga ah iyo xoojintiisu si loo taageero dadaalada wadammadu ku doonayaan in la gaaro ujeedka heshiiskaan, waan in ay qaadaan talaabooyinka munaasib ah oo wax ku ool ah oo arrintaan lagu xaqiijinaayo, iyadoo iskaashi arrinkana kala sameynaya ururada caalamiga ah iyo kuwa goboleedka ee ay arrintu quseyso iyo bulshada rayidka ah, gaar ahaan ururada iyagu xilsaaran ama u dooda arrimaha naafada talaabooyinkaasi waxaa ku jira kara oo hoos gali kara waxyaaba soo socda:-

   (a) Xaqiijin la gaarsiiyo iskaashiga caalamiga ah ee dadka naafada ah oo ay ka faa’deystaan, oo ay ka mid yihiin barnaamijyada horumarineed ee caalamiga ah;

   (b) Fududeynta iyo gacan ka geysashada awood dhiska (loo sameeyo dawladaha) oo ay ka mid tahay isdhaafsiga xogta khibradaha iyo barnaamijyada tababarada iyo habka dabaqida ama fulinta ee ugu wanaagsan;

   (c) Sahlida iskaashi laga wada sameeyo dhanka cilmi baarista iyo helitaanka farsamo aqooneed;

   (d) Bixinta kaalmo farsamo iyo mid dhaqaale sida ugu macquulsan, oo ay ku jirto iyadoo la fududeenayo cilmi iyo farsamo casri ah oo la heli karo gacnna siinaysa (dawladaha iyo hay’adaha ku howlan adeega naafada) iyo gudbinta aqoontaas iyo farsamada casriga ah;

   (e) Axkaamta iyo tiirasha qodobkaan waa in ay noqdaan kuwa aan taabaneyn waajibaadka ka saran dawlad kasta fulinta iyo meelmarinta waajibkeeda kaga aadan heshiiskaa;

## Qodobka 33-aad

### FULINTA HEER QARAN IYO DABA GALKA

1. Dawladaha ku jira Heshiiskaan waa inay magacaabaan, iyagoo raacaya sida uu qabo qaab-dhismeedka hay'adahooda maamul hay'ad qura ah (kaligeed ah) ama ka badan oo hawlaha isku xirta taas oo dawladaha u qaabilsan arrimaha ku saabsan fulinta iyo meelmarinta heshiiskan iyadoo siinaya ahmiyad gaar ah samaynta hab isu xir oo dawladu yeelato si loo socodsiiyo hawlaha looga fadhiyo in ay qaabtaan laamaha iyo heerarka kala duwan (ee dawladdu).

2. Dawladda ku jira heshiiskan waa inay iyagoo raacaya nidaamkooda sharci iyo maamul sameeyaan, ama ay xoojiyaan qaabguud oo dawladdu yeelato oo ay ka mid tahay abuuridda hab madaxbanaan, hadaba sidi loo baahdo oo u xilsaaran xoojinta ilaalinta iyo dabagalka fulinta heshiiskaan waana in dawladahu xisaabta ku darsadaan marka ay abuurayaan ama sameenayaan qaabkaan, dhammaan mabaadii'da la xiriirta heerka iyo hababka ay u shaqeeyaan haya'adaha waddaniga ah ee ka shaqeeya ilaalinta iyo kor u qaadida xuquuqul insaanka.

3. Bulshada rayidka ah gaar ahaan dadka naafada ah iyo ururrada matala waa in ay si buuxda uga qeybqaataan hawsha dabagalka.

## Qodobka 34-aad

### GUDIGA QAABILSAN ILAALINTA XUQUUQDA NAAFADA

1. Waa in la sameeyaa guddi qaabilsan xuquuqda dadka naafada ah (waxaana loogu yeerayaa hada ka dib "Guddiga"), si uu u qabto fulinta howlaha hoose ku xusan:-
2. Guddigu waxa uu ka koban yahay marka uu hergelinayo heshiiskaan labo iyo toban (12) khabiir waxaana lagu darayaa lix (6) xubnood si tirada guddiga ugaarto sided – iyo - toban (18), ka dib marka heshiisku

helo ansixinta ama ku soo biiradda lixdan (60) dawladood oo dheeraad ah;

3. Xubanaha guddigaan waa in ay noqdaan kuwa awoodu ku meel maro (oo aan dad kale wax u yeerin) islamarkaasna loogu yaqaan anshax sare, karti iyo khibrad ama waaya aragnimo ee u leeyhiin arrimaha uu ka hadlaya heshiiskan marka ay soo magacaabayaan musharaxiintooda, dowladaha qeybta ka ah heshiiskaan waxa loogu yeerayaa in ay tixgeliyaan axkaamta iyo tiirarka ku xusan qodobada 4-aad, faqradiisu 3-aad ee heshiiskaan.
4. Xubnaha guddiga waxaa soo dooranaya dawladaha ku jira heshiiska, iyada oo la dhowrayo qeybta deegaanka (in guddiga qeybtiisa lagu saleeyo deegaanada kala duwan ee aduunka) iyo in laga qeyb galiyo dhammaan xadaaradaha kala duwan iyo xeerarka sharci ee aduunka kajira islamarkaasna la tyixgeliyo ka qeyb galka isku dheelitiran ee labada jinsi (rag iyo dumar) iyo ku soo daridda khubaro naafo oo ka mid noqdo guddiga.
5. Xubnaha guddiga waa in lagu doortaa kulammada ay iskugu yimaadaan dawladaha ku jira heshiskan kuwaasoo iyagu codkooda ku dhiibanaya habka codka qarsoodida ah kana dhex dooraya liiska ay ku qoran yhiin shakhsiyaadka dawladaha heshiiska ku jira kasoo xuleen muwaadaniintooda. Kulamdaasi oo ku qabsooma kooram ah in ugu yaraan sedex meelood labo dawladaha qeybta ka ah heshiiskaan ay jogaan waxaana xubnaha guddiga noqda musharaxiinta ka hela cododka ugu badan iyo codka aqlabiyadda dhameystiran (51%) wakiilada dowaladaha xubnaha ka ah ee iyagu soo xaadira codkana dhiibta.
6. Waxaa la qabanayaa doorashada ugu horeysa waqtigaan badneyn lixbilood marka lagu soo bilaabo fulinta heshiiskan. Xoghayaha gud ee qaramada midoobay waa in uu u diraa dowladaha qeybta ka ah heshiiskan afar bilood ka hor ugu yaaraan waqtiga la qabanayo doorashada waraaq uu ugu yeerayo in ay ku soo diraan magacayada dadka u sharraxan labo bilood gudahood. Markaa ka dib xoghayaha guud waa inuu diraa magacaya musharaxiinta uu ku quran habka

xarfaha Alif-beetadu u kala horeeyaan iyo dawladaha ay u sharaxan yihiin oo dawladaha qeybta ka ah heshiiskan.

7. Xubnaha guddiga waxaa la doortaa mudo afar sano ah. Waxaana la ogolyahay in hal mar dib loo soo doorto. Laakiin waqtiga xilka ay hayayaan lix xubnood oo ka tirsan guddiga oo lagu doortay doorashada hore waa in uu ku noqdaa loba sano oo qura; doorashadaas koowaad ka dibna, gudoomiyaha shirka ee lagu xusay heshiiskaan ayaa lixda xubnood qori tuur ku soo doorta.
8. Waxaa la dooranayaa lixda xubnood ee dheeraadka ah marka la qabanayo doorashooyinka caadiga ah sida ku xusan axkaamta khuseysa ee qodobkaan
9. Hadii uu dhinto ama uu is casilo mid ka mid ah xubnaha gudigu, ama uu shaqadiisa gudanwaayo sabab jirta aawgeed, dawlada qeybta ka ah heshiiskaan ee marka horeba soo sharaxatay waa in ay soo magacaawdaa khabiir kale oo buuxin karta sharuudaha lagu soo xusay qodobkaan si uu usii ahaado xubin inta waqtiga ka harsan.
10. Guddiga waa in uu isagu dajistaa hababka xeer hoosaadkiisa.
11. Xoghaayaha guud ee qaramada midoobay waa in uu gudiga siiyaa shaqaalaha iyo agabka loo baahanyahay si uu gudiga howshiisa uga soo dhalaalo sida uu dhigayo heshiiskaan waa in XGQ uu ku baaqaa qabashada kulankooda 1-aad;
12. Marka uu soo oggolaado golaha loo dhanyahay. Xubnaha gudiga ee la sameeyay waa in ay mushaaraadkooda laga siiyaa hantida qaramada midowbay sidey go’aansadaan golaha qaramada midoobay, iyadoo la raacayo shuruudaha iyo halbeegyada ay arrintu u dajiyaan golaha loo dhanyahay, lana eegayo ahmiyadda ay leedahay mas’uuliyadda gudiga loo idmaday ama uu haaya.
13. Xubnaha gudiga waa in ay xaq u yeeshaan tasiilaadka, mudnaanta iyo xassaanada ay leehiyiin khubarada ka shaqeeya hawlaha hoos yimaada qaramada midoobay, hadaba sida ku cad qodobada ku xusan axdiga mudnaanta iyo xassaanada ee qaramada midoobay (convention on the privilege and immunities of the United Nations).

## Qodobka 35-aad

### WARBIXINADA DAWLADAHA QEYBTA KA AH HESHIISKAAN

1. Dawlad kasta oo qeyb ka ah heshiiskaan waa in ay u gudbisaa gudiga iyadoo u soo marinaysa xoghaayaha guud ee qaramada midoobay. Warbixin dhameystiran oo ku saabsan tallaabooyinka loo qaaday meelmarinta waajibaadkeeda kaga aadan heshiiskaan, iyo wixii horumar ah ee ay kaga tilaabsatay arrintaan, laba sano ka dib marka heshiiskan ka dhaqan galo dawladaas.
2. Wixii markaas ka dambeeya, dawladaha qeybta ka ah heshiiskaas waa in ay soo gudbiyaan warbixintooda ugu yaraan afartii sanaba mar, iyo markasta oo gudiga ka codsado arrintaa.
3. Guddigu waxa uu qeexi karaa maba'diida hagid iyo tusmoyin ah oo ay u aragto laga mamaarmaan in lagu dabakho warbixinnada.
4. Dawladaha qeybta ka ah heshiiskaan ee warbixinteeda 1-aad u gudbisay guddiga waajib kuma ahan in ay ku soo darto macluumaad ay hore u soo gudbisay warbixinnada dambe, dawladaha qeybta ka ah heshiiskaan marka ay diyaarinanayaan warbixinnada ay u gudbinayaan guddiga waxaa looga baahanyahay in ay sameeyaan fur-furnaan iyo hufnaan iyagoo fiiro gaar ah siinaya axkaamta ku xusan faqradaha 3-aad ee qodobada 4-aad ee heshiiskaan.
5. Waxaa banaan in lagu daro warbixinnada waxyaabahii iyo dhibaatooyinkii saameynta ku yeeshay fulinta waajibaadka ku xusan heshiiskaan.

## Qodobka 36-aad

### EEGIDDA WARBIXINNADA

1. Guddigu waa in uu eegaa warbixin kasta, uuna u gudbiyaa wixi tallo iyo tusaale ah ee munaasib ah dawalada qeybta ka ah heshiiskaan ee arrinta khuseysa. Dawladda qeybta ka ah heshiisku waxa ay ugu jawaabi kartaa gudiga macduumaad kasta oo ay door biddo guddigu waxa uu ka codsan karaa dowladaha qeybta ka heshiiskaan warbixinno dheeraad ah oo xiriir la leh fulinta heshiiskan.

2. Dowladda qeybta ka ha heshiiskaan hadii ay la dib-dhacdo warbixin taasoo gudbinteeda waxa uu gudigu ogeysiinayaa dowladdaasi in ay sameyso baaritaan laga marmaarmaan ah oo ku aadan fulinta heshiiskaan, iyagoo duulaya xog lagu kalsoonyahay oo gudigu hayo, hadii aanay ku soo gudbin dowladaasu warbixinta looga fadhiyo (3) bilood gudahood laga soo bilaabo xiligii ogeysiiska gudiga. Waxaa uu ugu yeerayaa dowladaasi in ay ka qeyb qaadato baaritaanka. Hadii ay dawladaas ay soo gudbiso warbixinta, waxaa la hirgelinayaa axkaamta ku xusan farqada 1-aad ee qodobkaan.

3. Xoghaya guud ee qaramada midoobay waxaa uu ka dhigayaa warbixinta mid ay helikaraan dhamaan dawladaha qeybta ka ah heshiiskan;
4. Dawladaha qeybta ka ah heshiiskaan waa in ay si buuxda uga dhigaan warbixinadooda kuwa ay heli karaan dadweynahoodu, lana socon karaan talooyinka la bixiyay ee la xiriira warbixinadaan.
5. Gudiga waa in uu u gudbiyaa warbixin daah furan hadba sida ay ugu haboon tahay oo dawladaha qeybta ka ah heshiiskan ku dalbanayaan talo siin ama kaalmo, waana in guddiga isaga oo raacinaya faalooyinkiisa iyo talaabooyinkiisa ku aadan codsiyadaan iyo tilmaamahaas uu u gudbiyaa wakaaladaha hawlaha gaarka a qeybta iyo sanduuqyada iyo barnaamijyada qaramada midoobay iyo dhamaan hay’adaha kale ee howlaha gaarka ah qabta.

## Qodobka 37-aad

### ISKAASHIGA DHEXMARAYA DOWALADAHA KU JIRA HESHIISKA IYO GUDDIGA

1. Dawlad kasta oo qeyb ka ah heshiiskan waa in ay la shaqeysaa gudiga, gacanna ku siisaa xubnaha ugu jira gudiga in ay ka soo dhalaalaan waajibaadkooda.
2. Guddigu waa inuu tixgelin muhiim ah siiyaa, marka laga hadlayo xiriirka uu la leeyahay dawaladaha ku jira heshiiska, hababka iyo tallaabooyinka loo hormarin karo awoodaha wadniaga ah si gacan looga geysto meel marinta heshiiskan oo ay ku jirto in iskaashi caalami ah arrinta laga yeesho

## Qodobka 38-aad

### XIRIIRKA GUDDIGA LA YEELANAAYO HAY'ADAHA KALE

Si gacan loogu geesto in heshiiskaan si wax ku ool ah loo fuliyo lana dhiiri geliyo iskaashi caalami ah oo laga yeesho dhinacyada heshiiskan taabanayo.

(a) Hadiyadaha hawlaha gaarka ah qaabilsan iyo wakaaladaha kale ee qaramada midowbay waxay xaq u leeyahiin in cid iyaga wakiil ka ah u joogto wixii ku saabsan fulinta qodobo soo galaya xayndaabka howshooda. Guddiga waxaa uu ka codsan karaa wakaaladaha iyo hay'adaha qaabilsan hawlaha gaarka ah in ay usoo gudbiyaan talooyinka ay qabaan khubaradooda ee ku aadan hirgelinta dhinac ka mid ah dhinacyada heshiiskan kaasoo soo hoos galaya awooddooda shaqo ee hay'ada sidoo kale guddigu waxa uu ugu yeeri karaa wakaaladaha qaabilsan hoawlaha gaarka ah iyo laamaha kale ee raacsan qaramada midowbay soo gudbinta warbixino ku saabsan sidii loo hergelin la haa heshiiska inta markaas iyaga ka quseysa.

(b) Guddigu waa in uu latashadaa marka uu hawshiisa gudanayo, hay'adaha kale ee xiriirka la leh kuwaasoo lagu abuuray heshiisyada caalamiga ah ee xaquuqda aadanaha. Iyadoo looga gol leeyahay in la hubiyo in qolo walaba mabaadii'deeda, talooyinkeeda iyo fikradaheedu ay yihiin kuwa isla jaan qaadaya si loo baajiyo isbuurin iyo isdul-fuul.

## Qodobka 39-aad

### WARBIXINTA GUDDIGA.

Guddiga waa inuu warbixin siiyaa golaha guud iyo golaha (qaramada midoobay) u qaabilsan dhaqaalaha iyo bulshada taasoo looga hadlaya howlahiisa labadii sano hal mar wuxuuna soo gudbin karaa talooyin iyo hindisayaal ka shidaal qaadanaya baaritaanadii iyo warbixinadii ay soo gudbiyeen dawladaha ku jira heshiiskan. Talooyinkaasi iyo hindisayaashaas guud waa in lagu daraa warbixinta guddiga oo ay la socoto faalooyinka iyo mulaaxadaadka dowladaha heshiiska oo ku jira ee qabaan hadiiba ay jirto.

## Qodobka 40-aad

### SHIRARKA AY YEESHAAN DOWLADAHA QEYBTA KA AH HESHIISKA

1. Dawladaha qeybta ka ah heshiiskan waa in ay shir isugu yimaadaan markasta oo laga doodayo ama la eegayo arrin kasta oo la xiriirta hirgelinta iyo meelmarinta heshiisan,
2. Xoghayaha guud ee qaramada midoobay waxa uu kulan isugu yeerayaa dawladaha qeybta ka ah heshiiskaan muddo aan ka dambeyn Karin lix bilood ka dib dhaqangalka heshiiskan. Xoghayaha guud waxaa uu ugu yeeraya dawladaha in shirarka soo socda ay qabsoomayaan labadii sanaba halmar iyo qaraar markaas haddii ay ku gaaraan dawladaha ku jira heshiiska in kulan markaas la iskugu yimaado.

## Qodobka 41-aad

### KEYDIYAHA HESHIISKAN

Cidda (heshiiskaan) loo dhiibayo oo haynaya waa inuu noqdaa xoghaya guud ee qaramada midoobay.

## Qodobka 42-aad

### SAXIIXA (HESHIISKA)

Saxiixidda heshiiskan waxa uu ufuran yahay dhamaan dawladaha iyo hay'ad goboleedka dhamaystiraya heshiiskan ee ku sugan xarunta qaramada midoobay ee new York, laga bilaabo 30 ka maarso 2007

## Qodobka 43-aad

### RAALI KU NOQOSHADA (HESHIISKAAN FULINTIISA WAAJIBINEYSA)

1. Heshiiskan waxa uu ku xiranyahay ansixinta (ay baarlamaanadood ka ansixiyaan) dowladaha horay u saxiixay iyo oggolaanshaha (xaqiijinta) urur goboleedyada saxiixay ee dhammaystiraya heshiiskan waxaana heshiiskani uu ufuranyahay oo ku soo biiri kara dawlad kasta iyo urur goboleed kasta oo dhameystiraya heshiiskaan.

## Qodobka 44-aad

### URUR GOBOLEEDYADA HESHIISKA DHAMMEYSTIRAYA

1. "Urur Goboleed dhamaystiraya" waxay u taagan tahay hay'ad ay ka sameeyaan dawlado madaxbanaan meel ka mid ah adduuka iyadoo dawladaha heshiiska ku jira ay ku caddeynayaan qoraalladooda rasmiga ah xadka ay gaar-sii-santahay awooddooda sida uu dhigayo heshiisku, waana in ay gaarsiiyaan cidda haysa (heshiiska wax ka baddalid kasta oo lagu sameeyo heshiiska oo awooddeeda aan ka baxsanayan.
2. Tixraacyada ku xusan heshiiskan ee "dowaladaha qeybta ka ah heshiiskaan" waxa lagu dabaqayaa hay'adaas inta soo galaya awoodeheeda
3. Ujeedooyinka faqrada 1-aad ee qodobka 45-aad iyo faqaradaha 2-aad iyo 3-aad ee qodobka 47-aad ee heshiiskan waa in aan wax laga soo qaadin qoraal kasta oo urur goboleed dhamaystiraya heshiiska uu kaydiyo.
4. Urur goboleedyada dhameystirani waxay adeegsan karaan wixii awooddooda (sharci) soo galaya xaqa ah in ay codkooda ka dhiibtaan shirka ay isugu yimaadaan dowaladaha qeybta ka ah heshiiska iyagoo yeelanaya tiro codad ah oo la eg ama udhigma tirada dawladaha ururadaas ku jira ee hadana heshiskan xubnaha ka ah.

## Qodobka 45-aad

### DHAQAN GALKA HESHIISKA

1. Axdigaan wuxuu dhaqan galayaa maalinta sodonaad (30 aad) ee ku xigta maalinta keydinta qoraalka labaatanaad (20-aad) ee ansixinta iyo ku soo biiridda.
2. Dhaqan galka heshiiskan waxa uu bilaabanayaa oo ku fulayaa dal walba ama hay'ad goboleed kasta oo dhameystiraya, oo ansixisa ama ku soo biirta heshiiska ka dib kaydinta qoralka labaatanaad (20-aad) maalinta sodonaad (30-aad) ee laga bilabo maalinta keydinta ama dhigeynta.

## Qodobka 46-aad

**KA GAABSASHADA**

1. Lama oggola in la muujiyo ka gaabsasho (ku aadan heshiiskaan) oo ka hor imaanaya nuxurka ama mawduuca iyo ujeedooyinka heshiiskan.
2. In lala noqdo ka gaabsashada waqti kasta waa banaan yahay,

## Qodobka 47-aad

**WAX KA BEDDELKA**

1. Dal walba oo qeyb ka ah heshiiskaan waxa uu soo jeedin karaa wax ka badalida heshiiskaan iyagoo u gudbinaya xoghayaha guud ee qaramada midoobay, xoghayaha guudna waa inuu ogeysiiyaa dalalka qeybta ka ah heshiiskaan wax ka badalka la soo jeediyay isagoo ka codsanaya dowladaha in ay soo war geliyaan hadii ay door bidiyaan in la qabto shir lagu falanqeenayo go'aana looga gaaro hindisaha iyo hadiikalaba, hadii sidax meelood meel ugu yaraan dalalka ku jira heshiiska, ay doorbidaan in la qabto shir, xoghayaha guud ee qaramada midoobay waa in uu muddo afar bilood gudahooda laga soo bilaabo xiliga ogeysiiskaas, uu qabtaa shirka, ayada oo ay maamuleyso qaramada midoobay xoghayahu waa in uu u gudbiyaa wax ka badal kasta oo ay sidax meelood laba dalalka qeybta ka ah heshiiska, kuwasi iyagu kulanka jooga, codkoodana dhiibtay, ay u codeeyeen golaha loo dhanyahay ee qaramada midoobay si ay u qaabilaan, ka dibna waa inuu u gudbiyaa (waxkabeddelka) dhamaan dawladaha heshiiska ku jira si ay iyana u aqbalaan.
2. Waxa u hirgelinayaa wax ka beddelka la qabtimay lana oggolaaday sida ku xusan faqradda 1-aad qodobkan Maalinta 30-aad ee ku xigta maalina tirada qoraalada la qabalay ee la kaydiyay gaaraan seddex meelood labo meelood ee dalalka qeybta ka ah heshiiska laga bilaabo taariikhdii waxka-beddelka. Ka dib waxa waxka-beddelkani ku fulayaa dalwalba oo qeyb ka ah heshiiska Maalinta sodonaad (30) ee ku xigta wakhtiga u dalkaasi dhigo ama keydiyo qoraalka aqbalaadda. Balse waxka-beddeladu waajib kuma aha dawladaan la aqbalin.

3. Hadii dawladaha ku jira heshiiska ee shirka isugu yimaaday isku racaan wax ka badalka la soo jeediyay in lagu sameeyo heshiiska, waxa uu bilaabmayaa dhaqan galka wax ka badalka ogolaaday lana qiray ayadoo la raacayo sida ku xusan faqrada 1-aad, ee qodobkaan oo la xiriira kaliya qodobada 34-aad, 38-aad, 39-aad iyo 40-aad, dhamaan dawladaha qeybta ka ah heshiiska laga bilaabo Maalinta (30)-aad ee ku xigta Maalinta tirada qoraalada aqbalaada ee keydsan ama dhiteysan ee tira ahaan ka noqdaan seddex meelood labo meelood dawladaha heshiiska ku jira taariikhda la qabatimay waxka-beddelka (heshiiska).

## Qodobka 48-aad

### KA BIXIDA HESHIISKA

Dalwalba oo heshiiska ku jira Wuxuu ka bixi karaa axdigaan waqti kasta asagoo si qoraal ah u ogeysiinaya (talaabadaas), xoghayaha guud ee qaramada midoobay, ka bixidda ceenkaasi ah waxa taabagal ka noqoneysaa dalka ay quseyso sanad ka dib laga bilaabo tan iyo maalintuu wargelinta (ka bixidda) uu helay xoghayaha guud

## Qodobka 49-aad

### QAABKA LAGU HELI KARO (HESHIISKA)

Qoraalka heshiiska waa inuu noqdaa mid si fudud loo heli karo,

## Qodobka 50-aad

### QORAALADA ASALKA AH (SAXDA AH)

Qoraalada Heshiiskaan ee ku qoran afafka carabiga, shiinaha, ingiriiska, ruushka iyo isbaanishka waa kuwa isku midka ah asalka ah, (aan koobi iyo sanifaad midna ahayn) ayadoo la sugayo arrintaas, Waxaa saxiixay heshiiskaan dadka hoos saxiixdoodu ka muuqdo ayagoo Wakiil ah dawladahoodii.

# Hab-maamuuska ikhtiyaariga ah (borotakoolka) ee Axdiga ilaalinta Xuquuqda Dadka Naafada ah

## Waxaa Ansixiyay Golaha Guud ee Qaramada Midoobay ee Tirsigiisu yahay 61/106 13-kii December 2006

## DAWLADAHA QEYBTA KA AH HAB-MAAMUUSKAN WAXA AY ISKU RAACEEN SIDAN SOO SOCOTA

### Qodobka 1-aad

1. Dawladda qeybta ka ah hab-maamuuskaan ("Dawladda Qeybta ka ah") waxa ay aqoonsanaysaa awoodda guddiga xuquuqda dadka naafada ah ('Guddiga") si ay u hesho una fiiriso fariimaha ay usoo diraan shakhsiyaad ama kooxo, ama dad ku hadlaya magaca shakhsiyaadka ama magaca kooxaha kuwaas oo soo hoos galaya awooddeeda, ayagoo sheeganaya in ay yihiin dhibbaneyaasha xadgudubka dawlad qeyb ka ah axkaamta heshiiskaan.
2. Lama oggola in guddiga ka helo farriin la xiriira dawlad ku jirta heshiiskan, balse aan qeyb ka ahayn hab-maamuuskaan.

### Qodobka 2-aad

Guddigu wa in uu kasoo qaadaa fariimaha mid aan la aqbali Karin hadii ay:

(a) fariintu ay tahay mid aan la garanayn

(b) In xiriirka fariintu ay keeneyso xadgudub lagu sameeyay hanaanka fariinta (loo soo gudbiyay ama loo dhigay) ama ay tahay mid aan waafaqsanayn qodobada heshiiskan.

(c) In arrintan laftarkeedu tahay mid gudigu horey u baaray, ama ay ahayd oo ay tahayba mid baarintaan ku socdo sida uu dhigayo hababka kale ee baarintaanada caalamiga ah ama ay dhigayso dhexdhexaadin caalami ah.

(d) In aan soo wada marin dhamaan hababka dhayidda (mag-dhowga) ka jirta wadanka gudihiisa, xeerkaan ma fulayo hadii waqtiga fulinta dhayidda (mag-dhowga) ay daba dheeraatay si aan macquul ahayn ama aan loo badineyn in ay keento arrintaasi dhayid (mag-dhowga) wax ku ool ah

(e) In ay tahay mid aan raad cad lahayn ama aan lagu xoojin caddeymo ku filan.

(f) Ama arrimaha ay ka hadlaysaa fariintu ay yihiin kuwo dhacay intii aanu ka dhaqan gelin hab-maamuskaan dawladda ku jira heshiiska ee arrintu ay khuseyso, hadii aanay arrimahaas ahayn kuwa socday waqtiga dhaqan galka ama ka dib.

**Qodobka 3-aad**

Iyadoo la raacayo axkaamta qodobada 2-aad ee hab-maamuuskaan, guddiga waa in uu adeegsadaa habqarsoodi ah soo bandhigada farin kasta ee loogu gudbinaya dawladaha qeybta ka ah hab-maamuuskan . dawlada heshay fariintaas waa In ay u gudbisaa guddiga, waqti ku siman lix bilood gudahood, sharaxaado ama bayaano qoraal ah oo ay ku caddeyneyso arrintaas iyo talaabooyinka daaweynta ah ee dawladaas ay qaaday.

**Qodobka 4-aad**

1. Markasta oo guddigu helo fariin ka dib iyo inta aan lagaarin go'aan ku aadan arrintaas guddigu wxuu uu gudbin karaa dawladaha qeybta ka ah heshiskan ee ay quseyso codsi deg deg ah si dawladdaas ay u qaado talaabooyin ku meel gaar ah si loo baajiyo waxyeelo aan wax laga qaban Karin loo geysto dhibane ama dhibanayaasha xadgudubka eediisu taagneyd

2. Marka ay gudigu adeegsadaan awooddooda Waafaqsan farqada 1-aad ee qodobkan arrintaas kama dhigna oo lagama dheehan karo aqbalaada ama saxsanaanta fariinta.

**Qodobka 5-aad**

Guddiga waa in uu qabtaa kulammo albaabadu u xiranyhiin marka ay baarayaan farriinta hab-maamuuska aan baxasaneyn. Guddigu waa in uu u gudbiyaa marka uu daraaseeyo fariintaas ka dib hindisiyaashiisa iyo talooyinkiisa, hadii ay jiraan dawladda qeybta ka ah hab-maamuuskaan ee ay quseyso iyo dacwadahoodii.

**Qodobka 6-aad**

1. Hadii Guddigu helaan xog lagu kalsoon yahay oo muujinaysa xa-gudubyo waaweyn ama agaasiman oo ay gashay dawlad qeyb ka ah xuquuqda ku xusan heshiiskaan, Guddigu waa in uu u yeeraa dawladaas qeybta ka ah hab-maamuuskaan si la isaga kaashado baaritaan lagu sameyo xogtaas (soo yeertay) iyo gudbinta milicsiyo ama faalooyin ku aadan xogta laga hadlayo.
2. Iyadoo si gooni ah loo eegayo milicsiyada (faalooyinka) ay soo gudbisay dawladaha qeybta ka ah hshiiska ee ay khuseyso arrintu, iyo xog kasta oo lagu kalsoonayahay ee la hayo. Guddiga waxa uu magacaabi karaa xubin ama ka badan oo xubnihiisa ka mid ah si ay u sameeyaan baaritaan ay u soo gudbiyaan sida ugu dhakhasaha badan warbixin guddiga (ku saabsan arrinta ay baareen). Baaritaankaas Wuxuu noqon karaa booqosho gobol (dhul) katirsan dawladaha qeybta ka ah hab-maamuuskan lagu soo kala bixiyo, haddii loo baahdo oo ay oggolaato dawladaasu.
3. Darsidda natiijyoonka ka soo baxa baaritaanka ka dib, Guddigu waa in ay u gudbiyaan (wixii ay soo arkeen ama sida ay la tahay) dawladda qeybta ka ah ahab-maamuuskaan ee ay quseyso natiijooyinka iyadoo ay la socoto jawaab ka bixin iyo talo soo jeedin.
4. Waa in ay gudbisaa dawladda qeybta ka ah hab-maamuuskan ee ay quseyso milicsiyada (faalooyinka) Guddiga, lix bilood gudahood laga

soo bilaabo markay helaan natiijooyinka iyo jawaab bixinta iyo talo bixinta uu soo gudbiyay guddigu.

5. Waa in loo fuliyaa baaritaanka si qarsoodi ah wana in la isku taxaluujiyaa sidii loo heli lahaa iskaashiga dawladda qeybta ka ah Hab-maamuuskaan inta lagu jiro dhamaan heerarka baaritaanadda.

## Qodobka 7-aad

1. Guddigu waxa uu ka dalban karaan dawladda qeybta ka ah heshiiskaan in ay ku darto warbixinteeda ay soo gudbinayso, sida uu dhigayo qodobka 35-aad ee heshiiskan faahfaahinta tallaabooyin kasta oo ay qaadeyso iyadoo ka jawaabeysa baaritaanka la sameeyey sida uu dhigayo qodobka 6-aad ee hab-mamuuskaan.
2. Guddigu waxa ay dalban kartaa, haddii loo baahdo, lix bilood ka dib sida ku xusan farqadda 4-aad ee qodobka 6-aad dawladda qeybta ka ah heshiiskaan ee arrintu quseyso, in ay ka soo wargaliso talaabooyinka laga qaaday baaritaanka.

## Qodobka 8-aad

Dawladda qeybta ka ah heshiiskan waxa ay ogeysiin karta, waqtiga saxiixidda hab-maamuuskan ama aqbalaadiisa, ama ku biirida, in aysan aqoonsanayn awoodaha guddiga ee ku xusan aqodobada 6-aad iyo 7-aad

## Qodobka 9-aad

Xoghayaha guud ee qaramada midoobay waa in uu noqdaa keydiyaha (qofka haynaya qoraalka) hab-maamuuskaan.

## Qodobka 10-aad

Qalin ku duugisata hab-maamuuskaan waa mid u furan dowladaha iyo urur goboleedyada dhameystiraya heshiiskan ee saxiixay heshiiska, waxa uuna ka dhacayaa saxiixaas xarunta qaramada midoobay ee new York, taariikhdu marka ay tahay 30 marka 2007

## Qodobka 11-aad

Hab-maamuuskaan waxa uu ku xiranyahay ansixida dawladaha qalinka ku duugay hab-maamuuskaan kuwaas oo ansixiyay ama ku biiray heshiiskan, waxaana uu ku xiranyahay oggolaanshaha rasmiga ah ee laga helo midowga urur goboleedyada dhameystiray ee saxiixay hab-maamuuskan, kuwaas oo horey si rasmi ah u ogolaaday ama ugu biiray heshiiska, ku soo biiridda hab-maamuuskan waxa uu u furanyahay dowlad kasta ama urrur goboleedyada dhameystiray ee ansixisay ama ogolaaday si rasmi ah ama ku biiray heshiiska balse aan saxiixin hab-maamuuskan.

## Qodobka 12-aad

1. "urur goboleedyada dhameystirka heshiisaka" Waxaa loola jeedaa urur ay sameeyaan dowladaha madaxa banaan, meel aduunka ka tirsan, dowladahaasi oo ayagoo xubno ah heshiiskan ku wareejiya ururkaas awoodahooda la xiriira arrimaha uu xeerinaayo heshiiskan iyo hab-maamuuskan ururadaasna waa in ay ku muujiyaan qoraaladooda rasmiga ah, xuduudaga awoodaha ay u leeyhiin arrimaha uu xeerinaayo heshiiskan iyo hab-mamuuskan, ka dibna waa in ay gaarsiisaa keydiyaha wax-kabedel kasta oo ku yimaad si xuduuda awoodaheeda.
2. Tixraacyada "Dawladaha Qeybta ka ah " ee ku xusan hab-maamuuskan waxa lagu dabbaqayaa ururradaas inta awoodooda soo galaysa,.
3. Ujeedooyinka farqada 1-aad ee qodobka 13-aad iyo farqada 2-aad ee qodobka 15-aad ee heshiiskaan darted, waxba laga soo qaadi mayo qoraal kasta oo ay kaydiso urur goboleedyada dhameystiraya heshiiskaan.
4. Urur goboleedyada dhammeystiraya heshiiska waxa ay adeegsan karaan xaqooda ah in ay codkooda ka dhiibtaan arrrimaha soo hoos galaya awooddooda marka ay dhacayaan kulammada dawladdaha qeybta ka ah heshiiskan, waxayna leeyhiin codad la mid ah codadka dawladaha xubnaha ah kuwaas oo qeyb ka ah hab-maamuskan. Ururradaas ma codeynkaraan haddii dawlad ka mid ah xubnaheeda ay codeyso, lidkeeduna waa la mid.

**Qodobka 13-aad**

1. Iyadoo la raacayo dhaqan galka heshiiskan, hab-maamuuskan wuxuu dhaqan galayaa maalinta soddonaad (30-aad) ee ku xigta maalinta keydinta dukumeentiga tobanaad (10-aad) ee ansixinta ama ku soo biiridda Hab-maamuuskaan.
2. Hab-maamuuskaan wuxuu ku fulayaa dal walba ama urur goboleed dhammeystiraya heshiiska oo ansixinaya ama ku soo biiraya Hab-maamuuskan ka dib kaydinta dukumeentiga tobanaad ee ansixinta ama ku biiridda maalinta soddonaad ee taariikhda la diyaariyay.

**Qodobka 14-aad**

1. Lama oggala xadiddad/ka –gaabsasho aan waafaqsaneyn ujeedooyinka Hab-maamuuskaan.
2. Xadidaad/ka-gaabsasho kasta waa laga laaban karaa markii la doono.

**Qodobka 15-aad**

1. Dal walba oo qeyb ka ah heshiiska waxa ay soo jeedin karaan wax ka beddelida hab-maamuska waxa ayna u gudbinayaan xoghayaha guud ee qaramada midoobey. Xoghayaha guud waxa uu gaarsiinayaa dalalka qeybta ka ah Heshiiskan wax ka beddelka la soo jeediyay, isagoo codsanaya in la soo ogeysiiyo haddii ay doorbidayaan in loo qabto kulan dalalka qeybta ka ah si ay u eegaan hindisaha wax ka-beddelidda go’aanna ugaga gaaraan. Haddii saddex meelood meel dalalka qeybta ka ah hab-maamuuskaan ugu yaraan ay doorbidaan in la qabto shirka, afar bilood gudahooda marka laga soo bilaabo farriintaas, xoghayaha guud waxa uu qabanayaa kulan ay maamuleyso qaramada midoobay. Xoghayaha guudna wuxuu waxka-beddelid kasta oo ay seddex meelood labo dalalka qeybta ka ah hab-maamuuskaan ee joogay codkoodana dhiibtay ay isku raacaan u gudbinayaan golaha guud ee qarammada midoobay si loo ansixiyo, ka

dibna wuxuu u gudbinayaa dalalka qeybta ka ah hab-maamuuskaaskaan si ay u aqbalaan.

2. Waxaa uu hirgaliyaa waxka-beddelka la oggolaaday ee la ansixiyey si waafaqsan faqradda 1aad ee qodobkan maalinta soddonaad ee ku xigta maalinta kaydinta tirade dukumentiyada aqbalaaddda ay soo gudbiyaan dawladaha qeybta ka ah hab-maamuuska, ay gaaraan saddex meelood labo dawladba oo qeyb ka ah heshiiskaan waxuu wax ka beddelku ka dhaqan galayaa maalinta soddonaad ee ku xigta wakhtiga dalkaasi dhigo dukumentiga aqbalaadda. Wax ka beddelidda waxa ay waajib ku noqonaysaa dalalka qeybta ka ah hab-maamuuskan ee aqbalay (oo kaliya).

**Qodobka 16-aad**

Dal walba oo hab-mamuuskan ku jira wuxuu ka bixi karaa hab-maamuuskan waqti kasta isagoo si qoraal ah ugu sheegaya xoghaya guud ee qaramada midoobay. Ka bixidda caynkaas ah waxay ka dhaqan galaysaa dalka ay quseyso muddo sannad ah laga billaabo taariikhda wargalinta uu helay xoghayaha guud.

**Qodobka 17-aad**

Qoraalka hab-maamuuskan waa in uu noqdaa mid si fudud loo heli karo.

**Qodobka 18-aad**

Nuquladda heshiiskan ku qoran afka carabiga, shiinaha, Ingiriiska, Ruushka, iyo Isbaanishka waa kuwa isku mid ah oo asal ah (oo koobi iyo sanifaad midna ahayn).

Iyadoo arrintaas la xaqiijinayo lana qirayo, shakhsiyaadka saxiixoodu hoos ka muuqdo waxa ay qalinka ku duugayaan heshiiskaan iyaga oo wakiil ka ah dawladahooda.

**XEER MADAXWEYNE Lr. 160** TAARIIKH: 17/06/2019

**MAGACAABIS KU-XIGEENKA AGAASIMAHA GUUD EE MADAXTOOYADA MADAXWAYNAHA J.F.S**

**MARKUU ARKAY**: Qodobka 87aad ee Dastuurka KMG ah ee Dalka Farqadda 1aad Xarafkiisa "C"

**MARKUU ARKAY**: Qodobka 90aad, ee Dastuurka KMG ah xarafkiisa "L"

**MARKUU ARKAY**: Baahida loo qabo magacaabidda ku-xigeenka Agaasime Guud ee ay yeelato Madaxtooyada

**Madaxweynuhu Waxa uu soo saaray Xeerkaan magacaabis**


## Qodobka 1aad

Laga Bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 17-ka June 2019, Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed waxa uu u magacaabay **Cabdullaahi Sheekh Cabdikariin Yuusuf** in uu noqdo Ku-Xigeenka Agaasimaha Guud ee Madaxtooyada JFS.

## Qodobka 2aad

Xeerkan waxa uu dhaqangelayaa markii uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ee Jamhuuriyadda Soomaaliya

**MUQDISHO: 17/06/2019**




Madaxweynaha J.F.S
Maxamed Cabdullaahi Maxamed (Farmaajo)

**XEER MADAXWEYNE Lr. 161** TAARIIKH: 19/06/2019

**OGGOLAANSHO XUKUN DIL TOOGASHO**

**MADAXWAYNAHA J.F.S**

**MARKUU ARKAY**: Qodobka 87aad, Farqadda 1aad, xarfaha ‘A’ ‘B’ iyo “C” ee Dastuurka.

**MARKUU ARKAY**: Qodobka 10aad ee Dastuurka KMG

**MARKUU ARKAY**: Qodobada kala ah 343aad XCS iyo 19aad XCCQS.

**MARKUU ARKAY**: Warqadda Lr. XG/CQS/314/2019 ee codsiga Xeerilaalinta Guud ee Ciidamada Qalabka Sida ee soo baxday 31/03/2019

**MARKUU ARKAY:** inay waajib tahay badbaadinta nafta muwaadiniinta Soomaaliyeed

Wuxuu xeeriyay

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo maalinta uu Madaxweynaha saxiixo waxuu si rasmi ah u ogolaaday in lagu fuliyo xukunka dil toogasho gacan ku dhiigleyaasha kala ah:-

1- **Farxaan Maxamed Samatar** 20 jir ah ina Safiyo Maxamed ku dhashay Galgaduud

2- **Cabdinaasir Dhaqane Xasan** 18 jir ina Xabiibo Maxamuud Muxumed ku dhashay Gedo

3- **Abshir Maxamed Xaaji Buulle** 20 jir ina Xabiibo Maxamed ku dhashay Saakow. Waxay ay gacan ku dhiiglayaashu si wadajir u weerarareen Hotel Naasa-Hablood 2, weerarkaas oo ka dhashay dhimasho 30 ruux iyo dhaawac 54 ruux shacab ah taariikhdu markeey ahayd **28/10/2017.**


## Qodobka 2aad

Waxaa Xeer ilaalinta Guud  Ciidamada Qalabka Sida la farayaa inay si deg deg ah u fuliso dilka toogasho

## Qodobka 3aad

Waxaa uu dhaqangelayaa Xeerkan marka uu Madaxweynaha J.F.S saxiixo waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee Jamhuuriyadda Soomaaliyeed

**MUQDISHO: 19/06/2019**




Madaxweynaha J.F.S
Maxamed Cabdullaahi Maxamed (Farmaajo)

## Ujeeddo: Go'aan Gole Ansixinta Siyaasadda Sameynta Hay'adda Maal-gelinta Ganasciga Yar-yar iyo Kuwa Dhexe

### *Ra'iisul Wasaare Ku-xigeenka Xukuumadda JFS*

**Markuu Arkay**: Qodobka 99$^{aad}$ , (a), (b) iyo (e) ee Dastuurka KMG

**Markuu Arkay**: Qodobka 100$^{aad}$ , (a), iyo (d) ee Dastuurka KMG

**Markuu Arkay**: Warqadda summaddeedu tahay **MOF/OM/142/19 ee 23/02/2019** ee soo jeedinta Wasiirka Maaliyadda, kuna saabsan ansixinta **Siyaasadda Samaynta Hay'adda Maal-gelinta Ganacsiga Yar-yar iyo Kuwa Dhexe.**

**Markuu Arkay**: Go'aanka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.66.02.19** ee **28/02/2019** kuna saabsan ansixinta "**Siyaasadda Samaynta Hay'adda Maal-gelinta Ganacsiga Yar-yar iyo Kuwa Dhexe**" oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyey.

**Markuu Tixgeliyey**: Muhiimadda ay leedahay Siyaasadda Samaynta Hay'adda Maal-gelinta Ganacsiga Yar-yar iyo Kuwa Dhexe

## *Wuxuu Xeeriyay:*

### Qodobka 1aad

Go'aanka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.66.02.19** ee **28/02/2019** kuna saabsan ansixinta "**Siyaasadda Samaynta Hay'adda Maal-gelinta Ganacsiga Yar-yar iyo Kuwa Dhexe**" oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyey.

## Qodobka 2aad
## SHURUUD

Bankiga Dhexe wuxuu mas'uul ka yahay siyaasadda lacagta Dalka. Sidaas darteed, Hay'adda Amaah-siinta Ganacsiga yar-yar iyo kuwa dhexe waa in ay:

1. Shati ka qaata an Bankiga dhexe ee Soomaaliya
2. Lacagtu ku soo dhacdaa Khasnadda Bankiga Dhexe oo u gudbinaaya Hay'adda.
3. Amaahda Ganacsiga yar-yar iyo kuwa dhexe ay maamushaa Hay'adda Amaah-siinta.

## Qodobka 3aad

Waxa Wasaaradda Maaliyadda loo igmaday in ay **hirgeliso, meel-marisana Siyaasadda Samaynta Hay'adda Maal-gelinta Ganacsiga Yar-yar iyo Kuwa Dhexe.**

## Qodobka 4aad

Siyaasadda Samaynta Hay'adda Maal-gelinta Ganacsiga Yar-yar iyo Kuwa Dhexe, waxa ay dhaqan-gelaysaa marka uu saxiixo Ra'iisul Wasaare Ku-xigeenka Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
WAA LA DIIWAAN GELIYEY
DIIWAAN NO: HAN/0018/301
TAARIIKH 5/3/2013
SAXIIXA HANTIDHAWRKA GUUD

Mudane Mahdi Maxamed Guuleed " Khadar
Ku-Simaha Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS
Ahna Ra'iisul Wasaare Ku-Xigeenka Xukuumadda JFS

# XEER-HOOSAADKA SHIRKADDA KOBCINTA DHAQAALAHA EE "GARGAARA"

## Hordhac

***Sharaxaad**: Hordhacu waxa soo bandhigayaa ujeeddooyinka xeerka shirkadda, kuwaas oo ku xiriirsan Qorshaha Horumarinta Qaranka ee sannadaha 2017-2019, iyo ahmiyadaha lagu sheegay, si loo kobciyo dhaqaalaha iyo tartanka ganacsatada kaas oo dhammaan dadka u horseedaya shaqooyin iyo hanti dhaqaale. Hantida baahsani waxa ay laf-dhabar u tahay dakhliga dowladda si ay muwaadiniinta ugu fidiso adeegyo tayo leh. Asaasidda shirkaddani waxa ay wax ka taraysaa xaqiijinta ujeeddooyinka qaran iyo hor-tabintooda.*

*Xeer-hoosaadkani waxa uu soo hormarinayaa hanka dowladda ee ah kobcinka dhaqaalaha ku dhisan tartanka ganacsiga gaarka loo leeyahay kaas oo dhalaya dhaqaale sal-ballaaran oo abuuraya awoodayn dhaqaale iyo isla-xisaabtan shirkaddu ku dhisan tahay. Shirkaddu waxa ay dowladda ka caawinaysaa in ay gudato waajibaadkeeda iyada oo u abuuraysa qaab shirkad rasmi ah si loo hubiyo in maalgelin dhaqaale laga abaabulo shirkadaha caalamiga ah, kuwa dowliga iyo kuwa gaarka loo leeyahayba, iyada oo la isticmaalayo qaab muujinaya tallaabooyin daahfurnaan, hubin iyo isu-dheellitirnaan ku dhisan si loogu dhaqmo mabaadii'da ugu fiican ee maamulka shirkadaha*

Xeerkan waxa lagu abuurayaa kuna shaqaynaya oo shaqsiyad qaanuuni ah leh [**Gargaara**], si ay u abaabusho, horumar dhaqan-dhaqaale una fulisa maarayn dhaqaale – bixisa deymo si dhaqaalaha u hormariso (financial intermediation function) si dastuuri ah, si loo kobciyo loona fududeeyo ganacsiga, shaqo-abuurka iyo awoodaynta dhaqaalaha Aadka u Yaryar (Micro), kuwa Yaryar iyo kuwa Dhex-dhexaadka ah (GAYYD). Ujeeddada ugu weyni waa in Gargaara ay abaabusho dhaqaalaha iyo khayraadka mid dowladeed iyo mid caalami oo gaar loo leeyahay iyo mid dadweyne si loo gaaro horumar dhaxal-gal ah, iyadoo si toosnaan, xalaalnimo, daahfurnaan iyo masuuliyadi ku jirto loo hormarinayo.

**Qaybta I**
**Macnaha kelmadaha**

*Sharaxaad: Qaybta 1aad waxa ay qeexaysaa macnaha loo adeegsanayo eray-bixinta iyo tilmaamaha ee xeerkan. Ujeeddadu waa in laga dheeraado madmadow iyo macnayaasha kale ee sida caadiga ah loo adeegsado kelmadaha iyo tilmaamaha xeerka ku jira.*

1) Xeerkan Shirkadaha, haddii aanay si kale ugu jirin, waxa ay kelmadahan hoose tilmaamahaan:

(i) BOD "Guddiga" waxa loola jeedaa Guddiga Agaasinka ee shirkadda oo ay ku jiraan xubnaha agaasinta kaga mid noqday xafiisyo kale oo ay hayaan dartood (ex officio);

(ii) "Shirkad" waxa loola jeedaa shirkad shaqsiyad qaananiya leh oo lagu dhisay xeerkan (ama magic kale oo rasmiya oo markaas kedib la qaatay);

(iii) "Waqtiga uu Dhaqan-galka" waxa loola jeedaa waqtiga uu Mashruuca Kor-u-qaadidda Casriga ah ee Horumarinta Tayaynta, Nolosha iyo Ganacsiga Soomaaliyeed uu si rasmi ah u bilaabmo; (SCALED-UP)

(iv) "Hay'adaha Saamileyda ah" waxa loola jeedaa saamileyda shirkadda ee aan ka ahayn ashkhaas iyo Dowladda Federaalka Soomaaliya;

(v) "Wasiir" waxa loola jeedaa Wasiirka Maaliyadda ama Wasiirka waqtigaas ka wakiilka ah ee halkiisa/halkeeda ku jira;

(vi) "Buug-gacmeedka Mashruuca GAYYD u Gaarka ah" waxa loola jeedaa siyaasadda hawlgalka rasmiga ah iyo nidaamka shirkadda ee guddigu ku dhaqmay waqtiyo kala duwan, u noqda lifaaq ama jadwal Buug-gacmeedka Hawlaha Mashruuca (BHM);

(vii) "Saamiyo" waxa loola jeedaa saamiyada xeerkan lagu tixraacay.

**Qaybta II**
**Dhaqangalka**

| | |
|---|---|
| ***Sharaxaad***: | *Qaybta 2aad waxa ay soo dajinaysaa asaaska sharciga ah ee unkidda shirkadda. Guusha shirkaddu waxa ay ku imanaysaa sharciyo, hannaan iyo tilmaamo waadix ah, aan mad-madow lahayn oo ku haboon, kuwaas oo ku qotoma dhidibadana muddo dheer u aasa maalgashiga gaarka loo leeyahay ee Soomaaliya. Shirkaddu, shaqsiyad qaanuun ahaan, waa ay ka baxsan tahay Dowladda Federaalka ee Soomaaliya waxna way dacwayn kartaa magaceedana waa lagu dacwayn karaa. Tan micnaheedu waa in unkidda shirkaddu awood u siinayso shirkadda in madaxbannaani si ay u dhisto maamul shirkadeed, kalsooni ay suuqa ku dhex leedahay iyo xirfadda kartiyeed ee loo baahan yahay si loo xaqiijiyo shaqooyinkeeda ku cad xeerka.* |

2) Halkan waxa lagu asaasay shirkad waafaqsan sida uu dhigayo Qodobka **99-aad** ee Dastuurka Faqraddiisa (**a**) iyi (**c**) kaas oo loo bixiyey “[***GARGAARA***]”, taas oo lahaanaysa awoodaha, shaqooyinka iyo masuuliyadaha lagu siiyey Xeerkan-hoosaadkan, kaas oo lagu dhiqidoono, lagu dhaqmidoono laguna hirgelindoono shirkadda Gargaara si waafaqsan shuruudaha Xeerkan-hoosaadkan;
3) Shirkaddu waxa ay ahaanaysaa shirkad qaanuuni ah oo leh sii-jiritaan shirkad-ahaaneed iyo shaambad u gaar ah, awoodna u leh in ay wax dacwayso iyadan lagu dacweeyo magaceeda.

**Qaybta III**
**Ujeeddooyinka Shirkadda**

| | |
|---|---|
| **Sharaxaad:** | *Qaybta 3aad waxa ay dhigaysaa xadka shaqada shirkadda. Xadididda shaqada shirkaddu waxa ay asaas u tahay muujinta halbeegyada, waxqabadka iyo masuuliyadda miraha iyo faa’iidada ay u leedahay dadka Soomaaliyeed. Shirkaddu waxa ay leedahay shan ujeeddo oo waaweyn iyo laba hoos yimaadda oo dhammaystiraya. Arrinta mudan in la tilmaamo ayaa ah in shirkaddu ujeedadeeda ugu weyni tahay in ay abaabusho dhaqaale si jumlad ah, sidaa darteed tartan ma kula jirto shirkadaha dhaqaalaha ka ganacsada (bangiyada iwm.). Marka* |

*labaad, shirkaddu waxa ay kaalin wax-ku-ool ah ka qaadanaynaa xiriirinta horumarka dhaqaale ee dowliga-caalamiga ah iyo midka gaarka loo leeyahay si ganacsiga Soomaalida saamayntiisa loo ballaariyo.*

4) Ujeeddooyinka ugu muhiimsan ee Gargaara waxa ay ahaanayaan taabba-gelinta bangiga GAYYD, ganacsiga, horumarinta iyo korinta dhaqaalaha, dhisidda tayayada hay'adaha, taageerid iyo horumarin dhaxal-gal ah oo dhaqaalaha dhexe ee Soomaaliya sida lagu qeexay Buug-gacmeedka Mashruuca GAYYD

(a) U ololaynta dhaqaalaha iyo khayraadka kale ee laga keenayo hay'adaha gaarka ah iyo kuwa la wada leeyahay, kuwa qaranka iyo kuwa caalamiga ah, si jumlad ahaaneed ah;

(b) Qiimaynta, qorshaynta iyo kormeeridda hirgelinta mashaariicda iyo qorsheyaasha horumarinta;

(c) u fududaynta ka qaybqaadashada ganacsiga gaarka loo leeyahay iyo ururrada bulshada ee mashaariicda iyo barnaamijyada horumarinta:

(d) fidinta adeeg farsamo khaas ahaan horumarinta tayada aadanaha iyo tababarka dhinaca aqoonsiga, diyaarinta, qiimaynta, maalgelinta hirgelinta iyo maaraynta mashaariicda iyo barnaamijyada horumarinta;

(e) Maalgelinta ama abaabulka maalgelinta jumladda, sida lagu go'aamiyey Buug-gacmeedka Mashruuca GAYYD, si hindiseyaasha looga yareeyo ama looga hortago saamaynta deegaanka ee mashaariicda iyo barnaamijyada horumarineed.

5) Ujeeddooyinka dheeriga ah ee Gargaara waxa ay ahaanayaan:

(a) in la taageero dedaallada kale ee caalamiga ah, qaranka iyo gobollada si loo taageero helidda dhaqaale isku dhafan oo horumarineed; iyo

(b) in la taageero hay'adaha kale ee qaranka ama caalamiga ah ee guud ama gaarka loo leeyahay, laguna taageero maaraynta maalgelinta, si loo xaqiijiiyo in la helo waxyaalaha horumarka dalku u bahan yahay

**Qaybta IV**
**Awoodaha Shirkadda Gargaara**

| |
|---|
| ***Sharaxaad**: Qaybtan 4aad waxa ay dajinaysaa awoodaha shirkadda sida marka ay abaabulayso horumarka dhaqaale iyada oo ka faa'iidaysanaysa tiro badan oo hay'adaha maaliyadda ah. Tani waxa ay ka dhalatay sababta ah in hay'ado maaliyadeed ku caawin doonaan shirkadda in ay kordhiso maalgelinta mashaariic GAYYD ah, ama ay la ka gudubto shuruudo ku xiran maalgelinta hantiyeed caalami-dowli ah iyo kuwo gaar loo leeyahayba. Muhiimaddu waa in shirkaddu awood u yeelato in ay hantido baahiyaha maalgalineed ee ay qabaan kuwo badan oo GAYYD ahi, iyo tixgelin maaliyadeed caalami-dowli ah iyo kuwo gaar loo leeyahay, kuwaas oo leh qaab waafaqsan Shareecada oo wadciga aad ugu habboon. Si uu awoodihiisa u meelmariyo, guddiga agaasinka iyo maamulka shirkaddu waxa ay si waafi ah ugu dhaqmayaan si ay ugu qalmaan hantida fursadna ugu helaan howlo faa'iido leh, maamulka oo u dhisan si uu u taageero hawlaha ganacsi ee wax-ku-oolka ah, kuna habboon baahiyaha dadweynaha.* |

6) Si ay ujeeddooyinkeeda u gaarto, Gargaara waxa ay yeelanaysaa awoodda in:

(a) uu qiimayso, ansixiso oo abaabusho maalgelin jumladeed, sida ku cad Buug-gacmeedka Mashruuca GAYYD, si uu u kormeero hirgelinta mashaariicda iyo barnaamijyada horumarineed;

(b) uu deymiyo ama u horumariyo lacag hay'adaha ganacsiga ee u qalma kana qaybqaadanaya ee ku lug leh ama soo jeedinaya in ay la xiriiraan bangiga GAYYD ee Soomaaliya; si ay u kasbadaan faa'iido ama raasamaal u galiyaan, ama dammaanad-galiyaan ama taa cagsigeeda, si ay ugu kaalmeeyaal in ay helaan hanti;

(c) uu hayo, maareeyo, horumariyo, kireeyo, gato, xubin ka noqdo, ama sida kale hanto, ama gado ama sii dayn, wareejin ama la-soo-wareegid heshiis hanti wareegaysa ama aan wareegayn oo ay kamid yihiin saamiyo, dammaanado, deyn, rahmaad, ama dulsaar kale oo shirkadeed, ama haddii muhiim loo arko noqon kara damiin dayn-qaateyaal;

(d) uu sameeyo, la baxo, aqbalo ama ogolaado qoraal lagu heshiiyey (dayn-bixintiisa);

(e) uu dammaanad ka bixiyo ballan la xiriirta maalgelin qof ama hay'ad dadweyne ama gaar loo leeyahay, ama gudashada heshiis qof galay ama hay'ad dadweyne ama gaar loo leeyahay, ama in loo mag-dhabo qof ama hay'ad dadweyne ama mid gaar loo leeyahay;

(f) uu laamo iyo xafiisyo ka wakil ah ka furo dalka Soomaaliya dhexdiisa

(g) uu heshiisyo ganacsi la galo daraf kasta oo kale iyada oo Xeerka lagu dhaqmayaa ama wixii khilaaf yimaadda lagu xalinayaa ay ku jiraan kuwo dalka Soomaaliya ka baxsan oo ganacsiga caalamliga ah ku dhex leh sumcad wanaagsan oo lagu yaqaanno in ay cadaalad iyo hubsasho ku galaan heshiisyada iyo qawaaniinta ay hawshooda galaan;

7) Dhammaan awoodaha shirkadda ee qaybta sare ee 6aad ku jira, waxa uu guddiga agaasinka iyo maamulkuba ugu dhaqmayaa si sax ah iyada oo la tixgelinayo hantiyaynta shirkadda, baadigoobka waxqabadka faa'iidooyinka leh, tayaynta maaraynta iyo awoodda lagu hananayo hawlo ganacsi oo wax-ku-ool ah.

**Qaybta V**
**Maaraynta Arrimaha Shirkadda**

***Sharaxaad:*** *Qaybtan 5aad waxa ay dajinaynaa shaqada maamulka shirkadda iyo wakiilashada awoodda. Si waafaqsan mabaadii'da hannaanka wanaagsan ee shirkadaha, xeerku waxa uu hubinayaa in saamileyda shirkaddu u wakiishaan maamulka shirkadda agaasinka iyaga oo la haraya awoodda wareejinta saamiyada, magacaabidda agaasimeyaasha iyo ansixinta faa'iidada. Awoodahan lala haray waxa ay u baahan yihiin in ay saamileydu kaga baaraandegto shirarkooda. Sidoo kale waxa xeerku dhigayaa si shirkaddu u abuurto guddiyo una hormariso siyaasadaha rasmiga ah iyo qaababka hawlgalka waxa u baahan tahay in ay arrimaha shirkadda u gudato qaab waafaqsan hannaanka wanaagsan ee maamulka shirkadaha.*

8) Iyada oo la raacayo qodobada xeerkan, saamileyaashu waxa ay yeelanayaan awoodda guud laakiin waxa ay u wakiilanayaan guddiga dhammaan awoodaha marka laga reebo awoodda ay:

(a) magacaabidda agaasimeyaasha, sida lagu sheegay Qaybta VII, iyo
(b) ansixinta bixinta faa'iidada (ribixa)

9) Guddigu waxa uu maamulayaa shaqada shirkadda waxa uu jihaynayaa hawlaha Shirkadda waxaana uu isticmaalayaa dhammaan awoodaha Shirkadda sida ay ku cad yihiin xeer-hoosaadkan ee ay tahay in ay isticmaalaan saamileyaasha Shirkaddu]ee shirka saamileyaasha;

10) Madaxa Sare (CEO) ayaa ahaanaya Masuulka Fulinta ee sida sharciga ah matali kara Gargaara waxaana uu masuul ka ahaanayaa maaraynta hawlaha Shirkadda sida ku cad Buug-gacmeedka Mashruuca GAYYD;

11) Awoodaha Guddiga waxa loo xilsaari karaa Madaxa Sare (CEO) kaas oo isna u xilsaaran kara awoodaha shaqaalaha, guddiyo ama qaab-dhismeed kale oo [Shirkaddu] leedahay, sida lagu qeexay Buug-gacmeedka Mashruuca GAYYD.

**Qaybta VI**
**Shirarka Saamileyda**

| |
|---|
| ***Sharraxaad**: Qaybta 6aad waxa ay soo bandhigaysaa xuquuqda mataladaadda saamileyda ee shirarka saamileyda iyo weliba muhiimadda qabashada shirarka saamileyda iyo qaabka codaynta. Qaybtani waxa ay dhigaysaa xaqiiqda baahida maalgelinta hantida ee shirkadaha gaarka loo leeyahay ee caalamiga iyo kuwa dowliga ah, goorta saxda ah imaanayaan. Waqtiga hadda la joogo, dowladda ayaa ah saamilaha kaliya.* |

12) Saamiluhu waxa uu xaq u leeyahay in uu ka qaybgalo shirka saamileyda ama uu wakil u magacowdo si uu shirkaas uga qaybgalo meesha shirkaasi ka dhacayo.
13) Saamile waxa uu lahaanayaa inta cod ee qusaysa arrinta markaas laga hadlayo oo waafaqsan sida uu dhigayo Buug-gacmeedka Mashruuca GAYYD.
14) Iyada oo Dowladda Federaalka ee Soomaaliya ay bilawga hore tahay saamilaha leedahayna saamiyada Gargaara go'aan kasta oo uu wakiilka dowladdu saxeexo waxa loo qaadanayaa qaraar si rasmi ah uga soo baxay shirka saamileyda.

**Qaybta VII**
**Guddiga Agaasinka**

| |
|---|
| ***Sharaxaad:*** *Si loo xaqiijiyo ujeeddooyinka lagu xusay qaybta 3aad ee DFS, shirkaddu waa in ay soo jiidataa maalgaliyeyaal si ay qaybaha wax-soo-saarka ee Soomaaliga ugu abaabusho dhaqaale. Qaybtan 7aad waxa ay dhigaysaa qaybaha uu ka koobnaanayo agaasinku iyo xulistooda kuwaas oo ay kamid yihiin guddoomiyaha, taas oo waafaqsan dhaqanka toosan ee nidaamka maamulka shirkada. Ka-qayb ahaanshaha qaybta gaarka loo leeyahay oo wakil ku leh kana mid yihiin maalgaliyeyaasha caalamiga ahi waxa ay xoojinayaan kalsoonida shirkadda ee indhaha suuqa caalamiga ah. Sidaas marka ay tahay, Wasiirka ayaa magacaabaya saddex kamid ah todobada agaasime ee agaasinka. Waxa la qiyaasayaa in la helo in ay shirkaddu soo jiidan doonto afar hay'adood oo maalgaliyeyaal ah oo mid kastaa xaq u yeelanayso in ay hal agaasime ku yeelato agaasinka.* |

15) Guddiga Agaasinta ee shirkadda Gargaara waxa uu ka koobnaanayaa todoba (7) agaasime: Haddiise ay mar uun agaasimayaasha xafiiska hayaa ka yaraadaan shan (5), afarta soo haray ayaa maamulaha arrimaha xafiiska Gargaara inta booska ama boosaska maran lagu soo buuxinayo magacaabidda Wasiirka ama saamilayda ku habboon, hadba sida xaaladdu tahay.
16) Agaasimayaasha Shirkadda Gargaara waxa loo magacaabayaa sida uu dhigayo Buug-gacmeedka Mashruuca GAYYD, oo ah in ay Wasiirka iyo Saamileydu u magacaabaan sida soo socota:
    (a) Wasiirka ayaa xaq u leh in uu magacaabo sadded (3) agaasime oo matalaya Dowladda Federaalka ee Soomaaliya, isagoo kala tashanaya Wasaaradaha iyo hayadaha mashruucan ka faaideysanaya
    (b) hay'adaha saamileyda ah oo magacaabaya tirada hartay ee agaasimayaasha, iyada oo mid kasta loo fiirinayo qaybta ay saamiga ku leedahay.

17) Magacaabidda agaasimayaasha waa in lagu saleeyaa aqoontooda, kartidooda iyo khibradda ay u leeyihiin horumarka dhaqan-dhaqaale, horumarka dhaqaale, ganacsiga, maaliyadda, bangiyada iyo sharciga.
18) Madaxa Sare (CEO), masuul fulineed oo kale ama xubin shaqaalaha kamid ah looma magacaabi karo agaasime.
19) Agaasinku, isaga oo helaya ogolaanshaha saamileyda, waxa uu mid kamid ah u dooranayaa guddoomiyaha agaasinka. Qofka la doortay waxa uu guddoomiyaha ahaanayaa ilaa inta uu agaasinku go'aamiyo.
20) Marna wax go'aan ama tallaabo agaasinka ah, ama tallaabo lagu fuliyey awoodda agaasinka, ma noqonayo waxba-kama-jiraan sababtiisa kali ahi tahay in qof shirka ka qaybgalay loo doortay agaasime, doorteenna hay'adaha saamileyda ah iyada oo aan la raacin shuruucda Buug-gacmeedka Mashruuca GAYYD.

**Qaybta VIII**
**Shaqo-ka-fariisinta Agaasimayaasha**

***Sharaxaad:*** *Qaybta 8aad waxa ay si toosan oo daahfuran u caddaynaysaa qaabka iyo tilmaamaha shaqo-ka-fariisinta qofka agaasimaha ah shirkadda, taas oo ku dhisan mabaadii'da saxda ah ee maamulka shirkadaha. Waxa in daaha laga faydo mudan, in waxyaalaha shaqada lagaga fariisinayaa yihiin dhaqan-xumada oo qofku ku kaco dalka Soomaaliya gudihiisa iyo meel kasta oo adduunka kamid ah*

21) Marna looma magacaabi karo agaasime qof haddii:
   (a) aan qofka la cadaynin in uu ka baxay mufallisnimo;
   (b) lagu helay dembi la xiriira dhiirigelin, aasaasid ama maarayn shirkad
   (c) lageu helin dembi la xiriira laaluush, musuq ama khiyaamo
   (d) Maxkamad Sharci ahi u diiday
   (e) xaaladaha qaybtan lagu xusay waxa ku jira haddii ay ka dhaceen dalka gudihiisa iyo dibeddiisa intaba

**Qaybta IX**
**Muddo-xileedka iyo Shuruudaha Xafiiska Agaasimayaasha**

***Sharaxaad:*** *Qaybta 9aad waxa ay daaha ka faydaysaa muddo-xileedka agaasimeyaasha iyo mushaharkooda. Mushaharku ma aha mid qofkasta oo agaasime ahi si toos ah xaq ugu yeelanayo. Waxa ay ku xiran tahay dib-u-fiirin maamul iyo ansixin siyaasadda hawlgalka rasmiga ah iyo nidaamka shirkadda ee cad Buug-gacmeedka shirkadda ee ah hagaha arrimaha maamulka. Buug-gacmeedka ayaa caddaynaya qaabka loo marayo ee qofka agaasimaha ah si marxaladaysan loo galinayo hawlgabnimo si loo xaqiijiyo sii-socodka shaqada shirkadda.*

22) Agaasimuhu waxa xafiiska haynayaa muddo ku siman afar (4) sano laakiin way u bannaan tahay in dib loo m
23) Agaasimuhu waxa uu helayaa faa'iidooyin adeeg oo ay ku jiraan in loo celiyo kharashyada kaga baxa safarka iyo nolosha, sida uu dhigayo Buug-gacmeedka Mashruuca GAYYD.

**Qaybta X**
**Guddiga Agaasimayaasha**

***Sharaxaad:*** *Qaybtan 10aad waxa ay qeexaysaa baahida loo qabo in agaasinku guddi u dhiso hawlaha sidoo kalena in uu khubaro kaalin latalineed leh raacin karo. Guddi kastaa waxa uu yeelanayaa Tixraac-hawleed si loo qeexo shaqadooda, waajibaadkooda iyo masuuliyaddooda. Arrintani waxa ay ku xiran tahay dib-u-fiirin maamul iyo ansixin siyaasadaha rasmiga ah iyo qaababka hawlgalka ee ku cad Buug-gacmeedka shirkadda ee mashruuca.*

24) Agaasinku waxa uu dhisayaa guddiyo ka kooban agaasimeyaal, sida lagu caddeeyey Buug-gacmeedka Mashruuca GAYYD.
25) Guug-gacmeedka Mashruucu waxa uu go'aaminayaa shaqooyinka guddiyada iyo habka loo raacayo marka guddoomiyeyaasha guddiyadaas la dooranayo
26) Qofkasta oo aqoon khabiirnimo u leh shaqo guddigu leeyahay waxa lagu lammaanaynayaa guddigaas

**Qaybta XI**
**Shirarka**

***Sharaxaad:*** *Qaybtan 11aad waxa ay muujinaysaa kooromka (tirada shirarku ku qabsoomi karaan) shirarku ugu qabsoomi karaan saamileyda iyo agaasimeyaasha iyo sidoo kale guddoominta shirarkaas. Goobjoognimada loo isticmaalo tiknolojiyadda casriga ahi (digigal teleconferencing) waa ay bannaan tahay, sidaa darteed qasab ma aha joogitaanka ruux ahaaneed ee shirarka saamileyda iyo agaasimeyaashu.*

27) Wasiirka ayaa shir-guddoominaya marka kulanku yahay midka saamileyda, marka uu yahay midka agaasinkana guddoomiyahooda.
28) Marka uu jiro shirka agaasinku, ee uu kooramku (tirada shirku ku qabsoomayo) goobjoog yahay ama uu kaga soo qaybgalayo qalabka isgaarsiinta casriga ah (fogaan-kulan = teleconference), ama qaab kale oo isgaarsiineed kaga qaybgalayo, xubnaha isla shirka ku jira ayaa dooran kara kusime-guddoomiye oo shirka u guddoomiya, waa haddii aan uu guddoomiyuhu joogin. Kusimaha guddoomiyaha waxa inta kulanka lagu jiro yeelanayaa dhammaan awoodaha uu xilka ku gudanlahaa guddoomiyuhu.
29) Wasiirka ama guddoomiyaha ayaa cod dheeri ah yeelanaya marka codadka la qaadayaa is le’ekaadaan.
30) Kooramka (tirada shirku ku qabsoomayo) shirka saamileydu waxa ahaanayaa aqlabiyadda (hal-dheeri tirada xubnaha), tirada kooramka agaasinkuna waa shan (5) agaasime
31) Si waafaqsan qodobada [qaybta 26aad], go’aannada (b) aqlabiyadda saamileydu waa go’aanka saamileyda; (t) aqlabiyadda agaasimeyaasha goobjoogga ka ah shirka agaasinka ayaa noqonaya go’aanka agaasinka.
32) Shirarka lagu tixraacay qaybtan waxaa lagu qabanayaa loona raacayaa si waafaqsan qodobada Buug-gacmeedka Mashruuca GAYYD.

**Qaybta XII**
**Madaxa Sare (CEO)**

***Sharaxaad:*** *Qaybtan 12aad waxa ay dhigaysaa micyaarka (sifooyinka) lagu xulanayo Madaxa Sare (CEO) iyo tallaabooyinka la qaadayo si loo fariisiyo. Qaabka lagu xulanayo Madaxa Sare waa in uu noqdaa mid toosan, furan, tartan ah oo lagu qiimaynayo nidaam ku dhisan qofka ugu haboon. Madaxa Sare waxa uu masuul ka yahay maaraynta hawlaha shirkadda in ku siman awoodda agaasinku u wakiishay iyo u-hoggaansanaanta shuruucda dalka kuna fadhiya siyaasadda iyo nidaamka shirkadda.*

33) Saamileydu waxa ay awoodda magacaabidda Madaxa Sare u wakiilanayaan agaasinka

34) Magacaabidda Madaxa Sare waxa lagu salaynayaa aqoontiisa/teeda, kartida iyo khibradda uu u leeyahay horumarka dhaqan-dhaqaale, horumarka maaliyadda, ganacsiga, maaliyadda, bangiyada iyo sharciga. Magacaabidda Madaxa Sare waa in ay ku timaaddo nidaam tartan ah sida uu dhigayo Buug-gacmeedka Mashruuca GAYYD.

35) Sababta ay doonto ha ahaatee, haddii Madaxa Sare awoodi waayo in uu shaqada Masuulka Sare qabto muddo aan ka badnayn laba (2) bilood, agaasinku waxa uu magacaabi karaa Kusimaha Masuulka Sare si uu u hawl galo muddada awood-darradu jirto, qofka la magacaabayna inta uu kusimaha yahay, waxa uu yeelanayaa dhammaan awoodaha uu ku fulinayo waajibaadka Masuulka Sare.

36) Haddii Masuulka Sare is casilo, geeriyoodo ama si joogto ah u naafoobo xilkana gudan kari waayo, agaasinka ayaa magacaabaya Kusime Masuul Sare kaas oo xilka qabta inta baddelkiisu uu xilka la wareegayo, qofka sidaa lagu magacaabyna, inta uu kusimaha yahay, waxa uu yeelanayaa dhammaan awoodaha uu ku fulinayo waajibaadka Masuulka Sare.

37) Si waafaqsan shuruudaha [qaybta 42aad], saamiga hantida rasmiga ah ee [shirkaddu] waxa uu noqonayaa lacag dhan boqol milyan oo Dollarka Maraykanka ah ($100 000 000) taas oo u qaybsan shan boqol oo kun (500 000) oo saami oo midkiiba qiimihiisu dhan yahay laba kun (2 000) oo Dollar.

38) Shahaadooyinka saami ayaa loo samaynayaa saamileyda si loogu cadeeyo bixinta saamiga hantida shirkadda Gargaara shahaadooyinka loo sameeyeyna waa in ay noqdaan kuwo digital ah (computer lagu sameeyey)

39) Hay'adaha saamileyda ahi waxa ay ku biirayaan baaqiga saamiga hantida sharciga ah marka uu agaasinku ka codsado in ay sidaa sameeyaan, sida uu jidaysan Buug-gacmeedka Mashruuca GAYYD.

40) Saamiyada la bixiyey waxa ay [shirkaddu] ku wareejin kartaa hay'ad kasta oo saamiley ah.

41) Agaasinku waxa uu xiliyada qaar, isaga oo haysta ogolaanshaha saamileydu shirkooda saamileyda ku gaareen, kordhin karaa hantida saamiga Gargaara ilaa inta uu u arko in ay dantu ku jirto, isaga oo abuuraya saamiyo caadi ah, ama saamiyo darajo kale ah sida hadba la go'aamiyo, waxaana ka mid noqon kara shuruudo ay kamid yihiin xuquuqda codadka ee ay saamileydu markaas isticmaalayso marka ay noqoto "saamiyada faa'iidadoodu tixgashan tahay" (preference shares), ama saamileydu aanay kolkaas cod lahayn.

42) Hay'ad saamiley ahi ma yaboohi karto ama ma xannibi karto saami ay shirkadda Gargaara ku leedahay, haddii isu-geynta saamiyadeeda ay yaboohaysaa ama xannibaysaa ay dhaafsiisan yihiin boqolkiiba shan (5%) oo ah hantiyada saamiyada [shirkaddu] bixisay.

43) Hay'ad saamiley ahi ma wareejin karto mana u cayimi karto saamiyadeeda ay shirkaddu ku leedahay qof kale haddii isu-geynta saamiyada ay cid kale ku wareejinaynaa ka badan yihiin boqolkiiba shan (5%).

## Qaybta XIV
## Kharashka

***Sharaxaad:*** *Qaybtan 14aad waxa ay dhigaysaa kharashka shirkadda waajib ka saran yahay in ay ka bixiso hantideeda. Arrintani waxa ay hubinaysaa in shirkaddu leedahay dhaqaale ku filan oo ay ku fushato hawlaheeda shirkad ahaaneed.*

44) Kharashka uu agaasinku galo ama dartii loo galo, oo ay ku jirto cadad kasta oo lagu yeesho lana xiriira mushaharka agaasimayaasha iyo shaqaalaha [shirkadda], waxa laga bixinayaa hantida [shirkadda].

## Qaybta XV
## Faa'iidada

***Sharaxaad:*** *Qaybtan 15aad waxa ay xaqiijinaynaa in ansixinta faa'iidadu tahay mas'uuliyadda saamileyda shirkadda. Arrintani waxa ay waafaqsan tahay mabaadii'da maamulka shirkadaha ee toosan.*

45) Go'aaminta faa'iidada waxa go'aaminaya agaasinka waxaana ansixinaya saamileyda.

## Qaybta XVI
## Xisaabaadka iyo Hanti-dhawrka

***Sharaxaad:*** *Qaybtan 16aad waxa ay soo bandhigaysaa nidaamka hanti-dhawrka shirkadda. Si loo xoojiyo kalsoonida lagu qabo shirkadda ee indhaha dadweynaha iyo sidoo kale maalgaliyeyaasha la filayo. Xisaab maaliyadeedka sannadlaha ah ee shirkaddu waxa uu noqonayaa mid si bannaan-yaal ah loo heli karo si waafaqsan maamulka shirkadaha ee rasmiga u ah hay'adaha dawliga ah. Weliba, waa in cid dibedda ka joogtaa ku samayso hanti-dhawr oo dheeraad ku ah baadhitaanka uu sameeyo Hanti-dhawrka Guud. Kharashka hanti-dhawrka shirkadda dibeddeeda ka imaanaya waxa bixinaysa shirkadda.*

46) Agaasinku waa in uu dajiyo diiwaan iyo nidaam xisaabeed sax ah xisaabta lagu kaydiyo waana in uu dajiyo dhammaan diiwaannada muhiimka ah ee la xiriira arrintaas.
47) Waa in uu agaasinku daabacaa warbixin sannadle ah oo ku saabsan xaaladda dhaqaale iyo waxyaalaha ka hirgalay ujeeddooyinka [shirkadda]
48) Diiwaanka xisaabaadka [shirkadda] waa in la galiyaa hanti-dhawr khibrad leh oo sharciyaysan

**Qaybta XVII**
**Buug-gacmeedka Mashruuca GAYYD**

***Sharaxaad:*** *Qaybtan 17aad waxa ay qoraysaa ujeeddooyinka Buug-gacmeedka Mashruuca kaas oo dajinaya siyaasadda hawlgalka rasmiga ah iyo nidaam ee khuseeya maaraynta shirkadda. Buug-gacmeedka mashruucu waxa uu bud-dhig u yahay dejinta jawiga maamulka maaliyadeed ee shirkadda.*

49) Agaasinku waa in uu shirkadda u dajiyaa siyaasadda hawlgalka rasmiga ah iyo nidaam ku saabsan:
(a) doorashada agaasimayaasha;
(b) shuruudaha magacaabidda agaasimayaasha iyo duruufaha iman kara sida haddii xafiis agaasime bannaanaado;
(c) qaabka, goobta iyo shirarka agaasinka, oo ay ku jiraan hadal-qoraallada rasmiga ah ee laga sameeyo shirarka;
(d) qaadashada go'aannada saamileyda iyo agaasimeyaasha iyaga oo aan qabanin shirar;
(e) shirarka saamileyda, arrimaha lagaga hadlikaro iyo qaababka ay tahay in la raaco goobaha iyo waqtiyada, hadal-qoraallada sida loo diiwaangelinayo;
(f) u soo-gudbinta xisaab-xir sannadeedka iyo xisaabaadka kale ee saamileyda loo soo gudbinayo;
(g) magacaabidda saraakiisha shirkadda Gargaara;
(h) Magacaabidda gole la-taliyeyaal ah oo leh khubrad ku haboon iyo xirfado ay ku soo gudbiyaan talooyin iyo tilmaamo ku saabsan adeegga, shaqada iyo hawlaha shirkadda. Kuwan waxa kamid ah

qodobada shuruudaha Shareecada iyo talooyinka ku saabsan hay'adaha maaliyadda;

(i) iyo arrimaha kale ee loo arko muhiim ama ahmiyadda u leh in lagu gaaro ujeeddooyinka xeerkan ku qoran.

**Qaybta XVIII**
**Marxaladda Diyaar-garowga**

***Sharaxaad:*** *Qaybtan 18aad waxa ay dajinaysaa marxaladda hore ee diyaar-garowga shirkadda waana waqtiga lagu jiro marxaladda hore kedibn marka la hawlgaliyo ee hay'adaha saamileyda ay maalkooda ku maalgashan karaan. Waxa ugu muhiimsan marxaladdani waa marka Sharciga Shirkadaha la dhaqangeliyo ee shirkaddu is-diiwaangelin karto ee la isugu dubaridi karo qaab shirkad ahaaneed oo ku shaqeeya Sharciga lana dajiyo arrimaha la xiriira kala-diridda shirkadda.*

50) Saamileyda [shirkaddu] waa in ay 30 maalmood wax aan ka badnayn, laga bilaabo maalinta uu dhaqan galo, waa ku qabsadaan shir ay ku magacaabayaan guddiga agaasinka ugu horeeya ee shirkadda;
51) Marka ay Dowladda Federaalka ee Soomaaliya tahay saamilaha kaliya ee [shirkadda], Wasiirka ayaa u xilsaaran in uu magacaabo ilaa saddex (3) agaasime oo matalalaya Dowladda Federaalka ee Soomaaliya [agaasimeyaasha wasaaradaha masuulka ka ah ee maaliyadda, ganacsiga iyo warshadaha iyo sidoo kale wasaaradda xoolaha ayaa noqonaya agaasimayaasha shirkadda xilalka ay hayaan awgood], iyo; tirada dhiman ee agaasimeyaasha waxa laga soo magacaabayaa ganacsatada si waafaqsan qaybka 16aad ee kor lagu soo xusay: waana in ay ugu yaraan sadded (3) agaasimayaasha kamid ahi haween noqdaan tirada guud ee tododaba (7) agaasime ee loo magacaabay agaasinka.
52) Buug-gacmeedka Mashruuca ayaa caddaynaya qaabka loo raacayo xulashada agaasimeyaasha laga keenayo ganacsatada.
53) [Shirkaddu] waxa ay ku dhisnaanaynaa qodobada Xeerka Shirkadaha.

54) Diiwaanka Shirkadaha waa in uu magaca shirkadda galiyaa diiwaanka si waafaqsan qodobada Xeerka Shirkadaha waana in loo soo saaraa shahaadaha Shirkadda.

Ma jiri karo qof, urur, shirkad ama cid kale oo qaanuuni ah oo ku shaqayn karta ama isku diiwaangelin karta Sharci Baarlamaan, oo wata magac lamid ah midka shirkaddan.

**XEER RA'IISUL WASAARE LR. 068** Taariikh: 28/02/2019

## Ujeeddo: Go'aan Gole Ansixinta Siyaasadda Qaran ee Kobcinta Awoodaha Dowladaha Hoose

***Ra'iisul Wasaare Ku-xigeenka Xukuumadda JFS***

**Markuu Arkay**: Qodobka 99aad , (a), (b) iyo (e) ee Dastuurka KMG

**Markuu Arkay**: Qodobka 100aad , (a), iyo (d) ee Dastuurka KMG

**Markuu Arkay**: Soo jeedinta Wasiirka Arrimaha Gudaha, Dib-u-heshiisiinta iyo Federaalka, kuna saabsan codsi ansixinta Siyaasadda Qaran ee Kobcinta Awoodaha Dowladaha Hoose

**Markuu Arkay**: Go'aanka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.66.02.19** ee **28/02/2019** kuna saabsan ansixinta "**Siyaasadda Qaran ee Kobcinta Awoodaha Dowladaha Hoose**" oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyey.

**Markuu Tixgeliyey**: Muhiimadda ay leedahay Siyaasadda Qaran ee Kobcinta Awoodaha Dowladaha Hoose

### *Wuxuu Xeeriyay:*

### Qodobka 1aad

Go'aanka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.66.02.19** ee 28/02/2019, kuna saabsan ansixinta "**Siyaasadda Qaran ee Kobcinta Awoodaha Dowladaha Hoose**" oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyey.

### Qodobka 2aad

Waxa Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Dib-u-heshiisiinta iyo Federaalka loo igmaday in ay **hirgeliso, meel-marisana Siyaasadda Qaran ee Kobcinta Awoodaha Dowladaha Hoose.**

### Qodobka 3aad

Siyaasadda Qaran ee Kobcinta Awoodaha Dowladaha Hoose, waxa ay dhaqan-gelaysaa marka uu saxiixo Ra'iisul Wasaare Ku-xigeenka Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

Mudane Mahdi Maxamed Guuleed " Khadar
Ku-Simaha Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS
Ahna Ra'iisul Wasaare Ku-Xigeenka Xukuumadda JFS

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
WAA LA DIIWAAN GELIYEY
DIIWAAN NO: 11/xx/0017/2019
TAARIIKH 5/3/2019
SAXIIXA HANTIDHAWRKA GUUD

# WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA, FEDERAALKA & DIB-U- HESHIISIINTA

## SIYAASADDA QARAN EE KOBCINTA AWOODAHA DOWLADAHA HOOSE

JAMHUURIYADA FEDERAALKA SOOMAALIYA

WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA, FEDERAALKA & DIB-U-HESHIISIINTA

2/13/19

## 1.0 HORDHAC

Siyaasaddani waxa ay hagaysaa kobcinta awoodda waxqabad ee dowladaha hoose ee Soomaaliya si ay ugu suurta-geliso dowladaha hoose ee dalka in ay waajibaadkooda u gudan karaan si wax ku ool ah.

Waxa ay hagaysaa jilayaasha dowliga ah iyo kuwa aan dowliga ahayn ee dalka iyadoo hubinaysa in qaab isku xiran oo nidaamsan loo sameeyo awood dhisidda iyo kobcinta awoodda waxqabad ee maamullada maxalliga ah ee laga sugayo in ay adeeg bixin hufan u sameeyaan shacabka Soomaaliyeed.

‘Dowladda hoose’ waxaa looga jeedaa heerka dowladda ee ugu dhow shacabka ku nool degmooyinka dalka.

Awooddu waa suurtagal-nimada shaqsiyaadka, hay’adaha ama bulshooyinku ay ku maamuli karaan arrimahooda u gaarka ah, ku gudan karaan waajibaadkooda, ku xallin karaan dhibaatooyinka isla markana ay ku xaqiijin karaan guulo si joogto ah.

Kobcinta awoodduna waa habraaca arrintan kore lagu keeni karo. Waxa ay ku xiran tahay in la fahmo xaaladihii hore iyo kuwa maanta taagan, in wax laga barto waayo aragnimadii lasoo maray, in lala qabsado xaalado cusub si maskax furan, iyo in wax lagu dul dhiso awooddihii waxqabad ee hore u jiray si loo abuuro karti joogto ah muddo kaddib.

Kobcinta awoodda waxqabadku waxa ay fududaysaa in hay’aduhu sameeyaan siyaasado hirgeli kara, sharciyo iyo hannaan horumarineed; sal-udhigidda nidaamyo iyo hay’ado wax ku ool ah; iyo sare u qaadidda aqoonta bini’aadamka, xirfadaha iyo kartida.

Dastuurka Ku Meel Gaarka ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxa uu sheegayaa saddex heer dowladeed oo ka mas'uul ah bixinta adeegyada shacbiga Soomaaliyeed: Heerka Federaalka, Dowlad Goboleedyada iyo Dowladaha Hoose.

Maamul Goboleedyada wakhtigan ay siyaasadani la macaamilayso waa:

1) Puntland
2) Galmudug
3) Jubbaland
4) Koonfur Galbeed
5) Hishabelle

Sidoo kale, siyaasaddani waxa ay la macaamili doontaa **Maamulka Gobolka Banaadir**. Siyaasaddu waxa ay sheegaysaa doorka uu heer waliba ku yeelanayo kobcinta awoodda waxqabad ee dowladaha hoose.

## 2.0 BANDHIG IYO GUUDMAR

Tobannaankii sano ee la soo dhaafay dadka Soomaaliyeed oo kaashanaaya daneeyayaasha horumarinta, ayaa isku dayay in ay ka gudbaan awood darrada ba'an ee dhinaca dowladaha hoose, maamulka iyo adeeg bixinta Soomaaliya, taasoo kasoo baxday burbur baahsan oo hay'adaha dowladda ku dhacay sababo la xiriira degenaansho la'aan iyo khilaafaadka dalka kajiray.

Dadaalladaas oo ay ka mid yihiin noocyo kala duwan oo taageerada degmooyinka iyo bulshada degaanka ah- tusaale ahaan, bixinta adeegga, xallinta khilaafaadka, dib-u-heshiisiinta, nidaamyada iyo horumarinta xirfadaha, iwm ayaa weli socda oo waxaa diiwaan galin ku sameysey dowladaha hoose, maamulka iyo bixinta adeegyada qaybo badan oo ka mid ah Soomaaliya.

Si kastaba ha ahaatee, xaqiiqadu waxay tahay in inta badan dowladaha hoose ee Soomaaliya ay yihiin kuwo aan badnayn iyadoo ay ugu wacan

tahay dhaqaale aan ku filnayn, nidaamyo daciif ah iyo yaraanta baahsan ee shaqaale ku haboon oo u qalma shaqada.

Waxaa intaa dheer, dadaalladan xooga iyo macnahaba leh ayaa dhammaan la wada sameeyay iyadoo ay maqan tahay siyaasadda dowladda ee kobcinta awoodda dowladda hoose. Natiijo ahaan, kobcinta awooddu ma ahayn mid midaysan dhammaan Soomaaliya iyo dowladaheeda hoose.

Caqabada asaasiga ah ee soo wajahday Soomaaliya waa sida loo abuuro dowlado hoose oo wax ku ool ah si ay wax uga qabtaan arrimaha maamulka, gaar ahaan marka maamulada kala duwan ee ka mid ah federaalka Soomaaliya ay leeyihiin heerar kala duwan oo dhanka horumarka ah.

Siyaasaddani waa mid muhiim u ah si loo qeexo caqabadahan, sababtoo ah waxay tilmaamaysaa sida ay tahay in loo kobciyo awoodda dowladaha hoose ee Soomaaliya.

## 3.0 UJEEDDOOYINKA SIYAASADDA

### 3.1 Ujeeddada Weyn

Siyaasaddaan ujeedadeedu waa in laga dhigo dowladaha hoose ee Soomaaliya, hay'ado wax ku taro maamullada maxalliga ah, dowladnimada iyo adeeg bixinta shacabka Soomaaliyeed.

### 3.2 Ujeeddooyinka Gaarka Ah

a) In la hubiyo in awood dhisidda loo samaynayo dowladaha hoose ee Soomaaliya ay xiriirsan tahay, isla markaana ka tarjumayso yoolalka horumarinta qaranka iyo ujeeddooyinkiisa;

b) In la xaqiijiyo in dowladaha hoose ee Soomaaliya ay leeyihiin nidaam tababar oo habeysan, iskuna dubbaridan, kaasoo soo saara shaqaale leh aqoon, xirfad, habdhaqan iyo qaab feker sax ah;

## 4.0 HIRGELINTA SIYAASADDA

Siyaasaddaani waxay khusaysaa dhamaan:

1) Hay'adaha Dowladda Federaalka iyo Dowlad Goboleedyada, waaxyaha iyo hay'adaha ku shaqada leh maamul baahinta;
2) Degmooyinka iyo qaybaha hoose ee Dowladaha hooose;
3) Daneeyayaasha Horumarinta; iyo
4) Dhammaan daneeyayaasha ku lug leh kobcinta awoodda dowladaha hoose, maamulka iyo adeeg gaarsiinta bulshada Soomaaliyeed.

Hirgalinta wax ku oolka ah ee siyaasaddu waxay u baahan tahay isku xirid dhow oo u dhexaysa dhammaan xukuumadda Federaalka ah iyo hay'adaha heer Dowlad Goboleed sida wasaaradaha, Waaxyaha iyo Hay'adaha ku shaqada leh Maamul Baahinta.

## 5.0 HANNAANKA KOBCINTA AWOODDA

Awoodda Dowladda Federaalka Soomaaliya, Dowlad Goboleedyada iyo Degmooyinka ayaa la kobcin doonaa si ay ugu suurtagasho heerarka dowladda inay fuliyaan waajibaadkooda dastuuriga ah si ay u hubiyaan maamul dowladeed oo taabogal ah iyo adeeg bixin si waafaqsan waajiboodkooda shaqo ee qaab-dhismeedka federaalka Soomaaliya iyo qaab-dhismeedyada baahsan.

Bulshada deegaanka, oo ah bartilmaameedka ugu weyn ee adeeg bixinta degaanka, ayaa sidoo kale la siin doonaa karti-beereedka la bartilmaameedsanaayo si ay u fahmaan xuquuqdooda iyo waajibaadkooda isla markaana si wax-ku-ool ah uga qayb galaan maamulka iyo adeeg bixintooda.

Tan waxaa la sameyn doonaa iyada oo la siinayo tababar iyo hagid xubnaha guddi hoosaadyada isticmaala (sida biyaha, caafimaadka aasaasiga ah, waxbarashada aasaasiga ah, iwm.)

Sidaa daraadeed waxay uga qayb qaadan karaan si firfircoon howlahooda iyo dayactirka faa'iidada bulshooyinkooda.

### 5.1 Dowladda Federaalka

Dowladda Federaalka waxaa lagu xoojin doonaa dejinta siyaasadaha, sharciyada iyo dib-uhabeynta iyo bixinta kormeerka wax ku oolka ah ee hirgalinta siyaasadda baahinta xukunka federaalka ah ee Soomaaliya iyo qaab-dhismeedyada baahsan.

Dowladda Federaalka iyo Dowlad Goboleedyada ayaa sidoo kale lagu xoojin doonaa soo saarista xogta, falanqeynta, faafinta iyo isticmaalka si loo fududeeyo wargelinta siyaasad dejinta, kormeerka fulinta iyo qiimeynta.

Dowladda Federaalku waxay gaarsiin doontaa dowladaha hoose iyada oo la adeegsanayo kheyraadka maaliyadeed ee loo baahan yahay, agab iyo qalab ay ku fulinayaan shaqadooda; marka lagu daro xoojinta nidaamyadooda hirgelinta siyaasadaha dowladeed ee muhiimka ah iyo dib u habeyn.

### 5.2 Dowlad Goboleedyada

Dowlad Goboleedyada waxaa lagu taageeri doonaa inay xoojiyaan awooddooda si ay u hagaan, dib ugu dhigaan, ayna u fidiyaan kormeer taageero ah degmooyinka ka hoos dhisan.

Meelaha lagu beegsanayo horumarinta kartida waxaa ka mid ah: Siyaasad dejinta; sharciga; maamulka guud; qorsheynta istaraatiijiyada; maaraynta kharashaadka dowladda (sida qorsheynta, maareynta maaliyadda, xisaabinta, soo iibsiga, maareynta shaqaalaha, kormeerka iyo qiimeynta); isuduwidda iyo maaraynta iskaashiga; dhalinta macluumaadka, falanqeynta, faafinta iyo isticmaalka; qiimaynta baahida kartida; qiimeynta baahiyaha tababarka; iyo la-talin iyo tababarid.

### 5.3 Degmooyinka

Degmooyinka waxaa lagu taageeri doonaa:

a) Inay dejiyaan siyaasado, sharciyo, xeerar iyo tilmaamo lagu shaqayn karo si ay ugu hogaamiyaan dowladaha hoose, maamulka iyo adeeg bixinta;

b) Inay bixiyaan kharashaadka lagama maarmaanka ah ee dhaqaalaha, bani'aadamnimada iyo wax-soo-saarka kuwaas oo ay ku fulinayaan shaqadooda;

c) Horumarinta iyo xoojinta nidaamyadooda maaraynta kharashaadka dowladda (sida qorshaynta iyo miisaaniyadda, maareynta maaliyadda, xisaabinta, soo iibsiga, maaraynta shaqaalaha, kormeerka iyo qiimeynta), maareynta diiwaannada iyo kormeeridda shaqooyinka dadweynaha iyo kuwa kale;

d) Bixinta shaqaalahooda iyo hoggaamiyeyaasha siyaasadeed ee la doortay aqoonta, xirfadaha iyo karti-xirfadeedka lagu fulinayo doorarkooda iyo hawlahooda, iyo weliba horumarinta shaqooyinka, iyo;

e) Bixinta gargaar farsamo si looga caawiyo inay wax ka qabtaan dhibaatooyinkooda koritaanka, oo ay ka mid yihiin arrimaha guud ee jinsiga ee qaababka horumarineed;

## 6.0 QAABKA TABABARKA DOWLADAHA HOOSE

Tababarku waa qaab kobcin aqooneed kaasoo loogu talagalay inuu bixiyo aqoonta, xirfadaha iyo kartida xirfadeedka shaqaalaha.

Waxay noqon kartaa mid joogto ah dabeecadda ama lagu beegsado hagaajinta waxqabadka, kobcinta xirfadlaha iyo dib u qaabeynta dabeecadaha. Tababbarka dowladaha hoose ayaa dhammaantood kulminaya inta kor ku xusan.

## 6.1 Ujeeddooyinka Tababarka Dowladaha Hoose

In la siiyo Dowladda Federaalka Soomaaliya, Dowladda Hoose ee Muqdisho, Dowlad Goboleedyada iyo Degmooyinka qaab isku dubbaridan oo loo qaabeeyey si kor loogu qaado dowladaha hoose, maamulka iyo adeeg bixinta iyada oo la waafajinayo awooddooda dastuuriga ah.

Machadka Dowladaha Hoose wuxuu noqon doonaa qalabka aasaasiga ah kaas oo lagu gaari doono ujeeddooyinka tababrka.

### 6.2 Ka Faa'idaystayaasha Tababarka Dowladaha Hoose

Dadka ka faa'iidaysta tababarka dowladaha hoose waxay noqon doonaan shaqaale dowlad hoose, hoggaamiye deegaan ee lasoo doortay, guddi hoosaadyada qaybta ka ah bixinta adeegyada (tusaale ahaan guddiyada dugsiyada, xarumaha caafimaadka, xarumaha biyaha, iwm), xubno ka tirsan ururrada dowladaha hoose, iyo daneeyayaasha kale ee ka qayb qaata xoojinta maamulka degaanka iyo maaraynta adeeg bixinta.

### 6.3 Mabaadi'da Hagaysa Tababarka Dowladaha Hoose

Tababbarka dowladda hoose waxaa hogaamin doona mabaadii'da asaasiga ah ee soo socda:

a. Haboonaanta iyo jihaynta barashada;
b. Helitaanka siman ee fursadaha tababarka;
c. Kor u qaadidda waxqabadka shaqada iyo horumarinta xirfadaha shaqada;
d. Isku dheeltirka baahida shakhsiga iyo hay'adaha;

## 7.0 DOORKA HEERARKA DOWLADDA EE TABABARKA

SHAQAALAHA DOWLADAHA HOOSE

Qaybtani waxa ay faahfaahin ka bixinaysaa doorarka is buuxinaya ee ay yeelanayaan heerarka dowladda marka la bixinayo tababarrada dowladaha hoose.

### 7.1 Dowladda Federaalka

Dowladda Federaalku waxa ay dejinaysaa sharciyada, siyaasadaha iyo hagayaasha lagu maamulayo isbedellada ka dhaca heerarka kale ee Dowlad Goboleedka iyo Dowladaha Hoose.

Waxa kale oo ay hagaysaa dhammaan daneeye-yaasha ka hawl gala arrimaha dowladaha hoose.

Wasaaradda heer Federaal ee mas'uulka ka ah arrimaha dowladaha hoose ayaa qabanaysa hawlaha soo socda ee la xiriira tababarka dowladaha hoose:

a) Waxa ay dejinaysaa siyaasadda qaran ee tababbarka, manhajka, hubinta tayada iyo hagayaasha;

b) Waxa ay xaqiijinaysaa tayada bixinta tababarada Machadka Dowladaha Hoose ee Soomaaliya;

c) Waxa ay tilmaamaysaa maamul goboleedyadu sida ay u hirgelinayaan siyaasadda qaran ee tababarka, shuruucda, heerka tayada iyo hagayaasha;

d) Waxa ay la shaqaynaysaa Wasaaradaha iyo Hay'adaha kale ee heer Federaal ee la xiriira tababarka dowladaha hoose iyo horumarinta awoodda waxqabadka dowladaha hoose;

e) Waxa ay siinaysaa Maamul Goboleedyada iyo Degmooyinka, hagid iyo taageero dhinaca horumarinta awoodda waxqabad iyo tababarrada ah;

f) Waxa ay kala talinaysaa Dowladda Federaalka ah dhammaan arrimaha la xiriira dowladaha hoose tababarkooda iyo kobcinta awooddooda waxqabad iyadoo la tashanaysa Dowlad Goboleedyada;

g) Waxa ay heshiisyo la galaysaa bixiya- tababarrada dowladaha hoose iyadoo la marayo hannaanka Machadka Dowladaha Hoose;

h) Qiimayn iyo dabagal iyo taageero siinta sida tababarka dowladaha hoose ee laga samaynayo degmooyinka uu u qabsoomay;

### 7. 2 Dowlad Goboleedyada

Dowlad Goboleedyadu, iyagoo isticmaalaya Wasaaradahooda Arrimaha Gudaha, waxa ay mas'uul ka noqonayaan tababarka iyo kobcinta awoodda waxqabad ee dowladaha hoose ee ku dhex yaalla dowlad goboleedkooda. Si gooni ah, waxa ay:

a) Hirgelinayaan shuruucda, siyaasadaha iyo hagayaasha dowladaha hoose ee ay samaysay Dowladda Federaalku;

b) Dejinayaan siyaasado iyo tilmaamayaal khuseeya arrimaha dowladaha hoose ee ku hoos yaalla Dowlad Goboleedkooda, kuwaas oo waafaqsan Dastuurka Federaalka isla markaana aan ka hor imanayn dhamaan shuruucda, siyaasadaha, hagayaasha iyo tilmaamayaasha ay samaysay Dowladda Federaalku;

c) Siinayaan taageero iyo tilmaan dowladaha hoose ee ku yaalla deegaankooda ee ay haysato caqabado farsamo;

d) Siinayaan taageero Machadka Dowladaha Hoose iyo tababarrada uu ka bixinayo meelaha hoos yimaadda Dowlad Goboleedka;

e) Qiimayn iyo dabagal iyo taageero u samaynayaan tababarka dowladaha hoose ee laga samaynayo degmooyinka hoos taga si waafaqasan siyaadaha, manhajka iyo hagayaasha ay samaysay Dowladda Federaalku;

f) Qiimayn ku sameeyaan baahida tababar iyo awood kobcin ee ka jirta dowladaha hoose;

g) Tala bixin ka siinayaan Dowladda Federaalka ah dhammaan arrimaha awood kobcinta heer deegaan oo ay kamid tahay tababarrada degmooyinka;

### 7. 3 Degmooyinka

Degmooyinku waxa ay mas'uul ka noqonayaan dhamaan arrimaha dowladda hoose iyo adeeg bixinta ee degaannada ay xukumaan, waxayna qabanayaan hawlaha soo socda ee khuseeya tababarrada:

a) Waxa ay samaysanayaan oo hirgelinayaan qorshohooda horumarineed si ay uga falceliyaan baahidooda iyo hiigsigooda iyagoo ku salaynaya siyaasadaha, shuruucda iyo hagayaasha heerarka dowladda ee ka sarreeya;

b) Waxa ay samaysanayaan qorshohooda tababar waxa ayna la fulinayaan qorshahaa Machadka Dowladaha Hoose ee Soomaaliya iyo cidda uu u wakiisho bixinta tababarka isagoo maraya habraaca dowladda ee bixinta heshiisyada adeegyada;

c) Waxa ay ka tala bixinayaan bixiyayaasha tababarka Mac-hadku wakiilan karo ee ku yaalla dhulka ay degmadu xukunto;

d) Waxa ay hubinayaan tababarka la siiyay shaqaalaha dowladda hoose iyo sida ay ugu fuliyeen hawl maalmeedkooda;

e) Waxa ay si joogto ah ugu warbixinayaan Wasaaradaha ay khuseyso, mas'uulka ka ah Kobcinta awoodda waxqabadka;

## 8.0 MACHADKA DOWLADAHA HOOSE EE SOOMAALIYA

Machadka Dowldaha Hoose ee Soomaaliya waxa uu noqonayaa hay'ad qaran oo mas'uul ka ah bixinta iyo tayaynta tababarrada la siinayo saraakiisha dowladaha hoose (kuwa farsamo iyo kuwa la doortayba).

Iyadoo ay jiri doonaan bixiyayaal tababar sida jaamacadaha, iskuullada aqoonta sare iyo mac-hadyo gaar loo leeyahay, Machadka Dowladaha Hoose waxa uu mas'uul ka yahay tababarka saraakiisha dowladaha hoose isagoo isticmaalaya manhaj ay ansixiyeen Wasaaradaha Arrimaha Gudaha iyo Fedraalka iyo Wasaaradda Waxbarashada, Hidaha iyo Tacliinta Sare.

Haddii uu u baahdo, Machadka Dowladaha Hoose waxa uu isticmaalayaa iskuullo ama jaamacado kale isagoo ku hagaya manhajkiisa iyo siyaasadahiisa.

Arrintan ku talagalkeedu waa in tababarrada lasiinayo saraakiisha dowladaha hoose ay sare u qaadaan maareynta, maamulka deegaanka iyo adeeg bixinta si habaysan oo dan u ah bulshada Soomaaliyeed.

Machadka Dowladaha Hoose waxa uu sidoo kale tababarrada gaarsiin doonaa hay'ado ay kamid yihiin guddiyada horumarinta degmooyinka, bixiyayaasha adeegyada degmada (sida biyaha, waxbarashada aasaasiga ah, caafimaadka aasaasiga ah, iwm) si uu u fududeeyo horumarinta xirfadaha ku saabsan adeeg bixinta heer deegaan. Mac-hadku waxa uu heshiisyo la gerli karaa hay'adaha kale ee bixiya tababarrada.

## 8.1 Doorka iyo Waajibaadka Machadka Dowladaha Hoose

Waajibka uu u xilsaaran yahay Machadka Dowladaha Hoose waa in uu dhiso awoodda hawlqabad ee hawl wadeennada iyo hoggaanka dowladaha hoose si ay u taageeraan dedaallada horumarinta ee qaran.

Hiigsiga Mac-hadku waa in uu bixiyo tababarro tayo leh oo xiriir dhow la leh shaqada kuwaas oo la siinayo hawl wadeennada iyo hoggaanka dowladaha hoose si kor loogu qaado hogaaminta, maamulka, maaraynta iyo bixinta adeegyada heer deegaan.

## 8.2 Qaab-dhismeedka Machadka Dowladaha Hoose

Qaab-dhismeedka Machadka Dowladaha Hoose waxa uu ka turjumayaa qaab-dhismeedka Dowladda Federaalka ee Soomaaliya iyo hannaankiisa awood daadejinta, waxana uu noqonayaa
sida soo socota:

1) Machadka Dowladaha Hoose waxa uu ka hoos dhisan yahay Dowladda Federaalka ahWasaaradda u qaabilsan arrimaha dowladaha hoose iyo nidaamintooda (Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-uheshiisiinta).

2) Waxa uu yeelanayaa xarun tababbar dhexe oo heer qaran ah iyo xarumo tababbar oo ku yaalla Dowlad Goboleedyada.

3) Waxa uu yeelanayaa Guddi Maamul oo ka kooban daneeyeyaal badan oo kala ah:

a. Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Heer Federaal ee Arrimaha Gudaha;

b. Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Waxbarashada heer Federaal;

c. Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Shaqada iyo Shaqaalaha heer Federaal;

d. Agaasimayaasha Guud ee Wasaaradaha Arrimaha Gudaha ee Dowlad Goboleedyada;

e. Wakiil Gobolka Banaadir Agaasimaha Machadka Dowladaha Hoose waxa uu noqonayaa xubin kamid ah Guddiga Maamulka oo aan cod lahayn.

### 8.3 Doorka Guddiga Maamulka ee Machadka Dowladaha Hoose

Guddiga Maamulku waxa uu korjooge ka ahaanayaa Machadka Dowladaha Hoose, waxa uu hagayaa, taageerana u samaynayaa siyaasadda Machadka. Doorkiisa iyo hawlihiisa gaarka ahi waxay noqonayaan:

a. Horumarinta Machadka iyo shaqooyinkiisa;

b. Ansixinta siyaasadaha, barnaamijyada, qorshaha iyo miisaaniyadda Machadka iyo kor ka eegidda shaqooyinka Machadka.;

c. Korjoogtaynta Agaasimaha iyo haw-gudashadiisa /hawl-gudashadeeda;

d. Ansixinta manhajka tababarka ee Machadka;

e. Xaqiijinta in manhajka Machadka tababarka ku bixinayo ay aqoonsan tahay Wasaaradda Waxbarashada ee heer Federaal;

f. Kormeerka tababarrada Machadka iyo qiimeynta saamayntiisa;

g. Xaqiijinta in mac-hadku ku shaqeeyo siyaasadaha iyo sharciyada Dolwadda Federaalka iyo hannaanka ay u dejisay horumarinta qaranka;

h. Ku xiridda Machadka hay'adaha uu shaqo wadaagta la yahay, sida Hay'adaha Dowladda Federaalka, Dowlad Goboleedyada, dowladaha hoose, ururrada dowladaha hoose, daneeyeyaasha horumarka iyo bahda waxbarashada;

i. Ka talasiinta Wasaaradda Arrimaha Gudaha ee Dowladda Federaalka tababarrada iyo kobcinta awoodda waxqabad ee dowladaha hoose;

## 8.4 Agaasimaha Machadka Dowladaha Hoose

Agaasimaha Machadka Dowladaha Hoose waxa uu noqon doonaa/ ay noqon doontaa sarkaalka ugu sareeya shaqaalaha Machadka.

Waxaa lagusoo magacaabi doonaa habraaca lagu keeno shaqaalaha rayidka ah ee dowladda sida uu dhigayo xeerka shaqada iyo shaqaalaha ee Qaranka, waxaana soo magacaabaya Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-uheshiisiinta.

Waxa uu/ay warbixinta siinayaa/siinaysaa Gudoomiyaha iyo Guddiga Maamulka ee Machadka waxana uu ka mas'uul yahay/ tahay hawlaha hoos ku qoran:

a. Fulinta siyaasadaha iyo go'aannada Guddiga Maamulka;

b. Hoggaaminta Machadka si uu u gaaro aragtidiisa, hiigsigiisa, yoolalkiisa iyo ujeeddooyinkiisa;

c. Maamulka Machadka ee maalinlaha ah;

d. Hormuud ka noqoshada samaynta iyo fulinta istaraatiijiyadaha iyo qorshe sannadeedka Machadka;

e. Hubinta in tababrrada Mac-hadku ku qabsoomaan tayadii, kharashkii iyo wakhtigii loogu tala galay;

f. Xaqiijinta dib-ueegis joogto ah oo lagu sameeyo manhajka iyo barnaamijka Machadka;

g. Xaqiijinta in si haboon loo isticmaalay shaqaalaha, agabka iyo miisaaniyadda Machadka.

h. Xisaabinta isticmaalka dakhliga Machadka;

i. Metelaadda Machadka ee shirarka, daneeyeyaasha, macaamiisha iyo bulshada guud;

j. Samaynta nidaamyo wax ku ool ah iyo hubinta in ay u shaqaynayaan si haboon;

k. Indha indhaynta fursadaha bannaanka ee Mac-hadku ka faa'daysan karo;

l. Xaqiijinta in Mac-hadku u shaqeeyo si waafaqasan siyaasadaha, shuruucda iyo qorsheyaasha horumarinta ee dowladda;

m. Usoo gudbinta Guddiga maamulka warbixin joogto ah oo ku saabsan hawl-qabadka Machadka, oo ay kamid tahay warbixin sannadeedka;

## 9.0 FULIYEYAASHA KALE EE TABABARKA DOWLADAHA HOOSE

Dhammaan fuliyeyaasha kale ee awoodda u leh in ay bixiyaan tababbarka dowladaha hoose waxa ay xaq uleeyihiin in ay ka qeyb qaataan hawlaha Machadka Dowladaha Hoose si ay isku kabaan.

Fuliyeyaashaasi waxa ay ka kooban yihiin:

a) Hay'adaha ku takhasusay tababarrada ee heer Federaal iyo heer Dowlad Goboleed;

b) Tababbar bixiyeyaasha kale sida jaamacadaha, iskuulada, machadyada, xarumaha la talinta iyo shakhsiyaadka leh xirfadaha sare.

Machadka Dowladaha Hoose waxa uu isticmaali kara mid ama dhawr kamid ah fuliyeyaasha kor ku xusan haddii uu ubaahdo isagoo kusoo xulanaya tartan furan oo hufan.

## 10.0 DOORKA DANEEYEYAASHA HORUMARINTA

Daneeyeyaasha horumarintu waxa ay door weyn ka ciyaareen soo kabashada dalka iyo in dowladdu ay diiwaan geliso guulaha ay ka gaartay xasilinta dalka, taageeridda maamullada maxalliga ah iyo kor u qaadidda maaraynta iyo bixinta adeegyada dadweynaha.

Dowladda Federaalku waxa ay ka doonaysa daneeyeyaasha kala shaqeeya horumarinta in ay taageeraan arrimaha la xiriira siyaasaddan iyo meelaha ay taabanayso gaar ahaan iyagoo si dhow ula shaqaynaya ayna hagayso Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Fedraalka:

1. Lacag u raadinta (Fundraising);

2. Taageero farsamo;

3. Fududaynta kaabayaasha, qalabka iyo agabka hawl-galka;

4. Horumarinta nidaamka iyo dowladnimada;

5. Horumarinta shaqaalaha;

6. Arrimaha kale ee ay si wadajir ah dowladda ugu heshiiyaan;

**XEER RA'IISUL WASAARE LR. 069** Taariikh: 28/02/2019

## Ujeeddo: Go'aan Gole Ansixinta Siyaasadda Aqoonsiga Dadweynaha

***Ra'iisul Wasaare Ku-xigeenka Xukuumadda JFS***

**Markuu Arkay**: Qodobka 99[aad] , (a), (b) iyo (e) ee Dastuurka KMG

**Markuu Arkay**: Qodobka 100[aad] , (a), iyo (d) ee Dastuurka KMG

**Markuu Arkay**: Soo jeedinta Wasiirka Arrimaha Gudaha, Dib-u-heshiisiinta iyo Federaalka, kuna saabsan codsi ansixinta Siyaasadda Aqoonsiga Dadweynaha

**Markuu Arkay**: Go'aanka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.66.02.19** ee **28/02/2019** kuna saabsan ansixinta "**Siyaasadda Aqoonsiga Dadweynaha**" oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyey.

**Markuu Tixgeliyey**: Muhiimadda ay leedahay Siyaasadda Aqoonsiga Dadweynaha

### *Wuxuu Xeeriyay:*

### Qodobka 1aad

Go'aanka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.66.02.19** ee **28/02/2019** kuna saabsan ansixinta "**Siyaasadda Aqoonsiga Dadweynaha**" oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyey.

### Qodobka 2aad

Waxa Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Dib-u-h eshiisiinta iyo Federaalka loo igmaday in ay **hirgeliso, meel-marisana Siyaasadda Aqoonsiga Dadweynaha.**

### Qodobka 3aad

Siyaasadda Aqoonsiga Dadweynaha, waxa ay dhaqan-gelaysaa marka uu saxiixo Ra'iisul Wasaare Ku-xigeenka Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

Mudane Mahdi Maxamed Guuleed " Khadar
Ku-Simaha Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS
Ahna Ra'iisul Wasaare Ku-Xigeenka Xukuumadda JFS

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
WAA LA DIIWAAN GELIYEY
DIIWAAN NO: ______/2019
TAARIIKH 5/3/2019
SAXIIXA HANTIDHAWRKA GUUD

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA, FEDERAALKA

& DIB-U-HESHIISIINTA

# SIYAASADDA

## DIWAANGELINTA & AQOONSIGA DADWEEYNAHA SOOMAALIYEED

(Identification & Registration Policy Document)

**February 2019**

## HORUDHAC

Xiriirka iyo kalsoonida ka dhaxeeya dawlad iyo shacbigeeda waxay ka mid yihiin tiirarka asaasiga ee dawladnimo. Arrintaas waxay horseeddaa wada shaqayn, nabad-gelyo, maamul-wanaag, iyo horumar qaran ee lagu nagaado.

Haddaba si Soomaaliya ay u hesho xiriir adag ee u dhexeeya dawladda iyo shacbigeeda waxaa lagama maarmaan ah jiritaanka nidaam diiwaangelineed oo casri ah oo lagu aqoonsado shaqsi kasta ee ku nool dalka, isla markaana ah nidaam si siman ugu furan dadweeynaha.

Dawladaha horumaray iyo inta badan kuwa soo koraya, waxaa maanta ka jira nidaamyo casri ah ee lagu diwaangeliyo laguna aqoonsado shaqsiyaadka ku nool dalkooda.

Nasiib darro, Soomaaliya kama jiro nidaam dawli ah ee diiwaangelineed iyo aqoonsi ee ku baahsan dalka. Nidaamkaas waxaa looga maarmeyn in dadku noqdaan kuwa muuqda ee leh lambar mardhac ah (Unique ID Numbers) iyo "Kaarka Aqoonsiga" (Identity Card) ee lagu saleeyo xog-dhalyada laguna aqoonsado shaqsiga inta uu nool yahay isla markaasna fududeeyo bixinta adeegyada bulsho.

Sidaas darted, Wasaaraddu waxay go'aansatay in Dalka laga hirgeliyo nidaam diwaangelin iyo aqoonsi casriyeeysan oo mideeya dhammaan nidaamyada aqoonsi ee jira, waxayna diyaarisay siyaasadda aqoonsiga iyo diiwaangelinta dadweynaha

**Siyaasadda Aqoonsiga iyo Diwaangelinta** ee Dawladda Federaalka Soomaaliya waxay hagaysa naqshadaynta, sharciyeeynta, hirgalinta, iyo maamulka diwaangelinta iyo aqoonsiga dadweynaha iyadoo laga faa'iidaysanayo teknoloojiyda casriga ah.

Waxayna ka kooban tahay Qodobada hoos ku qoran:
Qaabka Loo

1. Ujeedada Aqoonsiga iyo Diwaangelinta dadweynaha.
2. Nooca Aqoonsiga Dalka Laga Hirgalinayo

3. Nooca Hor-Xogta la uruurinayo
4. Bixinta Lambarka Iyo Kaarka Aqoonsiga.
5. Xuquuqda helitaanka aqoonsiga.
6. Ilaalinta Iyo Asturnaanta Xogta Dadweeynaha
7. Xiriirka Ka Dhaxeeya Aqoonsiga Dadweeynaha Iyo adeegyada guud.
8. Hey'adda Aqoonsiga iyo Diiwaangelinta Dadweynaha
9. Qaab-Dhismeedka Hay'adda Aqoonsiga iyo Diiwaangelinta Dadweynaha.
10. Xilka iyo awoodaha Hay'adda Aqoonsiga iyo Diiwaangelinta Dadweynaha.
11. Qaabka Sharciyeeynta Nidaamka Aqoonsiga.
12. Miisaaniyadda iyo dakhliga hey'adda.

### 1) Ujeedada Aqoonsiga iyo Diwaangelinta Dadweynaha (Purpose of the Identification and Registration System)

Ujeeddada nidaamka diwaangelinta iyo aqoonsiga waa sameynta ***Xog-Dhig Aqoonsi*** *(Identity Database)* ee heer qaran ee lagu keeydiyo xogta asaasiga ee dadweeynaha, xog-dhiggaas oo leh ujeedooyinka hoose:

a) In la isticmaalo xog-dhalyada(Biometric data) oo khaas u ah qofka la diiwaangelinayo

b) In hey'adda Aqoonsiga iyo Diiwaangelintu ayada oo adeegsaneysa xog- dhigga (database) ay bixiso lambar aqoonsi mardhac ah(unique) iyo kaar aqoonsi qofka la diiwaangeliyey.

c) In ay suurto geliso iswaafajinta xoqaha aqoonsiyada kala duwan ee dalka.

d) In la sameeyo hab amaan ah oo lagu kalsoonaan karo oo lagu keydiyo, nidaamiyo laguna maamulo xogta asaasiga ee muhiimka ah ee dadweeynaha .

e) In la sameeyo nidaam lagu qanci karo oo u suurto gelineysa qof kasta oo diiwaangashan in uu u cadeyn karo xogta ugu jirta Xog-dhigga cid kale oo u codsata si waafaqsan sharciga.

### 2) Nooca Aqoonsiga Dalka laga hirgalinaayo (Type of the Identification System)

Nooca aqoonsiga dalka laga hirgalinayo waa aqoonsiga loo yaqaano"Aqoonsiga Xog-dhalyada" (Biometric ID) oo muujinayo sifooyinka guud ee muhiimka ah ee tilmaamayo shaqsiga isla markaasna xaqiijinaya jiritaankiisa laguna keeydinayo "Xog-dhig Dhexe" oo amaan ah oo suuro gelinaayo in qoflwaba galo diiwaanka halmar kaliya. Sifooyinka waxaa ka mid ah xogta dabiiciga iyo xogta guud ee tilmaamaysa shaqsiga sida magaca, jinsiga, waqtiga iyo goobta dhalasho, sawirka wajiga, xog-dhalyada (biometric data) oo ay ka mid yihiin sawirka , faraha iyo xog-dhalyada kale.

### 3) Nooca Hor-Xogta la uruurinayo

Xogta la uruurinayo waa mid ***asaasi ah*** oo kooban, si toos ahna ula xariirta ujeeddada khaaska ah ee Diwaangelinta iyo Aqoonsiga Dadweeynaha, waxaana ka mid ah xogtaas :

*a) Magaca shaqsiga, magaca aabaha, iyo kan awoowaha*

*b) Saddexda magac ee hooyada*

*c) Waqtiga dhalashada*

*d) Goobta dhalashada*

*e) Jinsiga shaqsiga*

*f) Xaaladda Gaarka sida Guurka, Geerida, iwm*

*g) Goobta deegaanka shaqsiga*

*h) Lambarka telefoonka iyo email-ka*

*i) Sawirka wajiga*

*j) Xog-dhalyada (biometric) oo ay ka mid yihiin sawirka iyo faraha.*

**4) Bixinta Lambarka Iyo Kaarka Aqoonsiga Lambarka aqoonsiga qofka** waa tirsi u gooni ah oo uu yeelanayo qof kasta oo la diiwaangeliyey, ***tirsiga*** Soomaaliya laga hirgalinayo ma yeelanayo astaamo gaar ah oo muujinayo sifooyinka shaqsiga.

Waxaa keliya ee tirsiga looga gol'leeyahay waa in uu shaqsigu dalka u ***tirsan yahay***, kana ***muuqanayo*** adeegyada loo fidiyo bulshada. Hawl-dhac (transaction) kasta ee shaqsigu galayo waa in uu ka muuqdaa tirsigiisa. Waxaa shaqsiga la siin karaa tirsi marka uu dhasho ama marka u horreeysa uu soo dalbado aqoonsi.

**Kaarka Aqoonsiga:** Ka dib marka shaqsiga la siiyo ***tirsiga***, hadduu qaangaar yahay, waxaa la siinayaa "***Kaarka Aqoonsiga***" oo muujinayo xog-shaqsiyeedka lagu xaqiijin karo jiritaankiisa iyo lahaanshaha kaarka uu sito. Da'da qaangaarnimo waa 18 (toban iyo sideed) sano.

Xogta ku xusan "***Kaarka Aqoonsiga***" waa qayb ka mid ah xogta asaasiga sida:

1) Saddexda magac ee kala ah magaca shaqsiga codsanyo aqoonsiga, magaca aabaha, iyo magaca awoowaha

2) Waqtiga iyo goobta uu ku dhashay

3) Waqtiga la bixiyey karaka

4) Jinsiga shaqsiga

5) Goobta deegaanka shaqsiga

6) Sawirka wajiga

7) "Chip" keydinayo xog muhiim ah oo muuqaal ahaan daahsoon

### 5) Xuquuqda helitaanka aqoonsiga.

Shaqsi kasta ee **si joogto** ah(permanent) ugu nool dalka wuxuu xaq u leeyahay qaadashada aqoonsi si uu u muuqdo ugana qayb galo adeegyada dalka ka jira. Waana in la diwaangeliyo.

### 6) Ilaalinta Iyo Asturnaanta Xogta Dadweeynaha (Data Protection and Privacy Rules)

Dawladda Soomaaliyeed iyo Hay'adda maamulayso xogta aqoonsiga dadweeynaha waxaa waajib ku ah ilaalinta iyo asturnaanta xogta. Khaas ahaan, waxaa xogta shaqsiga lagu maareeynayaa shuruudo ay ka mid yihiin kuwa hoos ku xusan:

a) In xogta lagu keydiyo goob amaan ah (*Save data in secure sites*)

*b)* In si joogta ah xogta isku mar loogu guuriyo ugu yaraan labo asal-keydiye (*Backup data simultaneously into two locations at minimum*)

*c)* Waa in xogta lagu guuriyaa asal-keydiyaha uguyaraan hal mar 15kii daqiiqaba (*Backup data every 15 minutes*)

*d)* Waa in si joogta loo tijaabiyaa xogta la guuriyey si loo hubiyo in ay hagaagsan tahay (*Test the backup regularly to ensure it is good*)

*e)* In la tababaro lana cayimo farsamayaqaano tiro yar ee leh awoodaha eegidda iyo wax ka-beddelka xogta (read access and write privileges)


*f)* In laga ilaaliyaa xog-dhigga dadweeynaha xadgudubyada

*g)* In la hirgaliyaa qaab farsamo ee lagula soconayo haddii ay dhacaan xad- gudubyo

*h)* In la diyaariyaa farsamayaaqano takhasus kuleh ilaalinta iyo asturnaanta xogta

i) In la iska dhowro uruurinta xogta aan loo baahnayn ee ku saabsan shaqsiga Waa in qodobada ilaalinta iyo asturnaanta xogta ee kor ku xusan badiba la hirgaliyo iyadoo la isticmaalayo heerka naqshadda xog-dhigga (*implemented at database-level*) ee aan lagu samayn qaybta hore ee barnaamijka maamulayo aqoonsiga (*database-level rather than application level*).

## 7) Xiriirka Ka Dhaxeeya Aqoonsiga Dadweeynaha Iyo adeegyada guud.




## 8) DHISMAHA MAAMUL AQOONSI IYO DIWAANGELINEED

(Establishment of the Identification & Registration Entity)

1. Waxaa la dhisayaa Hey'adda aqoonsiga iyo Diiwaangelinta dadweymaha taas oo ah mid madax-banaan maamul ahaan balse lamaane la'ah Wasaaradda Arrimaha Gudaha Federaalka iyo Dib-u-heshiissinta

2. Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-heshiissinta ayaa ha'yadda ku leh awood hogaamin, toosin, kormeer iyo ilaalin guud

3. Hay’addu Waxey leedahay shakhsiyadda qaanuuni ah iyo shaabadda guud (Common Seal)

4. Hay’addu waxbeey dawcwayn kartaa wana la dacweyn karaa si waafaqsan sharciga dalka.

## 9) Qaab-Dhismeedka Hay’adda Aqoonsiga iyo Diiwaangelinta Dadweynaha.

Hay’addu si ay hawsheed u fuliso, waxay yeelanaysaa qaab dhismeedka so socda:

A. Gudoomiyaha Hey’dda.

B. Guddiga Sare ee Maamulka ( Board of Directors ) oo ka kooban sagaal xubnood.

C. Agaasime Guud.

D. Waaxyo, qaybo iyo shaqaale u gaar ah.

E. Xarun dhexe oo ku taala Muqdisho.

F. Xarumo ay ku yeelaneyso Gobollada iyo Degmooyinka Dalka.

## 10) Xilka iyo awoodaha Hay’adda Aqoonsiga iyo Diiwaangelinta Dadweynaha

1. Abuurista, maamulka, dayactirka iyo hawlgelinta xog-dhigga dhexe ee keydka xogta aqoonsiga asaasiga ah ee dadweynha iyo soo saaridda karaka aqoonsiga si waafaqsan sharciga.
2. Diiwaangelinta dhammaan dadweynaha sida joogtada ah ugu nool dalka.
3. Sameynta Lambar aqoonsi (Tirsi) mardhac ah iyo kaar aqoonsi qof kasta oo la diiwaangeliyey.
4. Keydinta xogta aqoonsiga dadweynaha iyo isticmaalkeeda goorta loo baahdo.
5. Ilaalinta xogta aqoonsiga dadweynaha.
6. La sameynta xiriir iskaashi iyo wadashaqeyn adag dhammaan hey'adaha iyo xog-dhigyada kale ee laxiriira aqoonsiga dadweynaha.

7. La sameynta xiriir iskaashi iyo wadashaqeyn adag dhammaan hey'adaha gaarka loo leeyahay iyo kuwa dowliga ah ee u baahan isticmaalka xogta aqoonsiga dadweynaha.

8. Hubinta in shuruudaha diiwaangelinta iyo caddaynta jiritaanka shaqsiga la buuxiyey.

### 11) QAABKA SHARCIYEEYNTA NIDAAMKA AQOONSIGA (Legal Framework Process)

Dhismaha nidaam diwaangelineed iyo aqoonsi waxaa lagu saleeynayaa sharciyo laga soo ansixiyo **Golaha Wasiirada** iyo **Golaha Sharci-dejinta** ee dalka, hasa- yeeshee, iyadoo la tixgalinayo baahida deg-degga ah ee lo qabo diwaangelin iyo aqoonsi, waa in ay ***sharciyeynta*** iyo ***dhismaha*** maamulka Diwaangelinta iyo Aqoonsiga Dadweeynaha loo maraa siyaasad ay ansixiyaan Golaha Wasiirrada. Siyaasaddan waxaa la go'aaminayaa kaddib markii:

1. la horgeeyo ***Golaha Wasiirrada*** talo soo jeedin la xariirta baahida deg-degga ah ee loo qabo dhismaha nidaam aqoonsi ee sharciyeysan, iyadoo sal looga dhigo:

    a) Anixinta ***Siyaasadda Diwaangelinta*** iyo ***Aqoonsiga Dadweeynaha*** (ID Policy) ee qeexaysa nidaamka diwaangelinta iyo aqoonsiga dalka (qoraalkaan)

    b) Hirgalinta heshiiskii mashruuca aqoonsiga ee lala saxiixday ***Dowladda Pakistan*** iyo

    c) c) Hirgalinta Qodobka **66aad** ee **Sharciga Isgaarsiinta Qaranka** ee la xariira diwaangelinta lafta (SIM Card Registration)

    d) Tixgelinta warqaddii ballanqaadka ee Ra'iisul Wasaaraha u diray Bankiga Adduunka ee la xiirtay hirgelinta aqoonsiga dadweynaha, ayadoo wadatashi guud la sameynayo

2. Soo jeedinta Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo dib-u-heshiisiinta magacyada sagaalka xubnood ee Guddiga Maamulka iyo ansixinta Golaha Wasiirrada

3. In Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo dibu- heshiisiinta ay magacaawdo Agaasimaha Guud ee hay'adda madaxa bannaan

4. In Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo dibu- heshiisiinta ay dhamaystirto qaab-dhismeedka hay'adda madax banana si

hay'addu u guda gasho hawlaha diwaangelinta iyo aqoonsiga dadweeynaha

5. In Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Federaalka ay si xawli ah u diyaariso shuruuc buuxda ee lagu maamulo hay'adda oo laga ansixiyo *Golaha Wasiirada* iyo *Baarlamaanka si* Madaxweynaha Jamhuuriyaddana uu ku soo saaro xeer Madaxweyne

6. Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo dib-uheshiisiinta ayaa mari doonta isla hannaanka soo jeedinta iyo magaacabista iskugu jira markii ay qof ka mida Guddiga Sare ee Maamulka iyo shaqaalaha hay'adda xil ka qaadis mutaysto.

## 12) MIISAANIYADDA IYO DAKHQLIGA HAY'ADDA (Budget and Revenue of the Entity)

***Hay'adda Diwaangelinta iyo Aqoonsiga Dadweeynaha*** waa hay'ad dawli ah. Miisaaniyaddeda iyo daqligeedu waxay ka kala imaanayaan ilaha soo socda:

a) Miisaaniyad sanadeedka xukuumadda

b) Taakulayn miisaniyadeed ee ka imaan karta deeqbixiyaasha gudaha iyo dibedda

c) "**User Fee**" oo ah lacagta lagu dalaci karo:

1) Shirkadaha iyo hay'adaha loo qabanayo hawlaha la xariira aqoonsiga

2) Shaqsiyaadka loo qabta hawlaha aqoonsiyada sida codsiyada "Kaarka Aqoonsiga" dhuma, kuwa deg-degga ah, iyo bahiyada kale ee gaarka

## GABO-GABO

Dokumentigaan wuxuu qeexayaa siyaasadda diwaangelinta iyo aqoonsiga Dawladda Soomaaliyeed.

Waxaana lagu soo bandhigay dhowr qodob oo ay ka mid yihiin:

a) Ujeeddada Nidaamka Diwaangelinta Iyo Aqoonsiga Dadweeynaha Soomaaliyeed

b) Nooca Iyo Isticmaalka Aqoonsiga Dadweeynaha

c) Nooca Xogta La Uruurinayo

d) Yoolka Lambarka Iyo Kaarka Aqoonsiga

e) Qaabka Loo Bixinayo Lambarka iyo Kaarka Aqoonsiga

f) Xaq U Yeelashada Aqoonsiga

g) Xiriirka Ka Dhaxeeya Aqoonsiga Dadweeynaha Iyo Jinsiyadda

h) Xiriirka Ka Dhaxeeya Aqoonsiga Iyo Diwaangelinta Rayidka

i) Qaab-Dhismeedka Hay'adda Aqoonsiga

j) Naqshadda Farsamada Nidaamka Aqoonsiga

k) Ilaalinta Iyo Asturnaanta Xogta

**Qodobadaas waxay hagayaan arrimaha hoos ku xusan:**

1) Naqshadda xog-dhigga iyo barnaamijka kombiyuutar ee la naqshadaynayo

2) Isticmaalka, maamulka, iyo dayactirka xogta

3) Qaabka ay farsamayaaqanada u shaqaynayaan

4) Qaabka xogta loogu guurinayo asal-hayaha

5) Qaabka xogta loo ilaaliyo

6) Qaabka loo bixinayo aqoonsiga.

********** Dhammaad************

**XEER RA'IISUL WASAARE LR. 070** Taariikh: 21/03/2019

## UJEEDDO: GO'AAN GOLE ANSIXINTA SIYAASADDA HANNAANKA DHAB-U-HESHIISIINTA QARAN

***Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS***

**Markuu Arkay**: Qodobka 99aad , (a), (b) iyo (e) ee Dastuurka KMG

**Markuu Arkay**: Qodobka 100aad , (a), iyo (d) ee Dastuurka KMG

**Markuu Arkay**: Warqadda summaddeedu tahay **WAGF&D/XW/029/19** ee **20/03/2019** ee soo jeedinta Wasiirka Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-heshiisiinta, kuna saabsan codsiga Ansixinta Golaha Wasiirrada Siyaasadda Hannaanka Dhab-u-Heshiisiinta Qaranka

**Markuu Arkay**: Go'aanka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.67.03.19** ee **21/03/2019** kuna saabsan ansixinta "**Siyaasadda Hannaanka Dhab-u- Heshiisiinta Qaran**" oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyey.

**Markuu Tixgeliyey**: Baahida loo qabo in la meel mariyo Siyaasadda Hannaanka Dhab-u-Heshiisiinta Qaran.

### *Wuxuu Xeeriyay:*

### Qodobka 1aad

Go'aanka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.67.03.19** ee **21/03/2019** kuna saabsan ansixinta "**Siyaasadda Hannaanka Dhab-u-Heshiisiinta Qaran**" oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyey.

### Qodobka 2aad

Waxa Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-heshiisiinta loo igmaday in ay **hirgeliso, meel-marisana** Siyaasadda Hannaanka Dhab-u-Heshiisiinta Qaran.

### Qodobka 3aad

Siyaasadda Hannaanka Dhab-u-Heshiisiinta Qaran, waxa ay dhaqan-gelaysaa marka uu saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
WAA LA DIIWAAN GELIYEY
DIIWAAN NO: HAN/00 20/2019
TAARIIKH 26/3/2019
SAXIIXA HANTIDHAWRKA GUUD

Mudane Xasan Cali Khayre
Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS



# Hannaanka Dhab-u-Heshiinta Qaran

## Dhab-u-Heshiin: Aan Wada Tolanno Haanteenna Dillaacday!

**إِنَّ اللّهَ لاَ يُغَيِّرُ مَا بِقَوْمٍ حَتَّى يُغَيِّرُواْ مَا بِأَنْفُسِهِمْ"**

**"Illaahay Qoom Ma Bedelo, Ilaa Ay Iyagu Iskood Isu Bedelaan!"**

**Febraayo 23, 2018**

## Magac-u-yaallo

Dastuurka Ku Meel Gaarka ah (DKMG)

Dowladda Federaalka Soomaaliya (DFS)

Dowlad Goboleedyada (DG)

Dhisida Xiriirka Nabadda (DXN)

Dhab-u-heshiinta Qaran (HDQ)

Guddiga Bogsiinta, Nabadda iyo Dhab-u-heshiinta (GBN&D)

Guddiyadii Nabadda Deegaanka (GND)

Guddiga Runta iyo Dib-u-heshiinta (GR&D)

Habraaca Hawlaha (HH)

Hannaanka Dhab-u-heshiinta Qaran/Hannaanka

Himilada Horumarinta Waarta (HHW)

Hogaanka Isbedelka Nabadeyn (HIN)

Kormeer iyo Qiimeyn (KQ)

Qorshaha Horumarinta Degmada (QHD)

Qorshaha Horumarinta Qaranka (QHQ)

Ururkii Dhalinyarada Soomaaliyeed (UDS)

Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-heshiisiinta (WAGF&D)

Xayeysiinta Adeegga Dadweynaha (XAD)

## FARIINTA WASIIRKA WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA, FEDERAALKA IYO DIB-U-HESHIISIINTA

Ku guulaysashada nabadda, dib-u-heshiinta iyo xasiloonidu waa arrin wajiyo badan leh.

Waxa ay ka kooban tahay amniga, ku dhaqanka sharciga, adeeg bixinta iyo dib u kabasho dhaqaale, balse waa in dadaalada ugu badan la isugu geeyaa wax ka qabashada daruuriyaadka ugu mudan taas oo gacan ka geysan karta yareynta khilaafka iyo colaadaha, in kalsoonidii bulshada ka dhaxeysay ay soo noolaato, isla mar ahaantaana ay gogol xaar u noqoto xasillooni, nabadgelyo waarta iyo baraare.
Maadaama qeyb kastaa muhiimad wayn ku fadhido, hadana dowladnimadu waxaa ay xambaarsantahay ahmiyad gaar ah.

Dhibaatooyinka Soomaaliya ka dhacay waxay galaafteen wadajirkii bulshada, dowladnimadii, kaydkii ummaddeennu lahayd iyo qarannimadeennii, laakiin waxaa muuqata kasoo kabasho mug leh oo lagaga gudbayo waxyaabihii xumaa ee nagu dhacay. Hannaan dhab-u-heshiin tafatiran oo ku salaysan dhaqankeenna, aqoonta nabadeed ee diinteenna, khibradihii laga helay dedaalladii hore iyo wax ka barashada caalamka kale, ayaa hadda loo baahan yahay in ay ka dhacdo waddanka oo dhan si loo dhiso mustaqbal wanaagsan.

Haddaba si aan uga faa'iideysanno fursadaha deganaanshaha maalinba maalinta ka dambaysa sii kordhaya, waxay Wasaaraddu dajisay Hannaankan Dhab-u-heshiinta Qaran si ay jidkii loo mari lahaa ugu fasho geedi-socodka nabadaynta dalka.

Ujeeddada ugu weyn ee loo dajiyey Hannaanka Dhab-u-heshiinta Qaran (HDQ) waa in ay isu geyso dhammaan qaybaha bulshada ee dhinacyada dhaqanka, siyaasadda, diinta, dhaqaalaha iyo mid bulshaba si looga soo hortjeesto colaadda, loona bilaabo in diiradda la saaro oo cududdeenna oo mideysan la isugu geeyo sidii looga bogsoon lahaa wixii dhacay, nabad iyo dhab-u-heshiinna loo heli lahaa. Si loo gaaro natiijo mira-dhal ah oo dhab-u-heshiin qaran, hannaankani wuxuu ku dhisan yahay 5 tiir oo ballaaran iskuna dhafan oo wata hawlihii laga qaban lahaa.

Hannaankan waxaa loo diyaariyey in uu qeexo aragti xooggan oo uu ku hubiyo hoggaanka Soomaaliyeed geedi-socodka dhab-u-heshiinta qaran, iyo in uu meel isugu keeno hawlaha kala duwan ee nabadeynta iyo dib-u-heshiisiinta ee dalka ka socda ama kuwa cusub ee la bilaabi doono si ay noqdaan kuwo wada socda oo is dhammaystiraya.

Hawlaha dhab-u-heshiintu, ha noqdaan kuwo bulshadu wado, kuwo dowladdu wado ama hay'adaha aan dowliga aheyni wadaan, dhammaantood waa in ay noqdaan kuwo la hubiyey in ay buuxinayaan baahida nabadeed ee dhabta ah ee dalka ka jirta.

Hannaanku waxa uu heerarka dowladda ka caawinayaa in ay jiheeyaan dadaallada dhab-u-heshiinta ku aaddan. Hannaankani waxa uu hoosta ka xariiqayaa sida ay dowladda uga go'an tahay in ay dadka Soomaaliyeed u horseeddo geedi-socd dhab-u-heshiineed.

Hannaankani waxaa uu ka soo bilaabmay Shirweynihii Wadatashi ee Juun, 2017 oo ay Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo dib-u-heshisiinta qabatey si loo helo argtida ummadda Soomaaliyeed si colaadaha daba dheeraaday xal waaro loogu helo.

Shirweynahaas kadib, Wasaaraddu waxay samaysay wadatashiyo iyo xog-uruurin laga sameeyey heer federaal, dhammaan Dowlad Goboleedyada iyo gobolka Banaadir. Waxaa wadatshiyo Hannaanka Dhab-u-heshiinta Qaran lagala sameeyay in ka badan 1,400 qof oo ku kala sugnaa magaalooyinka waa weyn ee dalka.

Wadatashiyadaas waxaa ka qayb qaatay dad matalayey dhammaan qaybaha kala duwan ee bulshada, fikradahoodii iyo talooyinkoodii ayaa lagu dul dhisay hannaankan si loo xaqiijiyo in hannaankani noqdo mid Soomaalidu leedahay, hoggaaminayso oo ku qotoma aragtiyahooda.

Wasaaradaha Arrimaha Gudaha iyo Dib-u-heshiisiinta Dowlad-goboleedyadu waa mataanaha Wasaaraddan waxaana xusid mudan in ay qayb weyn ka ahaayeen xogta iyo dejinta Hannaanka Dhab-u-heshiinta Qaran.

Iyada oo ay jireen is-fahamwaa ka dhex taagnaa heerarka dowladda ayey haddana Wasaaradda u hirgashay in ay wada-shaqayn fiican la samayso Dowlad-goboleedyada- waxaa mahadcelin mudan xiriirka wadashaqeyneed ee WAGF&D iyo wasaaradaheeda ku lamaansan.

HDQ waa tusaale wanaagsan oo ka turjumaya sida wanaagsan ee Dowladda federaalka iyo Dowlad-Goboleedyadu u wada shaqeynayaan iyaga oo u wada heellan danta dadka Soomaaliyeed.

Hawsha HDQ lagu diyaariyey ma ahayn mid sahlan. Maadaama aan daahfureyno Hannaanka Dhab-u-heshiinta Qaran, waxaan jecelahay in aan u mahadnaqo cid kasta oo ka qaybqaadatay geedi-socodka dajintiisa.

Waxaan si gaar ah ugu mahadcelinaynaa Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, Mudane Maxamed Cabdullahi Maxamed, Ra'iysul Wasaare Xasan Cali Khayre, hoggaanka WAGF&D iyo saraakiisheeda sare, Wasaaradaha Arrimaha Gudaha iyo Dib-u-heshiisiinta ee Dowlad-goboleedyada, dadkii wadatashiyada ka qaybqaatay, deeq-bixiyeyaashii hawsha gacanta ka geystay gaar ahaan dowladda Finland iyo hay'adaheeda (Finn Church Aid and Network for Religious and Traditional Peacemakers), Dowladda Norway iyo hay'addeeda NIS Foundation, United Nations Development Programme (UNDP), United Nations Assistance Mission in Somalia (UNSOM), Jaamacadda Winchester iyo kooxdii hawsha HDQ qabatay.

Wasaaradda iyo wada-hawlgalayaasheedu, waxay isticmaali doonaan Hannaankan si ay u hubiyaan isku-duwid hufan oo hawlaha dhab-u-heshiisiineed taas oo loogu tala galay in ay noqoto mid miro-dhal ah oo saameyn joogto ah ku yeelato dalka.

**Mudane Cabdi Maxamed Sabriye,**
Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-heshiisiinta

# 1. Nuxurka oo Kooban

**Hannaanka Dib-u-heshiinta Qaran (HDQ)** ama Hannaanka ***Dhab-u-heshiinta*** Qaran, waxaa loo diyaariyey in uu tilmaan cad ka bixiyo isla markaana hubiyo hoggaan qaran iyo mid goboleedba geedi-socdka hannaanka dhab-u-heshiinta qaran, iyo in uu xiriiriyo dadaallada socda ee ku aadan Dhab-u-heshiinta iyo adkaynta nabadda ee dalka oo dhan.

Waa Hannaan muujinaya qorshaha dowladda ee ku aadan dib-u-heshiisinta Qaran oo dalka ka qabsoonta.

Hannaanka Dhab-u-heshiinta Qaran (HDQ) wuxuu salka ku hayaa mabaadii'da iyo qaababka soo jireenka ah ee dhaqanka Soomaaliyeed iyo Diinta Islaamka.

Waxaa hannaankan lagu dhisay wadatashiyo iyo xog-uruurin lala sameeyey in ka badan 1,000 qof oo kala jooga dalka oo dhan.

Dadku waxay hoosta ka xariiqeen in hannaankani noqdo mid dadka Soomaaliyeed leeyihiin kuna qotoma dhaqankooda iyo diintooda si qofkastaa uu u dareemo in uu leeyahay geedi-socodka hannaanka.

WAGF&D waxay ku bilowday hindisaha dajinta HDQ kadib markii ay ku qabatay "Shirweynaha Wadatashiga Dhab-u-heshiinta Qaran" Muqdisho bishii Juun ee sannadkii 2017kii.

Shiweynahaas waxaa ka soo qaybgalay ilaa 300 oo qof oo ka kala yimid Dowlad-goboleedyada, Gobolka Banaadir, hay'adaha Dowladda Federaalka Soomaaliya, bulshada rayadka ah, culumada, Hoggaamiyeyaasha dhaqanka, haweenka iyo dhalinyarada.

Taladii ugu wayneyd ee Shirweynahaas ka soo baxday ayaa ahayd in la dajiyo Hannaan loo maro Dhab-u-heshiin Qaran oo dalka ka qabsoonta.

HDQ wuxu ku astaysan yahay laba waji oo kiiba 3 sano yahay oo isku geyntii noqonayo lix sano. Dukumentigani wuxuu diiradda saarayaa istraatiijiyad iyo hawlaha la qabanayo wajiga koowaad ee hannaanka waqtiga loo cayimay.

Iyada oo la tixgelinayo marxaladda nuglaanshaha ee dalku ku sugan yahay hadda, wajiga labaad ee hannaanka waxaa la dajinayaa sannadka saddexaad ee barnaamijka kadib marka qiimayn lagu sameeyo wixii qabsoomay.

Markii lagu jiray wadashatiyada bulshada Soomaaliyeed way caddeeyeen in la joogo waqtigii dib-u-heshiinta. Sidoo kale waxay sheegeen si uu u hirgalo, in lagu saleeyaa dhaqanka iyo diinta, waana inuu ahaadaa mid ay soomaalidu iyadu bogsashadooda iyo heshiintooda ay gacantooda ku samaystaan, haddii kale wuxuu ku dambeyndoonaa meeshii ay mareen dib-u-heshiisiimihii 19ka ahaa ee ay shisheeyuhu hagayeen, kuwaas oo loo arkay in aysan guuleysan.

Sidaa daraaddeed, ayey hadda haanteennii dhaqanka ay noqotay astaanta nabadda iyo dib-u-heshiinta ee dalkeenna iyo dadkeenna Soomaaliyeed.

Marka ay dilaacdo haanteennu, dadkeenna Soomaaliyeed si hufan ugama faa'iideysan karaan waxtarkeeda. Marka sida ay dumarkeenna miyiga ku dhaqani u yaqaannaan sida loo kabo/tolo haanta, ayey dadkeenna Soomaaliyeedna u yaqaannaan waxyaabaha muhiimka u ah si loo bilaabo loona dhaqan galiyo dhab-u-heshiin macno leh.

Sidaa awgeed, ayuu Hannaanka Dib-u-Heshiisiinta qaran u leeyahay yool iyo shan (5) tiir.

Shantan tiir oo xiriirsan, is kaabaya una qaabaysan hab maangal ah oo jihaynaya dhammaan hawlaha ahmiyadda u leh dhab-u-heshiin waarta oo ka dhacda geyiga Soomaaliyeed.

## 1.1 Ujeeddada iyo Tiirarka Hannaanka

**Ujeeddada HDQ waa siyaasad, istraatiijiyad iyo habraac la isku raacsan yahay oo gun-dhig iyo hage u noqda Dhab-u-heshiin Qaran, taas oo dadka Soomaaliyeed ka daawaysa kagana gudbaan dhibkii dhex maray, soo celisa is-aaminaaddii, waddaniyaddii iyo wanaaggii dhex oolli jiray isla markaana xoojisa kalsoonida ay ku qabaan dowladnimada una horseedda horumar iyo kasoo kabasho bulsho, siyaasadeed, dhaqaale iyo amni**

TIIRKA 1AAD: **Aragtida Isbeddelka cusub ee nabadda iyo dhab-u-heshiinta** (Abuurid mustaqbal la wada leeyahay, himilo iyo hiigsi ummadeed)

**TIIRKA 2AAD: Ka heshiinta wixii dadka Soomaaliyeed dhex maray**

TIIRKA 3AAD: **Soo-celinta xiriirkii wanaagsanaa iyo is-aaminaaddii colaaddu dhaawacday**

TIIRKA 4AAD: **Soo-celinta kalsoonida dadweynuhu ay ku qabaan hay'adaha dowladda**

**TIIRKA 5AAD: Xoojinta kasoo-kabashada diifta iyo aafooyinkii colaadaha**

# 2. Hordhac

## 2.1 Qorshihii, Wadatashiyadii iyo Xog-uruurintii

ShirweynIhii koowaad kadib, fikirka ah in la dejiyo HDQ wuxuu ka mid noqday qorshayaasha muhiimka ah ee qaran ee hoos taga Tubta Siyaasadda Loo Dhanyahay taas oo ay halbeegyo iyo hawlo la xiriira arrimaha dib-u-heshisiinta WAGF&D ku gudbisay qorshaheeda.

WAGF&D ayaa u aragtay lagama maarmaan in lagu dhiso hannaankan hab ku saleysan wadatashiyo lala yeelanayo dadka Soomaaliyeed ee kala jooga wadanka qaybahiisa kala duwan si hannaanku saldhig ugu noqdo in ay Soomaaliya ka dhacdo dhab-u-heshiin waarta.

Guud ahaan, ka qaybgalayaasha kulamadii wadatshiyada ee lagu qabtay magaalooyinkla waa weyn ee dalka waxay hoosta ka xariiqeen in loo baahan yahay in dadka Soomaaliyeed ka heshiiyaan waxyaabihii dhexmaray, dib u yagleelaan xiriir iyo wada-noolaanshiyo wanaagsan, kalsoonidii iyo is-aaminaaddii ay ku qabeen dowladnimada soo laabato; waddaniyadda la xoojiyo lana tayeeyo hay’adaha dowliga ah oo ay ugu horeeyaan hay’adaha garsoorka si nabad waarta iyo xasilooni loo gaaro.

Arrin kale oo mug weyn oo ay dadka Soomaaliyeed ku celceliyeen waa *cadaalad* iyo xad gudub la'aan. Waxa ay hoosta ka xariiqeen in waxyaabihii marka hore colaadda keenay la qeexo dibna aan loogu noqon.

Afar iyo toban wadatashi ayaa lagu kala qabtay Puntland, Jubbaland, Koonfur Galbeed, Galmudug, Hirshabeelle iyo Gobolka Banaadir si loo sameeyo Hannaanka Dib-u-heshiisiinta Qaranka kuwaas oo ay qayb ka ahaayeen in ka badan 1400 qof oo ka koobnaa hay’daha dowladda iyo Bulshada Rayidka ah.

## 2.2 Waxyaabihii Kasoo Baxay Wadatashiyadii



### 2.2.1 Dib-u-qeexid kalmadda ”dib-u-heshiisiin” iyada oo lagu bedalay “Dhab-u-heshiin”

Shirarkii wadatashiyada waxaa ka soo baxay fariin guud oo cad. Dadka Soomaaliyeed ee wadanka daafihiisa kala joogaa waxay ku baaqeen in “dhab” u-heshiin dhacdo oo geedi-socodkani noqdo mid cusboonaysiiya wadajirka ummadeed oo dhinac kasta ah.

Gabar Soomaaliyeed oo ka mid aheyd dadkii ka soo qaybgalay mid kamida shirarkii wadatashiyada gobolka Banaadir ayaa waxay ku boorisay hawl wadeennadii Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-heshisiinta iyo kasoo qayb galayaaha kulankaas in “kalmada dib-u-heshiisiin lagu bedelo dhab-u-heshiisiin taas oo ka turjumaysa in dadka Soomaaliyeed u baahan yihiin in ay *iyagu* dhexdooda si *dhab* ah uga heshiiyaan oo aysan jirin cid kale oo *heshiisiin karta* maadaama ay dadka Soomaaliyeed iyo daneeyayaasha Soomaaliya ay 28kii sano ee lasoo dhaafay aad u isticmaali jireen kalmada ”dib-u-heshiisiin” badina dadku ay quus ka taagan yihiin in dhab-u-heshiin run ahi Soomaaliya ka dhacdo.” Sidaa darteed, erayga ”dib-u-heshiisiin” waxaa

lagu bedelay dhab-u-heshiin, iyada oo nuxurka loola jeedo yahay, in dib-u-heshiisiinta Soomaali u baahan tahay ay tahay dhab-u-heshiin.

Waxaa lagama maarmaan ah in dadka Soomaaliyeed ka dawoobaan dhibaatooyinka iyo tiiraanyada ka dhashay burburkii dagaalkii sokeeye ee bilawday dhammadkii 1980-meeyadii (iyo waliba ka hor), kuwaas oo abuuray silsilado colaadeed oo ilaa hadda ka jira deegaanno badan oo waddanka ka mid ah.

Colaadahaas soo noqnoqday waxay beereen fakar iyo dabeecad dadka in ay isku arkaan ”dulmaneyaal” kuwa kalena ”dambiileyaal” u arkaan. Colaadahaasi waxay dadka ku reebaan tiiraanyo waxayna baabi’iyeen is-aaminaaddii iyo isu-dheelitirnaanta dadka deegaanka dhexdooda iyo qabaa’ilkaba. Waxay dadka ka xayireen in ay dib u dhistaan noloshooda, waxay kala qaybiyeen dadka deegaanka, waxay kordhiyeen ku biiridda kooxaha xag-jirka ah, waxay wiiqeen kalsoonidii lagu qabay dowladnimada, waxayna joojiyeen horumar waara.

Waxaa kale oo iyguna jira lix arrimood oo muhiim ah oo laga qaadan karo geedi-socodka wadatashiyadii la qabtay si loo sameeyo istraatiijiyad, wax-qabadyo la soo bandhigay iyo talooyin siyaasadeed oo ku qoran HDQ.

### 2.2.2 Dhab-u-heshiin diyaar loo yahay

Wadatashiyadii kala duwanaa ee lagu qabtay dalka ayaa waxaa lagu ogaaday in dadkeennu ay diyaar u yihiin dhab-u-heshiin iyaga oo dareensan in ay jiraan hay’adaha kala duwan ee heerarka dowladda oo karti u leh in ay fuliyaan oo hanan karaan geeddi-socodka dhab-u-heshiinta qaran.

Sidoo kale, waxaa watashiyada lagu ogaaday in ay dadku ka daaleen dhibka colaadda daba dheeraaday iyo amni darradada Soomaaliya ka reebtay aduunyada inteeda kale.

Markii hore colaaddu waxay ku salaysnayd siyaasad, kadibna waxay isu rogtay colaad qabiileed laakiin hadda u xuub-siibatay xag-jirnimo iyo argagixiso caalami ah. Dareenku wuxuu yahay in ay mushkiladdu gacanta Soomaalida ka baxsan tahay ayna rabaan dadku in dhibku istaago.

### 2.2.3 Kala irdhawgii khilaafku keenay waxa uu sababay kala qoqobnaan bulsho, siyaasadeed iyo dhaqaale

Barakac baahsan oo ka dhashay dagaalkii sokeeye ee bilaabmay dhammaadkii sideetamaadkii wuxuu kala-qoqob ku sameeyey aqoonsigii qarannimo ee muwaadinka.

In kasta oo nidaam iyo dib–u-soo-noqosho dowladnimo laga dhaxlay, dadka Soomaaliyeed waxay ka muujiyeen in ay kala fogaansho midnimo ka dhalatay markii dowlad goboleedyada la samaynayey.. Sida ka soo baxday wadatashiyadii, waxa dadku muujiyeen in uu yar tahay wadahadal qaran oo ku saabsan dhab-u-heshiin gaarta deegaannada ka baxsan caasimadaha dowlad-goboleedyada.

### 2.2.4 Soomaali kastaa wuxuu dareemayaa in uu yahay dulmane waxaana loo baahan yahay in ay bulsahdu ka dawoowdo boogihii hore oo wixii dhacay laga wada-xaajoodo

Dadka badankoodu, waxay dareemayaan in ay yihiin dulmanayaal colaadihii muddada dheer socday ka dhaxlay dhibaato u gaar ah, waana yar tahay kooxo ama hoggaamiyayaal mas'uuliyadda colaadahaas qaadanayaa.

Sida wadatashiyada ka soo baxay, waxaa la aqoonsaday in ay jiraan dad mar kasta dulmanaa, takoornaa oo lagu faquuqay hab-dhaqanka iyo qaab-dhismeedka bulsho. Ka qaybgalayaashu waxay tilmaameen in loo baahan yahay geedi-socod bogsasho bulsho oo qaran si ay uga bogsadaan wixii dhacay.

### 2.2.5 Xiriirka iyo wadajirka bulsho oo nugul

Ka qaybgalayaashu waxay muujiyeen in wadajirkii dadka deeganka iyo qabaa'ilku sii wiiqmayo.

Xeerkii Soomaalidu ku dhaqmi jirtay wuu dhaawacmay, heshiis dhaqameedka qabaa'ilka waxaa saameeyey is-aaminaad yaraan, kala shaki, cabsi iyo tabashooyin weli taagan. Sidaa awgeed, wada shaqaynta dadka deegaanka iyo nabad-ku-wada-noolaanshahoodii wuu adkaaday, inta badanna waa mid colaadeed. Dadku waxay adkeeyeen oo ku celceliyeen in loo baahan yahay barnaamijyo iyo wax-qabad lagu soo celiyo kalsoonidii iyo is-dhexgalkii bulsho.

### 2.2.6 Heerarka kala duwan ee hay'adaha iyo nidaamka dowladda oo daciif ah oo aan awood u lahayn adeegga aasaasiga ah iyo nidaamka federaalka oo aan si sax ah loo fahamsaneyn

Dhab-u-heshiintu waxay ka dhigan tahay bulshada oo ka bogsoota dhibkii dhacay isna dhexgasha taasina waxay fududaynaysaa heshiisyo siyaasadeed iyo maamul wanaag. Ka qayb galayaashii wadatashiyadu waxay yiraahdeen dhab-u-heshiin waa in dadku wadahadal qaran ka yeesho nidaamyada dowladnimo, iyo qaab-dhismeedka sida federaalaynta, wadaagga kheyraadka dalka, iyo matalaada. Kadib colaadihii sokeeye ee ka dhacay dalka, ayaa dadka Soomaaliyeed waxay markii hore ku bilaabeen heshiis siyaasadeed oo dowlad lagu soo dhisay iyada oo laga booday dib-u-heshiisiin heer bulsho taas oo dhalisay caqabado badan oo kahor yimid taabba-galka dowladnimo.

### 2.2.7 Soomaalidu waxay leedahay mabaadii' xooggan oo ku salaysan dhaqanka iyo diinta Islaamka kuwaas oo lagu saleyn karo nabadeyn iyo dhab-u-heshiin lagu dawoobo

Dadkii wadatashiyada ka qaybgalay waxay sheegeen in ay Soomaalidu leedahay diin iyo dhaqan suuban, mabaadii' qaabab, agab iyo tiirar aasaas u noqon kara in ay dadka Soomaaliyeed dhab u heshiiyaan.

Waxay sidoo kale, hoosta ka xariiqeen in dadka Soomaaliyeed oo maanta u badan dhallinyaro 70% ka yar da'da 30 jirka, in aysan fursad u haysan helidda xog iyo aqoon ku saabsan dhaqanka iyo hiddaha, iyagoon waliba fahamsanayn faa'iidada ay leeyihiin isticmaalka dhaqankooda iyo diintoodu.

Waxay ka qayb galayaashu soo jeediyeen in loo baahan yahay in la diiwaangeliyo qaababkii dhaqanka iyo hidaha soo-jireenka ahaa loo isticmaali jiray, dhalinyaradana la baro diinta iyo dhaqankeenna suuban.

Waxaa cad in qaababka loo adeegsan karo geedi-socodka dhab-u-heshiineed ka mid yihiin bogsiinta iyo cusbooneysiinta xiriirka bulsho ee wadanka gudihiisa iyo dibeddiisaba.

## 2.3 Mabaadii’da Dhaqanka Soomaaliyeed ee Dhab-u-heshiinta Loo Adeegsado

Wadatashiyadii waxaa hoosta looga xariiqay in Soomaalidu leedahay mabaadii’ lagu xeero colaadda iyo dib-u-heshiisiinta,dhaqan iyo hiddena u leenahay garsoor wanaagsan, gobannimo, is-jidmarin, is-xaalmarin, sabeen-xir, isu-dulqaadasho, is-dhaahin, is-calool-xaarasho iyo mucaamil nololeed oo wanaagsan. Mabaadii’da iyo qaababka dhaxal-galka ah ee dhaqanka Soomaaliyeed ku dhisan ee dhab-u-heshiinta lagu dul dhisi karo waxaa kamid ah:

- **Garawshiiyo:** oo ka dhigan in laga garaabo gefka iyo xad-gudubka cid kale loo gaysto *“Nin aan garawshiiyo barannin, gar ma baran”*;

- **Dhaahin/laab-xaarasho:** oo ka dhigan in dulmanaha hadal wanaagsan lagu daweeyo qalbigiisa “*finka caloosha ku yaal, carrabkaa lagu gubaa*”;

- **Gar-qaadasho:** oo ka dhigan in qofkii gar-darani guddoonka lagu rido qaato ‘*’Guddoon dabadi guuguu nacay’’*;

- **Cafis/isa saamaxaad:** Oo ka dhigan in Alle dartii la is cafiyo *“Haddan la kala roonaan roob ma da’o”*;

- **Isu-hoyasho:** oo ka dhigan in ciddii gefka ama dambiga gashay raadsato oo u hoyato qofkii uu dambiga ka galay, Shirib *“Hareeriyaan hal hoos dhigoo, waxaan halleeyey waa hoyaad”*;

- **Is-qabasho/is-cesasho:** oo ka dhigan in qofkii qalad ku jira dadka u xigaa gardarada ka qabtaan. *”Tol waa nin toosan quweyntiis iyo nin qaldan qabashadiis”;*

- **Qoor-dhiibasho:** oo ka dhigan in qofkii ama beelihii wax ka dhexeeyeen u qoor-dhiibtaan guurtida iyo xeer-beegtida xaajadooda ku jirta *“Walaalkaaga candhuuftaadu gaarto”;*

-

- **Xalay-dhalay:** oo ka dhigan in dhibaatada baaxadda weyn ee cid dhex marta halkeeda lagu joojiyo oo la iloobo. *"wixii daantaas saaran dabayshu ha qaado, wixii dooxa yalana daadku ha qaado"*;

- **Xaal-marin/sabeen xir:** Oo ka dhigan in hadal wanaagsan ama xoolo laga bixiyo gefkii dhacay

- **Isu-ergayn: Oo ka dhigan in qofka dhibka loo gaystay dirsan karo qof kale si qaladka laga galay looga xaajoodo**. '*ergo waxaa gali kara nin kurtun dhaxan uga adkaysi badan, kudkudan gaajo uga adkaysi badan, kurna qorax uga adkaysi badan, tukana cay uga adkaysi badan***;"**

- **Isu-tanaasul:** oo ka dhigan in cidda is haysataa isu tanaasusho oo meel dhexe isugu timaado *"haddaan la kala roonaan roob ma da'o"*;

- **Mag-dhaw:** oo ka dhigan in dhibkii dhacay mag ama qaan laga bixiyo "*halkii xoolo maraa, xeerna maraa*" ama "saxan saxan ku gud, saan saan ku gud"; iyo

- **Dhagax-saar:** Marka ay dhibaatada, qaxa iyo dilka dhinacyada is hayaa xaddiga la magi karo dhaafo, waa la dhagax saaraa, waana la aasaa wixii dhacay oo dhan. Waxay u dhawdahay xeerka *Xalaydhalay* ama *Maariska* la yiraahdo.

- In kasta oo aysan intan ku koobnayn intanina aysan ahayn kuwa kaliya ee la isticmaalayo, mararka qaarna si qaldan loo isticmaalo, haddana waxay muujinayaan in dadka Soomaaliyeed leeyihiin tiirar ay u cuskan karaan Dhab-u-heshiin dadka Soomaaliyeed dhex marta.

## 2.4 Mabaadii'da Dhab-u-heshiinta ee Diinta Islaamka

Wadatashiyadii dadka Soomaaliyeed lala yeeshay waxay walaac weyn ka muujiyeen sida loo baalmaray milgihiii iyo ku-dhaqankii suubbanaa ee diinta Islaamka, iyada oo si qaldan loo fasiray diintii isla markaana , naxariistii iyo nabaddui ay xambaarsanayd Diinta Islaamka lagu bedelay xag-jirnimo iyo kala qaybinta dadka Soomaaliyeed oo khilaafaad diineed noocan oo kale ah aan waligood soo marin. Waxay hoosta ka xariiqeen in Diinta Islaamku tahay diin nabadeed sida magaca "Islaam/Silm" tilmaamayo.

Illaahay waxa uu Qur'aanka ku caddeeyey in ujeeddada Nabi Maxamed loo soo diray (SCW) tahay Naxariis iyo Raxmad caalamka oo dhan ah "*Kuuma aanan soo dirin caalamka in aad raxmad u tahay mooyee*" 21:107. Qiimaha ay nabaddu Diinta Islaamka ku leedahay waxa kale oo cadaynaya in magacyada Illaahay ee Ar-Raxmaan iyo Ar-Raxiim ay ku bilawdaan suurad kasta.

Waxa sidoo kale wadatashiyadii dadka Soomaaliyeed ka soo baxay in ay jiraan mabaadii' iyo qaabab diinta Islaamka ku qotoma oo loo adeegsan karo dhab-u-heshiinta waxaana ka mid ah:

- **Musaalaxo:** ujeeddada Islaamku ka leeyahay musaalaxada; waxaa heshiinaya kuwii colloobay, waxaa is jeclaanaya dadkii is nacay, waxaa is xiriirinaya kuwii is gooyay, waxaa is wanaajinaya kuwii is xumeeyey, waxaa wax isa siinaya kuwii is qadiyey, waxaa geedka kalgacalka lagu beerayaa qalbiyada bulshada kala iridhawday.

- **Raxmad:** وَمَا أَرْسَلْنَاكَ إِلَّا **رَحْمَةً** لِلْعَالَمِينَ Islaamku waa raxmad taasna waxay keentay in Raxmaddu noqoto waxyaalaha heshiisiinta saldhiga u ah.

- **Cafwu/Saamaxaad:** Islaamku waxa uu u arkaa in saamaxaadda iyo cafigu yihiin arrimo waaweyn. Saamaxaaddu waa marka adoo awood aad ku qaadato xaqaaga ama ku aargoosato aad iska dayso oo qalbigaaga furto, kalgacal muujiso, gefafka dadku kuu geystaan aad iska cafido, khaladkoodana cudurdaar u raadisid, fursad ay ku soo noqdaanna u samayso

- **Cadli**: Islaamku waxa uu caddaaladda u yaqaannaa tiir ay dawladda iyo bulshadu ku taagan yihiin wuxuuna ka duulayaa in uu yahay mabda' insaani ah oo caalami ah, oo amaaano ku ah qof kasta, muslimiintana caddaaladdaas ayaa la faray oo ay ku amran yihiin **INNALLAAHA YA'MURU BIL CADLI WAL IXSAAN**

- **Saraaxa:** Diinta islaamku waxay dadka ku boorinaysaa in ay runt aka sheegaan waxa ay sax u arkaan, waliba la dhagaysto, waana waajib oo diinta oo dhan baa waxa laga dhigay mid nasiixo iyo wax-isu-sheeg ku dhisan

- **Kalimatu-Xasana:** وَقُلْ لِعِبَادِي يَقُولُوا الَّتِي هِيَ أَحْسَن waa mabda' islaamku aaminsan yahay in hadalka wanaagsani tiir u yahay wada noolaanshaha, is jacaylka iyo heshiisiinta intaba

- **Ixsaan/Samafalidda:** إِنَّ اللَّهَ يَأْمُرُ بِالْعَدْلِ وَالْإِحْسَانِ Samafaliddu waa arrin ka xeeldheer cadaaladda. Caddaaladdu waa qofka in la siiyo waxa uu xaqa u leeyahay samafalkuna waa in qofka loo sii roonaado, loo sii buro-gooyo gacan iyo garabna laga siiyo waayihiisa adag. Samafalka dadka dhexdoodu waa calaamad tusinaysa is-haysashada iyo isku-xirnaanta bulsho.

- **Xukum:** Waxaa mabd'aani siinayaa dadka dhexdhexaadiyeyaasha ahi in ay qaadan karaan kaalin ay noqdaan kuwo gala xukun aan ahayn nooca maxkamadda oo dadka ku kala saaraan.

  In kasta oo aysan intan ku koobnayn, waxa ay mabaadii'dan iyo qaababkani muujinayaan in ay dhab-u-heshiinta tiirar u noqon karaan.

## 2.5 Waxyaabaha sababay ama uu salka ku hayo khilaafka Soomaalidu

Markii ay wadatashiyadu socdeen waxaa la waydiiyey dadkii wadatashiyada lala yeeshay su'aal ku saabsan waxyaabaha ay u arkaan in khilaafka colaadda wata ee Soomaalidu ku salaysan yihiin iyo waxyaabihii ay ka dhasheen.

In kasta oo ay sheegeen arrimo badan oo kala duwan, hadana waxa ay u qaybsamaan afar qaybood:

1) **Sababo ka dhashay fikirka iyo aragtiyaha dadku kala aaminsan yihiin iyo cabasho la kala tirsanayo** sida is-faquuq, kala-sarayn, fikrado qaldan oo la kala aaminsan yahay, is-aaminaad-darro, calool-xumo, cabsi, nacayb, iyo dareen dhibanenimo oo cidkastaa aaminsan tahay;

2) **Sababo ka dhashay qaab-dhismeedka bulsho:** sida cadaalad-darrada, xeerkii lagu dhaqmi jiray oo dhaawacmay, qabyaaladda, dhaqan-burburka, qab-jab, iyo xag-jirnimada diimeed;

3) **Sababo salka ku haya nidaamka dhaqan-dhaqaale iyo siyaasadeed** sida fahamka qaldan ee dowladnimada, itaal-yaraanta hay'adaha dowliga ah, qaabka awood-qaybsiga oo aan cadayn, masrax siyaasadeed la'aan, isku qabsiga xuduudaha maamullada, hoggaan-xumida; iyo

4) **Sababto dibedda ka yimid** sida buqcadda istraatiijiga ah ee ay Soomaaliya ku taallo oo faragelin badan soo jiidanaysa, ajendayaasha siyaasadeed ee dowladdaha dariska, faragelinta shisheeyaha, iyo argagixisada caalamiga ah.

Kuwani waa arrimaha ugu waaweyn ee laga dhawaajiyey, laakiinse intan way ka badan yihiin. Si kastaba ha ahaatee, waxaa hoosta laga xariiqay in wax laga qabto waxyaabaha khilaafaadka daba dheeraaday ay salka ku hayaan si loo helo nabad waarta.

Sida wadatashiyadii iyo xog-uruurintii ka soo baxday, dadku meel walba ay ka joogaan dalka way ku kala aragti duwan yihiin marka ay noqoto goorta khilaafaadka Soomaaliya ee dhaliyay colaaduhu bilaabmeen. Tusaale ahaan:

- Dadka qaar waxa ay qabaan in dhibku ka soo bilaabmay markii uu gumeestuhu kala-qaybiyay dadka Soomaaliyeed, dushana kaga keenay xukun iyaga oo aan waqti fiican u helin in ay dhaqankooda iyo diintooda la falgaliyaan nidaamkii cusbaa ee dowladnimada casriga ah ku dhisnaa;
- Dadka qaarna waxa ay qabaan in uu la kowsaday isla markii la helay madax bannaanidii 1960kii;
- Dad kale oo badanna waxay tilmaamayaan in uu ka bilawday xukunkii militariga ee hanti-wadaaagga ku dhisnaa ee dalka haystay muddada dheer;
- Dadka qaar ayaa muujiyey in uu dhibka keenay dagaalkii qaboobaa iyo dagaalladii dowladaha deriska lala galay;
- Kuwo kale ayaa iyaguna tilmaamay in mushkiladdu ka bilaabmay jabhadihii hubaysnaa ee qabiilka ku dhisnaa;
- Iyada oo dad kalena tilmaameen in dhibka badidiisu bilaabmatay markii dowladdii dhexe burburtay;
- Waxaa dadka qaar aaminsan yihiin in dhibku weligoodba haystay, la faquuqi jiray oo ay dulmanaayeen.

Halkaas waxa ka cad in aragtiyaha laga aaminsan yahay bilawga khilaafaadka Soomaaliyeed lagu kala aragti duwan yahay. Kala duwanaanshaha aragtiyaha waxaa saamaynayey meesha uu qofku dalka ka degan yahay, da'diisa, aqoontiisa iyo heer nololeedkiisa.

Waxaa inta badan la isku raacsan yahay in dagaalkii sokeeye markii uu bilowday, dadkii Soomaaliyeed ay ku kala firdhadeen wadanka gudihiisa iyo dibeddiisa oo ay qaar bara-kacayaal ku noqdeen meelo dalka kamida oo aysan waligood tegin, qaarna qaxooti ku noqdeen wadamada deriska ah iyo kuwa magan-gelyo bixiya.

Intaas kaliya dagaaladii sokeeye ee galaaftay nolol, maal iyo dowladnimadii Soomaaliya kuma istaagin ee waxaa sii laba kacleeyay dagaallo qabiil oo ilaa jufooyinka hoose socday.

Marka laga reebo deegaannada qaar oo dhibka ka soo kabtay, hoggaamiye-kooxeedyo qabiil ku dhisan ayaa abuurmay kedibna waxa ka hoos dhashay Midowgii Maxkamadaha Islaamiga ah oo iyagana ay ka soo dhex baxeen xag-jireyaal afkaar dibedda ka timid watay taas oo keentay in faragelin shisheeye timaaddo oo iyaduna kacdoon abuurtay aakhirkiina dowlad dhexe oo aan ku-meelgaar ahayn dalku yeeshay. In kasta oo dhib weyn la soo maray, waxa maanta dalku marayaa xaalad kasoo-kabasho dhinac walba ah iyada oo la dhammaystiray haykalkii dowladnimo ilaa heer dowlad-goboleed hawshuna socoto.

## 3. Hannaanka Dhab-u-heshiinta Qaran

HDQ wuxuu la jaan-qaadayaa afarta tubood ee qorshayaasha qaran ee horumarka dalka u degsan sida, Tubta Siyaasadda Loo Dhanyahay, Tubta Amniga iyo Cadaaladda, Tubta Horumarinta Arrimaha Bulshada iyo Tubta Horumarinta Dhaqaalaha[1]. Dib-u-heshiisiintu waa halbeegga 1aad ee Qorshaha Horumarinta Qaranka (QHQ) iyo qorshaha Cadaaladda iyo Nabadda ee Aragtida 2030[1]. Sidoo kale, HDQ wuxuu toos ula xiriiraa Yoolka 16ka ee Himilada Horumarinta Waarta (HHW), khaas ahaan qaybta "In la xoojiyo nabadda, horumarka loo dhan yahay, fidinta cadaaladda iyo isla-xisaabtanka."[2] Sidoo kale Hannaankani wuxuu hawlaha nabadda iyo dhab-u-

[1] 5ta Tiir ee Siyaasadda loo dhan yahay waa: Amniga; Dib-u-dhiska dhaqaalaha; adkaysiga, dib-u-usookabashada iyo Gargaarka; jinsiga iyo Xuquuqul Insaanka

[2] https://sustainabledevelopment.un.org/sdg16

heshiinta gacanta u soo galinayaa dowladda isaga oo siinaya kaalin hoggaamineed, kana soo wareejinaya hay'adaha iyo deeqbixiyeyaasha oo inta badan iyagu wadi jiray geed-socodka dib-u-heshiisiinta dadka Soomaaliyeed muddo dhan 28 sano. Sidoo kale waxa uu fursad u siinayaa in ay dowladdu kaalin hoggaamineed ka qaadato nabadda, dhab-u-heshiinta iyo daawaynta bulshada.

## 3.1.1 Ujeeddada Guud ee HDQ

In HDQ noqdo siyaasad, istraatiijiyad, xiriiriye iyo Habraac la isku raacsan yahay oo gun-dhig iyo hage u noqda dib-u-heshiin Qaran, taas oo dadka Soomaaliyeed ka daawaysa oo ay kaga gudbaan dhibkii dhex maray, soo celisa is-aaminaaddii, waddaniyaddii iyo wanaaggii dhex oolli jiray isla markaana xoojisa kalsoonida ay ku qabaan dowladnimada una horseedda horumar iyo kasoo kabasho bulsho, siyaasadeed, dhaqaale iyo amni.

### 3.2.1 Wadaag Tiirka 1aad: Aragtida Isbeddelka cusub ee nabadda iyo dhab-u-heshiinta (Abuurid mustaqbal la wada leeyahay, himilo iyo hiigsi ummadeed)

MAAHMAAH: *"Ninkii Xoolo Alle la damco dadkeeddaa Alle siiyaa"*
*"Tol aan xeer lahayn waa xoolo aan xero lahayn. Tol xeer leh ma faqriyo."*

Maadaama aysan dadkeenu sinnaba u kala maarmin, waa in ay nabad, caddaalad iyo is qadarin ku wada noolaadaan si ay u gaaraan hadafkooda guud ummadeed ee mustaqbalka fog.

Haddaba, su'aashu waxay tahay "sidee loo abuuri karaa aragti fog oo Soomaali wada leedahay?"

Si loo abuuro aragtidaas fog ee dadka oo dhan ka dhaxaysa, waxaa muhiim ah in dhammaan qaybaha bulsahdu ka wada qayb-qaataan dhab-u-heshiinta iyo nabadaynta dalka.

Inkastoo bulshadu kala aaminsanaan karto afkaar kala duwan oo siyaasadeed, haddana abuuridda aragti mustaqbal qurxoon oo la wada leeyahay waxay aad muhiim ugu tahay dedaalada loogu jiro Dhab-u-heshiinta.

### 3.3.2 Tiirka 2aad: Ka heshiinta wixii dadka Soomaaliyeed dhex maray

MAAHMAAH: *"Nabar Walaal, Duugmaa u Dambaysa."*

*"Soohin (sohdin) wareertay hawaraa loo celinaa"*

Sida aan dhamaanteen ognahay waxay dadka Soomaaliyeed isu gaysteen dhibaatooyin ay keeneen colaaddiihii waqtiyadii kala duwanaa soo maray dalka, xaqiiqaduna waxay tahay, illaa aan xal u helno wixii dhacay oo laga wada xaajoodo wixii dhacay way adkaan doontaa in horay loo sii socdo. Sidaa awgeed, waa muhiim in garoowshiyo laga muujiyo wixii dhacay, la isu mag-dhabo, la iska cafiyo lagana gudbo dhammaan wixii xumaa ee lasoo maray, balse wax laga barto, waa haddii aan dhamaantayo isku raacno inay tani tahay mid la wada qaadan karo.

### 3.4.3 Tiirka 3aad: Soo-celinta xiriirkii wanaagsanaa iyo is-aaminaaddii colaaddu dhaawacday

*MAAHMAAH: "Lafba Lafta ku Xigtaa Lagu Kabaa."*

*"Walaalo is neceb waa xabaala badiyaan, wayna xoolo yareeyaan."*

Saddexda sheeko ee kor ku xusnaa waxay tilmaan wanaagsan u yihiin beri-samaadkii iyo sidii dadka Soomaaliyeed u xushmayn jireen xiriirka wanaagsan ee dhexdooda. Dadka Soomaaliyeed waxaa ka dhexeeyey isjacayl, walaalnimo, midnimo iyo wadaniyad xooggan oo gaartay in ay diinta, dalka iyo dadka naftooda u huraan.

Tusaale waxaa noogu filan doorkii ay ururkii dhalinyarada Soomaaliyeed (UDS/SYL), 1943dii ka qaateen gobonimo-doonkii Soomaaliyeed. Si kastaba ha ahaatee, colaadihii waqtiyada iyo deegaannada kala duwan ka dhacay soddomeeyadii sano ee la soo dhaafay ayaa dhaawac weyn ugaystay xiriirkii iyo isjacaylkii ummadda, abuurayna is-aamin-daro, colaado, wax-xun-iska-sheeg iyo kala shaki.

### 3.5.4 Tiirka 4aad: Soo-celinta kalsoonida dadweynuhu ay ku qabaan hay'adaha dowladda

MAAHMAAH: "*Ceel ninna waa qodaa, boqolna waa ka waraabtaa.*"

Hanaqaadka dowladnimada Soomaaliya marna suurtagal maahan Illaa dib-u-heshiisiin run ah la helo dadkeenuna si dhab ah u heshiiyo. Dowladnimo shaqaysa, waxay u baahantahay is-aaminaad, wada-lahaansho, wadashaqayn looga baahan yahay dhammaan heerarka iyo qaybaha kala duwan ee bulshada. Sidoo kale, si loo jabiyo soo noqnoqoshada colaadaha, dhab-u-heshiintu waa in ay ka shaqayso heerka ugu hooseeya ee bulshada, kadibna

kor loo wado, oo ay noqoto mid ka bilaabanta qoys, jifo/qabiil, degmo, gobol, Dowlad-goboleed illaa qaran.

Cilmi-baaris la sameeyey waxay sheegaysaa in khilaafyada inta badan lagu xalliyo qaab qabiil kuwaas oo looga faa'iidaysto siyaasadaha is diidan ee ka jira dalka aysanna miro-dhal noqon natiijooyinka kasoo baxaa.

Tani waxay keentay in dhab-u-heshiinta siyaasadeed noqoto mid ay beesha caalamku hagto kaalin weynna ku yeelato hannaanka awood-qeybsiga beelaha Soomaaliyeed ee loo yaqaano 4.5.

Si kastaba ha ahaatee, wadan wuxuu siyaasad ahaan deggan yahay dowladdiisuna si rasmi ah u shaqayn kartaa marka ay midnimo ka jirto qaybaha kala duwan ee bulshada iyo deegaannada ay ku nool.

### 3.4.5 Tiirka 5aad: Xoojinta kasoo-kabashada diifta iyo aafooyinkii colaadaha

MAAHMAAH: *"Nebedaa Naas la Nuugi Leh"*

Waxaa iyaduna u baahan in si dhab ah loo eego, la baaro, isla markaana xal loo helo qaab-dhismeedka bulsho iyo dhaqaale ee sababay in dadka Soomaaliyeed dhibaatooyin daba dheeraaday dhex maraan kuwaas oo kamid ah waxyaabaha keenay is-aaminaad-darrada, colaadaha iyo kala-tagga halakeeyay shacabkeenna.

Casharadii laga bartay qaladaadkii hagidda arrimaha dib-u-heshiisiinta (ugu yaraan labaatankii sano ee ugu dambeeyey), waaxay nabarayaan in hoos laga soo bilaabo qoys-qoys, jifo-jifo, beel-beel, degmo-degmo, gobol-gobol illaa heer federaal.

Waa inay sidoo kale dhaqanka salka ku haysaa iyo sidii ay dadkeennu khilaafkooda u xalisan jireen si shacabka caadiga ahi u dareemaaan lahaansho.

Taladaani waxay soo jeedinaysaa hirgelinta heshiis bulsho oo heer qaran ah ayna Soomaali leedahay, loona diyaariyey inuu jabiyo soo noq-noqoshada, una gogol-xaaro Soomaaliya oo nabad ah, shacabkeeduna is-aaminsan yahay, isjecel yahay hiigsanayana mustaqbal qurux badan oo Soomaaliyeed.

# 4. Gogoldhig

Kadib bur-burkii dowladii dhexe 1991kii ilaa waqtigaan dadka Soomaaliyeed waxay Dhab-u-heshiisiin Qaran u arkaaan tiir mihiim u ah wada noolaanshiyaha bulshada, soo kabashada dowladnimada iyo abuurista nabad waarta. Khilaafaadka noocyada badan leh ee in ka badan sodon (30) sano ka jiray dalka waxay galaafteen nolol, barakiciyeen dad badan, burburiyeen hanti, dhantaaleen dowladnimadii Soomaaliya iyo wadajirkii bulsho.

Ugu yaraan ilaa 19 shir oo lagu qabtay dalka gudihiisa iyo dibadiisa waxay aasaas u noqdeen in la helo qaab-dhismeed siyaasadeed oo laysku waafaqay heshiis awood-qaybsi siyaasadeed ee hay'adaha dowladda oo ku meel gaar ah, qaadashada hannaan federaali ah iyo sameynta Dastuurka ku-meel-gaar ah.

Heshiisyadii siyaasadeed waxay salka u dhigeen nidaam dowladeed sharciyad leh oo Soomaaliya kusoo celiyay masraxa caalamka. Maanta waxaa dhisan hay'adihii dowladda sida Baarlamaanka Federaalka, Garsoorka iyo Fulinta iyo Dowlad Goboleedyo. Waxa kale oo socota dib u unkidda goleyaasha deegaanka oo ah meesha ugu hooseysa qaab-dhismeedka hannaanka federaalka ee ugu dhaw gaarsiinta adeegyada bulshada.

Inta badan shirarkii "dib-u-heshiisiinta Qaran" ee wadanka dibeddiisa ka dhacay waxay xoogga saarayeen dhinaca siyaasadda, in kastoo shirkii magaalada Carta ee dalka Jabuuti sannadkii 2000 ay ku jirtay qayb dib-u-heshiisiin bulsho. Waxaa iyaduna xusid mudan in sannadkii 2007dii shirweyne kale oo dib-u-heshiisiin bulsho magaalo Madaxda dalka ee Muqdisho lagu qabtay kaas oo talooyin badan oo wax-ku-ool ah ka soo baxeen laakiin aan la helin fursad lagu hirgeliyo xaalado amni-daro awgood. Labo sano kadib shirkii dib-u-heshiisiinta ayaa 2009kii waxaa la sameeyey Guddiga Dib-u-heshiisiinta Qaranka kaas oo shaqo badan qabtay welina jira, in kasta oo Dastuurka KMG ah ee sannadkii 2012kii uu tirada iyo magacaba wax ka bedelay balse aan wali la is waafajin.

Sida laga soo xigtay buug ay khubaro nabadda iyo dib-u-heshiisiinta ka qoreen Soomaaliya guulo tiro badan ayaa arrimaha dib-u-heshiisiinta laga gaaray sannadihii u dambeeyey oo ay kamid yihiin samaynta Dastuurka KMG ah, dhisidda dowlad-goboleedyada, xoojinta hay'adaha qaranka, Aqalka Sare iyo si nabdoon oo xukunka loogu kala wareegay 2016/2017.

Inkasta oo meela badan horumar laga gaaray, haddana dalka weli kama dhicin dhab-u-heshiin iyo bogsasho dhaxal-gal ah.

Waxaa badi la qirsan yahy in tabashooyinkii, cadaalad-darrooyinkii, iyo xad-gudubyadii ka dhacay dalka ee ka dhanka ahaa xuquuqda aadanaha balse aan laga wada heshiinin caqabadna ku yihiin in aan ummad ahaan hiigsi la wada leeyahay gaarno.

Ilaa dhab-u-heshiin xaga hoose ilaa xagga sare xiriirsani Soomaali dhex marto dhibku waa taagnaanayaa. Waxaa muhiim ah in ay dhacdo dhab-u-heshiin ballaaran oo soo celisa is-aaminaaddii isla markaana abuurta midnimo iyo kala-maaran la'aan dhab ah oo sababta isku duubni dadweyne. Dib-u-heshiisiintii uu Dastuurka KMG ah ee sannadkii 2012 la sameeyey ku baaqay weli waa qabyo.

Qoraal kasta iyo khudbadaha hoggaamiye kasta oo dowladdu leedahay wuxuu tilmaamayaa in dib-u-heshiin loo baahan yahay balse hore looma samayn siyaasad ama qorshe tilmaamaya dib-u-heshiinta la rabo, taas ayaana keentay in Hannaankan Dhab-u-heshiinta Qaran la dajiyo.

Qodobka 111(i) ee Dastuurka KGR ah ayaa farayaa "in la sameeyo Guddiga Runta iyo Dib-u-heshiisiinta." Si dib-u-heshisiin dhaxalgal ah loo helo.
Guddigu wuxuu ka shaqayn doonaa sidii dadka Soomaaliyeed ay u heli lahayeen hannaan ay uga gudbaan wixii dhexmaray xiliyada qaar walina aan laga dawoobin. taas oo hawsha ugu weyn ee uu qabanayaa tahay "in uu xoojiyo bogsiin qaran, dib-u-heshiin iyo midnimo".

Guddigaas oo madax bannaan waxa loo xilsaaray in uu "dhiirigeliyo iscafinta, dib-u-heshiisiinta iyo midnimada".
Si loo sameeyo guddigan muhiimka u ah arrimaha dib-u-heshisiinta, waxa WAFG&D ay diyaarin doontaa qabye qoraalka sharcigii lagu dhisi lahaa guddiga. Inta hawshaasi socoto, ayaa Hannaanka Dhab-u-heshiinta Qaran waxaa loogu tala galay in uu keeno qaab mideysan oo joogteeya isla markaana xiriiriya hawlaha Dhab-u-heshiinta.

Sidoo kale, dhab-u-heshiintu waxa ay meel weyn kaga jirtaa Qorshaha Horumarinta Qaran ee sannadaha 2016 ilaa 2019 iyada oo lagu tilmaamay laba meelood oo kala ah halbeegyada iyo ahmiyadda.

Sideedda halbeeg ee Qorshaha Qaranka midkiisa koowaad waxa uu tilmaamayaa in la helo “jawi degan, siyaasad furan iyo **dib-u-heshiisiin**”. In Dib-u-heshiisiinta laga dhigo halbeegga koowaad ee qaranku waxa ay tilmaamaysaa mudnaanta ay qaranka u leedahay.

Marka labaad ee Dib-u-heshiisiinta lagu tilmaamay waa in ay tahay ahmiyadda siyaasadda ee labaad waxaana ay u dhigan tahay “in loo dhaqaaqo xaga bulsho muwaadiniintiisu ku nool yihiin amni, dowladda oo gaarta dalka oo dhan, yaraanta qaraxyada argagixisada iyo **dib-u-heshiisiinta** dadka ku noolaa xaaladda colaadeed”.

## 4.1 Waxyaabaha Laga Bartay Isku-dayadii hore ee Dib-u-heshiisiinta

Tan iyo intii dagaallada sokeeye bilowdeen iyo weliba intii ka horaysay ee dhibaatooyinku is biirsanayeen, waxa markasta jiray dedaallo tiro badan oo wax lagaga qabanayey kolba dhibka markaas jiray.

In kastoo marar badan iyo meelo badan dhibaatooyin ka taagnaayeen wax laga qabtay, haddana waxa marag-ma-doon ah in aan lagu guulaysan in markii hore dhibka laga hortagin, markii dambena aan si deg deg ah looga soo kaban. Si wax looga barto gaabisyadii hore u dhacay, waxa halkan hoose lagu soo koobay waxyaalaha loo aanayn karo in ay dhaliyeen ama ka qayb-qaateen guul-darooyinkii ku yimid la-tacaalidda khilaafyada iyo dhab-u-heshiin la’aanta. Qodobadan hoos ku qorani waa kuwo kasoo baxay wadatashiyadii iyo cilmi-baarisyo hore loo sameeyey.

Si ay u koobnaato, waxa loo qaybiyey saddex qaybood oo kala ah:

1) **sababo ka dhashay hab-dhaqanka bulsho**: sida nidaamka dhaqanka oo burburay ama culayskii ka batay, dadka dhibku quseeyo oo aan laga wada qaybgelin, cadaalad-darro baahsanayd, waqti ku filan oo aan la siin jirin, mushkiladdu meesha ay ka imaanayso oo aan la abbaari jirin (dusha laga dhayi jiray), qabyaalad sida dembiyada oo la qabiilaynayey, xalka oo markasta ay wadeen inta xoogga lihi iwm.:

2) **sababo ka dhashay qaab-dhismeedka iyo tarkiibada siyaasadeed ama dhaqan-dhaqaale** sida: hay’adaha wixii lagu heshiiyey fulin lahaa oo maqnaa (sida hay’adaha sharciga ilaaliya), hay’adaha dowladda oo meesha ka maqnaa

ama taag darraa, awoodda oo aan dheelli-tirnayn, dhexdhexaadiyeyaasha iyo cidda wax matalaysay oo aan kalsooni weyn lagu qabin, dib-u-heshiisiinta oo aan xiriirsanayn (sida hannaan la raaco oo aan jirin), dhaqanka iyo diinta Islaamka oo aan kaalin fiican laga siin jirin, nidaamka awood-qaybsiga ee qabiilka ku dhisan, hoggaan xumo iyo isla-xisaabtan la'aan iwm.; iyo

3) **sababo dibedda ka yimid** sida: shirarkii dib-u-heshiisiinta ee hore oo dowlado shisheeye qaban-qaabin jireen oo lagu qaban jiray dalka dibediisa, dano shisheeye oo is hirdiyaya oo lagu dhex waday dib-u-heshiisimaha, argagixisada caalamiga ah, dhibaatada Soomaaliya oo noqotay mushkilad caalami ah lagana fiirinayo dhinaca amniga, khilaafka iyo xalka Soomaaliya oo daneeyeyaal shisheeye ku jiraan.

Intaan ayaa lagu soo koobay laakiin sababaha ka qayb-qaatay dib-u-heshiin la'aanta Soomaalida intan way ka badan yihiin.

Waxa haddaba hoosta laga xariiqay in dhab-u-heshiinta la rabaa noqoto mid ku salaysan ku-cibro-qaadashada waxyaabihii laga bartay kuwii hore.

Hannaankani waxa uu ka faa'iidaysanayaa duruustii iyo cibrooyinkii laga bartay gaabisyadii hore u dhacay.

## 4.2 Sheekada Haanta

Soomaalidu waxay ku maahmaahdaa *"Haani gun bay ka tolantaa." Haanta* tolmadeeda salka hoose ayaa laga soo unkaa kadibna kor ayaa loo soo tolaa inta laga dhameystirayo.

*Haanta* samayteede waxay qaadataa waqti dheer hawl badanna waa la galiyaa. Haanta waxaa si taxader leh u tola haweenka Soomaaliyeed waana shay aad muhiim ugu ah nolosha dadka Soomaaliyeed, dhaqankooda iyo hiddahoodaba waxayna ku dhaansadaan biyaha, ku shubtaan, ku lulaan kuna suuq geystaan caanaha.

Waxaa la yiraahdaa qaybaha haantu ka kooban tahay ayaa sheekeystay. *Haan*ti ayaa tiri, "*Wallee hadii aysan aniga ahayn reer caano ma cabbeen."*
*Haruubkii/ganuunkii* ayaa yiri, "*oo haddaanan anigu kugu aabburneyn ma reer baad caano u geyn lahayd."*

*Ningaxii/lingaxii* ayaa yiri, "*oo haddaanan anigu labadiina idinku cufneyn ma reer baad wax u geyn lahaydeen."*

*Higaaggii* baa isna soo booday oo yiri, "*oo haddaanan anigu isku kiin heyn ma reer baad caano u geyn laheydeen."*

*Saab*kii baa isna yiri, "*oo haddeydaan kulligiin aniga igu dhex jirin mar hore ayaad kala daadan laheydeen reerna wax uma geyseen."*

*Gedaan* ayaa yiri, "*oo saabow haddaanan anigu kugu giraangirneyn waad kala daadan laheyd oo waxba maad heyseen."*

Ugu dambeyntii, *Jilkii* ayaa yiri, "*oo saab iyo geedaanow haddaanan anigu isku kiin heyn itaal maad yeelateen."*

Dulucda sheekadani waxay sheegeysaa in haddii *Haanta* iyo dhamaan qaybaheeda kale aysan isku xirneyn in uusan reerku heleynin biyo iyo caano, subagna iska ilow. Haantu qaybaheeda kala duwani waxa ay ka dhigan yihiin qaybaha kala duwan ee bulshadeenna ama deegaannada kala duwan, biyaha ama caanuhuna waxa ay ka dhigan yihiin dowladnimada ama nolosha. Sidaa darteed dadka Soomaaliyeed (qabiilooyinkooda, qaybaha bulshada ama heerarka dowladdu) waxa aanay u kala maarmin oo isugu baahan yihiin sida qaybaha haantu aanay u kala maarmin.

*Haanta* marka caanaha lagu shubo haweenku waqti badan ayay lulaan oo waxaa ka dhasha subag. Caanaha marka la lulaayo *haruub*ka caanaha ku soo dhaca *haan*ta ayuu dib ugu celiyaa oo wuxuu yiraahdaa *"kugu san"*, haantuna dib ayey haruubka ugu celisaa oo ku tiraahdaa *"kugu san"*. Markaa subagu wuxuu ku dhashaa *"kugu san, kugu san*" oo ay dumarku ku heesaan. Sidaas darteed bay Soomaalidu ku maahmaahdaa *"haani kugu-san bay subagga ku dhashaa".*

***"Waan naqaannaa sida loo tolo haanteenna dillaacday."***
kasoo qaad in ay bulshada Soomaaliyeed tahay haan dillaacday oo marka caanaha lagu shubo haanta dilaacsan ay ka soo daadanayaan. Qubashadaasi waa calaamad u taagan Hay'adaha aan Dawliga Aheyn, barnaamijyada deeq-bixiyayaasha iyo dadaaladda dowladda ee ku shubaya samafalka iyo khayraad bulshada. Muddo ka dib, ma aragno haanti balse waxaan aragnaa khayraadka la qasaariyey.



Deeq bixiyayaasha iyo hay'adaha samafalku waxay diirada saaraan waxyaabaha la galiyey bulshadeenna; waxay ku shubayaan "caano" bulshada iyagoo aan fahan saneyn daloolladeenna, caqabadaha iyo khayraadka ay leeyihiin bulshadu. Caanaha (kheyraadku) ma waxay keenayaan dhibaato dheeraad ah marka ay daataan?

Laakiin hadii haanta (iyo bulshadu) ay helaan nadaam ay ku dhayaan dillaacyadii  waxay hanan karaan wixii lagu shubo. Sidee baan dhaqan ahaan u tolnaa tarrarka haanta?

Haweeney walba oo Soomaaliyeed oo reer miyi/baadiye ah waxay ku dayactiri kartaa haanta xayr/jifi, geed *xarar, asal* iyo culay si ay isugu tosho dillaaca haanta. Haweenku waxay lisaan geela, lo'da iyo ariga. bulshadu waxay u isticmaali karaan haantoodii dib loo tolay caanahooda si ay u quudiyaan caruurtooda iyo bulshada oo dhan. Hadii si kale loo dhigana, iyadoo la isticmaalayo awoodda dhaqanka iyo hiddaha ayaa bulshadu is xoogeyn karaan xalna u heli karaan carqaladaha laga foojignaan karo.

## 4.3 Xaaladda Dalku Maanta ku Sugan Yahay

Soo kabashada iyo jiritaanka Soomaaliya waxaa sabab u ah dadka Soomaaliyeed ee dalka iyo dibeddaba jooga oo u soo dhabar adaygay, marna aan quusan, adkaysi aan la qiyaasi karinna u yeeshay kasoo-kabashada

burburkii Soomaaliya ku dhacay. Waxay dib-u-dhis ku sameeyeen dalka oo dhan cirif ilaa cirif iyaga oo aan marqura hankoodu liicin. Waa dad lagu tilmaamo adkaysi, kalsooni iyo is-gacan-qabasho.

Soomaaliya waxay ku jirtaa xilli ay ka baxday qaran dumey oo ay gaartay qaran soo kabanaya. Illaa sanadkii 2012kii oo ahaa markii ay Dowladda Federaalka Soomaaliya (DFS) ka baxday xaaladdii ku-meel-gaarnimada, waxyaabo badan ayaa qabsoomay oo ay ka mid yihiin: dhismihii Dowlad-goboleedyada oo la dhammaystiray; Qorshaha Horumarinta Qaranka oo la sameeyey; waxaa bilowday soo-kabashada haykalka dowladnimo oo dib loo dhisay, hay'adaha DFS oo soo xoogeysanaya; dhismaha dowladaha hoose oo socda; hay'adaha amniga oo dib loo habeeyey; doorashooyin si nabad ah xukunka la isugu wareejiyey; ciidamo isku dhafan oo la tababaray; sharciga iyo kala-dambaynta oo soo kordhaya maalinba maalinta ka dambaysa.

Soomaaliya dhaqaalaheeda gudaha oo kor u kacay, arrimaha dayn cafiska oo meel wanaagsan maraya kadib markii la xoojiyay la dagaalanka musuq-maasuqa iyo iyada oo la magacaabay Guddiga Dhaqaalaha oo ka kooban khubaro Soomaali iyo ajanabi iskugu jira taas oo kaalin weyn ka qaadanaysa horumarka dhaqaale ee dalka.

Hadda waxaa socda dhaqdhaqaaq badan oo wanaagsan. DFS waxay ku hawlan tahay in ay gudato waajibkeeda ku aadan in ay dalka gaarsiiso doorasho hal-qof iyo hal-cod ah. Waxaa dhismaya xisbiyo siyaasadeed si ay ugu tartamaan doorashada 2020ka. DFS waxaa kale oo ay dajisay qorshe iyadu ay leedahay oo afar tubood ah si horumar la taaban karo loo gaaro muddo kooban gudaheed: Tubta Siyaasadda Loo Dhanyahay, Tubta Amniga iyo Cadaaladda, Tubta Horumarinta Dhaqaalaha, Tubta Horumarinta Bulshada. Waxa iyana aad muhiim u ah in uu socdo barnaamijka Is-xilqaan oo ku salaysan in dadka Soomaaliyeed si is-dirid (iskaa-wax-u-qabso) ah dib ugu dhisanayaan xarumaha ay wada leeyihiin.

## 4.4 Maxaa hadda muhiim ka dhigay Hannaanka Dhab-u-heshiinta Qaran?

Waxaa jira barnaamijyo tira badan oo kala duwan oo la xiriira nabadayn iyo dib-u-heshiisiin oo ka socda deegaanno kala duwan oo dalka ka mid ah, haddana way kala daadsan yihiin mana isla socdaan. Xaqiiqdu waxay tahay in hawlaha faraha badan ee aan isla haysan aysan ka soo bixin wax natiija ah oo

la taaban karaa. Hannaanka Dhab-u-heshiinta Qaran waxaa loogu tala galay in uu keeno qaab mideysan oo joogteeya isla markaana xiriiriya hawlaha dhab-u-heshiinta.

Dib-u-eegista dastuurka oo socota una baahan in qodobbo badan laga gaaro heshiis siyaasadeed sida hannaanka federaalka, awoodaha heerarka dowladda, hannaanka maaliyadeed, hannaanka cadaaladda iyo asluubta, hannaanka dowliga ah, qaab-dhismeedka dowladda, la haanshiyaha, maamulidda iyo qaybsiga khayraadka, maqaamka caasimaddda Muqdisho, dhisiddda ciidamada qalabka sida, iwm. Qorshe lagu gaarsiinayo dalka doorasho hal-qof iyo hal-cod ah oo socda iyo hagaajinta dowlad-wanaagga ayaa ka dhigaya Dhab-u-heshiinta Qaran in ay ku haboon tahay waqtigan.

Shirarkii wadatashiga Hannaanka Dhab-u-heshiinta Qaran waxaa ka soo baxay in ay dadkeennu u ooman yihiin Dhab-u-Heshiin kana daaleen khilaaf iyo kala maqnaan. Dadka Soomaaliyeed waxay sugayaan dhab-u-heshiin run ah oo loo dhan yahay gaar ahaan mid ay ku jiraan haweenka, dhalinyarada iyo dadka la hayb-sooco taas oo bogsiisa qalbiyada dadka weli la tiiraanyeysan dhibkii dhacay iyo daqaradii khilaafku reebay. Dhab-u-heshiintu waa in ay noqoto mid Soomaali isku tashato oo ay iyagu iska leeyihiin.

Wadatashiyadii la sameeyey, waxay dadku soo jeediyeen in ay dhacdo dhab-u-heshiin run ah oo dadka Soomaaliyeed iyagu heshiiyaan oo yeeshaan heshiis-bulsho laguna saleeyo dhaqanka Soomaaliyeed iyo diinta islaamka ee suuban.

Qaab ahaan, waxaa laga dhawaajiyey in laga soo bilaabo hoos oo kor loo wado (xaafadaha, tuulooyinka, degmooyinka, gobollada, kadibna mid qaran). In laga hadlo wixii dhacay, garowshiiyo la helo, la kala garqaato oo la isku qiro dhibkii dhacay, kadibna la is cafiyo, lana isu celiyo hantida ma-guurtada ah ee la kala haysto.

Waxaa kale oo loo baahan yahay kasoo-kabasho dhaqaale si ay nabaddu u xasisho oo ay ku jirto in deegaanka la nooleeyo si loo hakiyo khilaafka iyo iska hor-imaanshaha ku saleysan daaqa, iyo soo noqnoqodka abaaraha ba’an ee ka dhaca dalka. Dadkeenna oo u baahan una bisil in ay samaystaan aragti midaysan si ay u wada yeeshaan mustaqbal wanaagsan oo ay nabad ku wada noolaadaan, dariskoodana nabad kula noolaadaan.

## 4.5 Dulucda Dhibaatada

Soomaaliya waa dal ka soo kabanaya dagaal sokeeye oo daba dheeraaday oo soo jiitamayey muddo dheer. Colaadaha wadanka ka dhacay waxay soo mareen marxalado kala duwan oo isugu jira kuwo ka dhashay daaqsin, biyo, deegaan, isku qabsi ilodhaqaale, qabiil, siyaasad, iyo kuwa diimeedba kuwaas oo saamayn xun ku yeeshay xiriirka iyo midnimada ummadda Soomaaliyeed.

Dastuurka KMG ah oo aan si cad u qeexaynin awoodaha madaxda sare, awoodaha Dowladda Federaalka Soomaaliya (DFS) iyo Dowlad-goboleedyada (DG) iyo qaybsiga kheyraadka dalka, iyo Maxkamadda Dastuurka oo aan dhisnayn ayaa keenay isku dhacyo siyaasadeed oo DFS iyo Dowlad-goboleedyada iyo mararka qaar DFS dhexdeeda.

Hay'adihii dowladda oo ay ka mid yihiin garsoorka iyo cadaaladda oo aan wali xoogganeyn ayaan awood u lahayn in ay si sharciga waafaqsan oo cadaalad ah u kala saaraan dhibbanayaasha iyo dambiilayaasha amaba aan awoodin in ay kala saaraan muranka iyo khilaafaadka dastuuriga ah, iyo in ay u adeegaan bulshada.

Caqabadaha kale ee wadanka horyaalla waxaa ka mid ah tan amniga oo aan sugnayn gaar ahaan xag-jirnimada oo wali la-dagaalankeedu socdo iyo hubka oo wali ku jira gacmaha shacabka. Sidoo kale, Soomaaliya waxay wali qayb ahaan ku tiirsan tahay ciidamo shisheeye in ay wax ka sugaan amniga meelaha muhiimka ah ee dalka. Waxaa kale oo colaadaha huriya qaar ka mid ah daneeyayaasha shisheeyaha oo dano iska hor imaanaya ka leh Soomaaliya, ama faa'iido ku qaba in dagaalku sii socdo.

## 4.6 Mabaadii'da Aasaasiga

*"Talo Mar Kuu Toostaa, Tagoogga Ilmaha Ku Jiray Tabantaabisaa!"*

### 4.6.1 Hannaan loo dhan yahay oo la wada leeyahay

HDQ waa nidaam Soomaalidu iska leedahay oo dowladda Soomaaliya hindisihiisa iyo hirgelintiisaba lahayd, khubaro Soomaaliyeed diyaarisay iyaga oo kaashanaya xeel-dheerayaal caalami ah. Waa Hannaan heshiis lagu yahay laguna dhisay wadatashiyo iyo xog-uruurin dadka Soomaaliyeed laga soo uruuriyey. Waxaa uu bud-dhige iyo hage u yahay hawlaha dhab-u-heshiinta ee laga qabanayo dalka gudihiisa. Waxaa ku shaqaynaya oo hawlahooda uu hagayaa deeq-bixiyeyaasha, hay'adaha Qaramada Midoobay, hay'adaha caalamiga ah iyo kuwa maxaliga ah ee raba in ay dhab-u-heshiinta wax ka qabtaan.

### 4.6.2 Is-xilqaan iyo isku-tashi shacab si ay u dedejiyaan soo-kabashada

Waa lama huraan in Soomaalidu yeeshaan oo hagaan ajendaha bogsashadooda, nabaddooda iyo dhab-u-heshiintooda. Haddaba, hannaankani wuxuu saldhig u yahay is-xilqaan iyo isku-tashi.

Sida ku cadaatay wadatashiyadii dadka Soomaaliyeed lala yeeshay, waxaa xaqiiq ah in dhab-u-heshiintu tahay mid u baahan in daacad laga noqdo oo maal, maskax iyo muruq Soomaaliyeed lagu bixiyo si looga dhabeeyo. Hirgelintiisa waxaa iska leh dadka Soomaaliyeed oo ay matalayaan Dowladda Federaalka iyo Dowalad-goboleedyada.

### 4.6.3 Xaqiijinta wadaagga, ka qaybgalka, iyo isla xisaabtan si loo hubsado in deegaannada iyo dhammaan bulshada qaybaheeda kala duwani qayb ka yihiin



Sida xikmadda haantu tilmaantay, Hannaankani waa mid hubinaya in loo dhammaado cid kastaana ka qaybqaadato. Waa Hannaan tixgelinaya qaybaha kala duwan ee bulshada iyo deegaannada kala duwan ee ay ka soo jeedaan, laga soo bilaabo heer qaran, heer Dowlad-goboleed, heer degmo, heer tuulo ilaa iyo xaafadaha/dariska. Sidoo kale waxa uu HDQ tixgelinayaa kala-duwanaanshaha dhaqan-dhaqaale ee bulshada sida beeraleyda, xoolaleyda, xeebleyda iyo reer-magaalka. Taariikh ahaan, bulshada Soomaaliyeed waa dad siman, furfuran oo xoogga saara go’aan wadareed loo dhan yahay.

Hase ahaatee, sannado badan oo dagaal sokeeye lagu jiray ayaa waxyeeleeyey dhaqankii iyo adkeysigii muhiimka ahaa ee ay dadkeenu lahayeen, laakiin waxaa jira fursado isa soo taraya oo ah in laga soo kabto, korna loo qaado awoodda iyo adkeysigaas bulsho. Bulsho dhamaystirani waxay u baahan tahay in ay ka faa'iideysato quwaddeeda iyo kartida qaybaha kala duwan ee bulshada, kana jawaabto baahida ay qabto koox walba.

Taasi waa sababta loogu baahan yahay matalaad qaybaha kala duwan ee bulshada (rag, dumar, dhalinyaro, culuimo, madax-dhaqameed, naafada iwm) sidaas ayaana loogu qaabeeyey hawlaha HDQ. Hadii koox ka mid ah laga tago ama aysan si macna leh uga qayb qaadanayn, bulshadu ma gaarayso meesha ay tiigsanayso, waxaana khasaaraya khayraadka, dadkuna wax bay tabanayaan. Ka-qayb-qaadashadu waxay xoojinaysaa lahaanshaha waxayna dhaxal-gal ka dhigaysaa miraha dhab-u-heshiinta. Waa in mudnaan dhab ah la siiyo dadkii inta badan dulmanaa ee xaqooda la duudsiyi jiray go'aamadana aan wax ku lahaan jirin. Haweenka iyo dhallinyaraduna waa in ay hormuud ka noqdaan dhab-u-heshiinta oo aysan marti ka noqonin.

### 4.6.4 Taabbagelinta Daah-furnaanta iyo Mas'uuliyadda

Waa Hannaan daah-furan oo cid kasta u adeegaya cid gaar ahna aysan iska lahayn. Soomaalidu waxay dhaqan u laheyd in aan nabadda la kala lahayn, runta ayaa la isu sheegi jiray, isla-xisaabtan ayaana jiri jiray. Wax-wada-lahaanshaha iyo daah-furnaantu waxay ka mid yihiin mabaadii'da diinta Islaamka. "*Waayeel hortiis baa caano lagu barxaa*", "*Wax la qariyana qurun baa ku jira*" ayey Soomaalidu tiraahdaa. Sidaa darteed, waa in dhab-u-heshiintu noqoto mid miro-dhal ah, daah-furan oo aan cidna u gaar ahayn. "*Xalaal iftiin baa la qashaa*". Wixii la wada leeyahay waxaa ka dhasha in la wada ilaashado oo lexejeclo laga yeesho. "*Kaligii wadow, kaligaa celceli*", bay Soomaalidu ku maahmaahdaa.

### 4.6.5 Hannaan Dhab-u-heshiin Qaran oo aan siyaasadaysnayn cidna u gaar ahayn

Hawlaha dhab-u-heshiintu waa kuwo ujeeddooyinkoodu yihiin in ay abuuraan ruux iyo jawi dadka mideeya oo laga wada faa'iidaysto. Waa muhiim in hawsha dhab-u-heshiintu tahay mid aan cidna u xaglinaynin siyaasadna ka caagan. Qof kasta oo muwaadin ah waa in uu ka qayb qaadan karo, iyada oo aan loo fiirinaynin meesha uu ka soo jeedo, cidda uu yahay iyo kooxda uu ka tirsan yahay. Waa in mudnaanta la siiyo ka-qayb ahaanshaha, wadajirka iyo in

loo dhan yahay. Hawlaha dhab-u-heshiintu waa in ay ka caaganaadaan in siyaasad gaar ah loo adeegsado, waa in ay *dhab*-u-heshiin noqdaan.

**4.6.6 Hannaan xoojinaya in Dhab-u-heshiintu noqoto sal iyo baar, waaqiyi, kana turjumaysa duruustii laga bartay dhibkii la soo maray**

Geedi-socodka nabadaynta iyo dhab-u-heshiintu waxay u baahan yihiin in laga soo bilaabo meesha ugu hoosaysa iyada oo la aaminayo in dadka colaadda ku jiraa ay hayaan xalka nabadda. Wadatashiyadii la sameeyey waxay gundhig u noqdeen hannaankaan. Waxaa jira waxyaabo badan oo laga bartay lana diiwaangaliyey oo lagu ururiyey hannaankan (ka fiiri kor).

**4.6.7 Hannaan abuuraya wada-shaqayn xiriirsan, beeraya is-aaminaad oo xoojinaya wixii lagu midaysan yahay**

In la sameeyo wada-ogolaansho aad ayey muhiim u tahay si loo hubiyo in aan qaybaha bulshada qaar laga reebin geedi-socodka dhab-u-heshiinta qaran oo aysan dareemin in laga tagay oo aysan sidaa awgeed u noqonin qas-wadayaal. Sidaas darteed, hawlaha hannaankaan ma aha in ay abuuraan khilaaf bulshada dhexdeeda ah oo ay sabab u noqdaan colaado iyo is-fahan-waa hor leh.

# 5. Qaababka Maamulka

Hannaankaan wuxuu ku astaysan yahay lix sano oo u qaybsan laba qaybood oo mid walba 3 sano yahay. Wuxuu dejinayaa istraatiijiyadda ama jihaynta hawlaha la qabanayo wajiga koowaad ee dhaqan-galka Hannaanka Dhab-u-heshiinta Qaran, iyada oo la tixgelinayo marxaladda nuglaanshaha ee dalku ku sugan yahay. Wajiga labaad waxaa la dajinayaa sanadka saddexaad kadib, marka qiimeyn lagu sameeyo wixii qaybta hore ka qabsoomay.

## 5.1 Mas'uuliyadaha iyo Kala-qaybsashada Hawlaha

### 5.1.1 WAGF&D

WAGF&D ayaa dowladda uga masuul ah dhammaan arrimaha dib-u-heshiisiinta dalka, iyada oo la shaqaynaysa hay'adaha kala duwan ee heerarka dowladda ee u igman nabadaynta iyo xasilinta dalka, culumada, dhaqanka iyo ururrada bulshada. Kaalinteedu waa in ay hagto oo dejiso hannaanka lagu shaqaynayo ee lagu xajiinayo Dhab-u-heshiinta Qaran, si loo helo shaqo isla socota oo dalka ku baahsan. Sidoo kale, waxay Wasaaraddu mas'uul ka tahay xiriirinta heer qaran; dejinta qaab lagu kormeero HDQ hawlihiisa si loo hubiyo in lagu dhaqmayo hannaanka shaqo; in ay dhaqaale u raadiso isla markaana u

dhisto aragti midaysan oo dowlad-goboleedyada ku wada socdaan, si loo xaqiijiyo hawlaha wadanka ka socdaa in ay yihiin kuwii saxda ahaa.

Sidoo kale, WAGF&D kaalinteedu waa in ay beesha caalamka kala shaqayso in ay dhaqaale u helaan degmooyinka ahmiyadda la siiyey si deganaanshaha siyaasadeed iyo midka amni loo xaqiijiyo. Islamarkaana loo xiriiriyo hawlaha xasilinta, dhab-u-heshiinta iyo kasoo-kabashada dhaqaale, looguna xiriiriyo adkaynta nidaamka dowladnimo iyo u-adeegga shacabka.

### 5.1.2 Wasaaradaha Arrimaha Gudaha/Dib-u-heshiisiinta Dowlad-goboleedyada

Dhanka kale, Wasaaradaha Arrimaha Gudaha iyo Dib-u-heshiisiinta ee Dowlad-goboleedyada ma'suuliyadoodu waa in ay ka hirgeliyaan qorshahaan deegaannadooda. Waxay ka mas'uul yihiin hirgelinta dhab-u-heshiinta ee deegaannadooda. WAGF&D ayaa u fidinaysa dhaqaale, khibradda iyo farsamada ay u baahan yihiin si ay u xaqiijiyaan hawlahooda laga bilaabo sannadka koowaad ee Hannaankan (2019). Waxaa kale oo heer Dowlad-goboleed looga baahandoonaa la-taliyeyaal u qaabilsan fulinta, kormeeridda, qiimeynta iyo wacyigelinta warbaahinta.

WAGF&D waxay noqonaysaa awoodda gadaal ka riixaysa isla markaana isku xireysa hawlaha dhaqan-gelinta hannaanka. Qaybta shaqo ee ugu muhiimsan waa in ay isku xirayso siyaasadda hannaanka ee la dejiyey iyo shaqada laga qabanayo heer federaal, dowlad-goboleed, goboleed iyo degmo.

### 5.1.3 Fududeeyayaasha (Hay'adaha)

Isaga oo kaalmo ka helaya beesha caalamka, HDQ wuxuu la shaqaynayaa hay'adaha waddaniga ah iyo kuwa caalamiga ah ee khibradda u leh hawlaha Dhab-u-heshiinta si qaybaha ka midka ah qorshahaan loo fuliyo. Waxay si wada jira iskula fulin doonaan hawlaha la isla garto ee qaybaha barnaamijkaan HDQ.

### 5.1.4 Habraaca Hawlaha

Habraaca Hawluhu (HH) waa qayb aasaas ah oo ka mid ah HDQ kaas oo dejinaya qaabka ugu haboon ee loo hirgelin karo hawlaha Dhab-u-heshiinta. Wuxuu Habraacu xaqiijinayaa in dadka ku hawlan shaqooyinka dhab-u-heshiinta ee meelo kala duwan joogaa ay raacayaan hal nidaam oo aan iska hor imanaynin oo isla jaanqaadaya. Sida kor lagu xusay hawlahaas waa in ay jirto cid xaqiijinaysa oo lagu og yahay, kuwaas oo hagaya sida hawluhu u soconayaan.

### 5.1.5 Hab Loo Dhanyahay

Iyada oo laga hortagayo sidii caadadu ahayd in dadka qaar laga tago marka nabadda laga shaqaynayo, hannaankani wuxuu u dhisan yahay qaab loo dhan yahay oo aan cidna laga xigsanaynin hawlaha dhab-u-heshiinta.

Waxaa hannaankani ku dhisan yahay in dhalinyarada, haweenka, dadka la hayb-sooco, kuwa naafada ah iyo dhammaan qaybaha bulshadu ka qaybqaataan hawlaha dhab-u-heshiinta. Weliba, maadaama ay haweenku yihiin kuwii colaaddu dhibka ugu badan gaarsiisay, dhalinyarduna yihiin mustaqbalka ummadda, waxaa waajib noqonaysa in kaalin hoggaamineed ay ku yeeshaan haweenka iyo dhalinyaradu hawlaha dhab-u-heshiinta, heer kasta iyo qayb kasta.

## 5.2 Kormeerka iyo Qiimaynta

WAGF&D ayaa abuuraysa hab Kormeer iyo Qiimeyn (K&Q) lagu sameeyo wajiga koowaad ee HDQ, buug yar oo ay ku dhanyihiin qaabka loo samaynayo kormeerka iyo qiimeynta, waxyaabaha laga rabo K&Q iyo hawlaha dhammaan wax-ka-qabashada arrimaha HDQ.

Waxqabadka qorshaha waxaa lagu qiimeyndoonaa miraha hannaanka ee isaga oo faahfaahsan la dajindoono, kaas oo yeelanaya tilmaameyaal lagu ogaanayo tayada wax-qabad. Mid kasta oo ka mid ah hay'adaha ka shaqaynaya waxaa looga baahandoonaa warbixin qaab la raaco leh si xogta iyo halbeegyada la isugu gayn karo, si markaas si fudud loo ogaan karo wixii qabsoomay.

Xog-uruurin markasta la heli karo (on-line) ayaa la samayn doonaa taas oo wax ka taraysa qaybaha kala duwan ee qorshaha. Cid kasta oo ka shaqaynaysa hawlaha dhab-u-heshiinta waxaa lagu qasbayaa in ay xogta ku guraan meelaha loo asteeyey, si WAGF&D iyo Wasaaradaha Dowlad-goboleedaduba si joogto ah u kormeeraan hawlaha socda.

# 6. Tiirarka Dhab-u-heshiinta Qaran

Hannaankaan waxaa uu la jaan-qaadayaa qorshayaasha qaran ee horumarka dalka u degsan sida shanta tiir ee Barnaamijka Horumarinta iyo Dib-u-dhiska Soomaaliya ee loo soo gaabiyo (SDRF)[5]. Wuxuu sidoo kale ku cad yahay halbeegga 1aad iyo hortabinta Qorshaha Horumarinta Qaranka (NDP)[3]. Waxa kale oo uu ku jiraa Tubta Siyaasadda Loo Dhan yahaya ee xukuumadda. Dib-u-

[3] Tiir ee Siyaasadda loo dhanyahay waa: Amniga; Dib-u-dhiska dhaqaalaha; adkaysiga, dib-u-usookabashada iyo Gargaarka; jinsiga iyo Xuquuqul Insaanka

heshiisiintu qorshaha Cadaaladda iyo Nabadda ee Aragtida 2030. Sidoo kale HDQ wuxuu toos ula xiriirsan yahay *16ka Yool ee Himilada Horumarin Waarta (HHW)*, khaas ahaan qaybta xoojinaysa nabadda iyo, horumarka loo dhan yahay, fidinta cadaaladda iyo isla-xisaabtanka”[4] Sidoo kale Hannaankaan wuxuu hawlaha nabadda iyo dhab-u-heshiinta gacanta u soo galinayaa dowladda, isaga oo siinaya kaalin hoggaamineed, kana soo wareejinaya hay’adaha iyo deeq bixiyeyaasha oo inta badan iyagu wadi jiray.

Dhammaan qaybaha hore waxay gogol-xaar u yihiin hawlaha dhab-u-heshiinta iyaga oo dhinacyo badan ka kala-tusaalaynaya. Mid kasta oo ka mid ah 5ta tiir ee soo socda wuxuu toos u abbaarayaa qayb ka mid ah Dhab-u-heshiinta.

Iyada oo sidii aan soo sheegnay dhab-u-heshiintu tahay mid waqti dheer u baahan dhinacyo badanna taabanaysa, ayey shantaan tiir soo koobayaan hawlaha ugu mudan ee lagu xaqiijin karo dhab-u-heshiin waarta oo dadka Soomaaliyeed dhex marta. Waa shan tiir oo xiriirsan, is-xoojinaya oo midba kuwa kale dhinacyo badan ka soo galayo.

**Tiirka 1aad**: **Aragtida Isbeddelka cusub ee nabadda iyo dhab-u-heshiinta** (Abuurid mustaqbal la wada leeyahay, himilo iyo hiigsi ummadeed)

**Tiirka 2aad:** Ka heshiinta wixii dadka Soomaaliyeed dhex maray

**Tiirka 3aad**: Soo-celinta xiriirkii wanaagsanaa iyo is-aaminaaddii colaaddu dhaawacday

**Tiirka 4aad**: Soo-celinta kalsoonida dadweynuhu ay ku qabaan hay’adaha dowladda

**Tiirka 5aad:** Xoojinta kasoo-kabashada diifta iyo aafooyinkii colaadaha

[4] https://sustainabledevelopment.un.org/sdg16

## 6.1 Noocyada Dhab-u-heshiinta

Qaab-dhismeedka dhaqaale iyo midka bulsho oo ka mid ahaa waxyaabihii horseeday burburkii, colaadda iyo kala tagga umadda waa in si cad loo qeexo, si wax looga qabto, wax-ka-badal loogu sameeyo, dibna loo Qaabeeyo.

Waxyaabaha aan ka baranay dib-u-heshiisiinta shan iyo labaatankii (25) sano ee la soo dhaafay, waxay tilmaamayaan in la gaaray waqtigii dhab-u-heshiinta dib loogu celin lahaa bulshada, loogana soo bilaabilahaa hoos - tuulada, degmada, gobolka ilaa heer qaranna loo soo gaarsiin lahaa.

HDQ wuxuu qeexayaa in dhab-u-heshiintu noqoto mid bulshado oo ay Soomaali leedahay, Soomaalina hoggaamiso si loo jabiyo soo noqnoqoshada colaadda, looguna gogol-xaaro dadkeenna iyo dalkeenna oo hela nabad waarta iyo mustaqbal qurux badan.

Shantaas tiir waxay tilmaamayaan **saddex nooc oo Dhab-u-heshiisiineed** oo ka soo baxay wadatashiyadii. Saddexdaa nooc ee dhab-u-heshiineed waxay kala yihiin **siyaasadda, bulshada iyo diinta**.

1) **Dhab-u-heshiinta siyaasadeed** (la xiriira awood-qaybsiga, metalaadda, xiriirka heerarka dowladda (DFS iyo Dowlad-goboleedyada), hannaanka federaalaynta, maamul-daadajinta, la haanshiyaha, maamullida iyo qaybsiga khayraadka, iyo arrimaha qabyetirka dastuurka iwm);

2) **Dhab-u-heshiin bulsho** (waxaa ka mid ah xummaan la kala tirsanayo, deegaanno la isku haysto, waxyaabihii dadka dhex maray oo u baahan in meel la isla dhigo, kala-shaki, is-aaminaad yaraan, ficiltan, tartan, colaado taagan, burburka ku yimid dhaqanka sida ugaas-bararka/suldaan-bararka, xiriirka qabiilka iyo qaranka;

3) **Dhab-u-heshiinta diimeed** arrimaheeda waxaa ka mid ah fikradaha kala fog ee firqooyinka/kooxaha, dagaalka xag-jirnimada, xiriirka u dhexeeya ururro-diimeedka iyo dowladda, xaaladda diinta iyo garsoorka. Noocyada dhab-u-heshiineed way xiriirsan yihiin, iskuna xiran yihiin.

## 6.2 Tiirka 1aad: Aragtida Isbeddelka cusub ee nabadda iyo dhab-u-heshiinta (Abuurid mustaqbal la wada leeyahay, himilo iyo hiigsi ummadeed)

*"Ninkii Xoolo Alle la damco dadkeeddaa Alle siiyaa"*
*"Tol aan xeer lahayn waa xoolo aan xero lahayn" "tol xeer leh ma faqriyo"*

**Sheeko: Xeer Ciise**
Xeerka Ciisaha waxaa loo fariistay qarnigii 16aad dhexdiisa isla qarnigaa dabayaaqadiisiina waa la dhammaystiray dejintiisa. Xeerka Ciise wuxuu ahaa tan iyo waagaa la dejiyey mid fac-ba fac isku soo gudbinayeen ilaa maanta. Marka la eego xeer degsan oo leh raad-raac taariikheed waa kan geeska Africa ugu fac weyn. Taariikh-yahannadu waxay qirsan yihiin in sababta ugu weyn ee Ciisuhu xeerkan u dajiyey tahay dagaallo dhexdooda ahaa. Way is dagaaleen waxaana ka dhashay is-aaminaad-darro.

Si ay u kala badbaadaan, waxay aqoonsadeen muhiimadda uu leeyahay heshiis bulsho. Waxyaabaha uu falanqaynayo Xeerku waa dhammaan qaybaha nolosha dadka, deegaanka iyo duunyadaba. Waa mid kala hagaya Ismaan-dhaafka Ciisaha isla markaana qeexaya xiriirka Ciisaha iyo beelaha ku hareeraysan. Xeerkani waa heshiis bulsho oo u horseeday in ay ku wada noolaadaan nabad iyo barwaaqo, colaadihiina ay kaga joogsadeen. Waxaa xeerkaani uu Ciisaha u abuuray una cusboonaysiiyey xiriirkii dhexdooda wuxuuna u abuuray hiigsi iyo hammi ummadeed oo ay wada leeyihiin.

Waxaa keenay in Ciisuhu degsado xeerkaan laba baahiyood: beesha Ciise oo aabahood kula dardaarmay "haddaad boqol gaartaan boqor iyo xeer idin kala saara samaysta," iyo colaado beelaha deriska ah ee Canfarta iyo Oromada uga imaanayey, iyo hariimooyinkii dagaalkii Xabashida iyo Axmed Gurey. Hase ahaatee, dadka taariikhda xirribta u leh waxay sheegaan in Ciisaha laftiisu kala daatay oo colloobay.

Xeerka Ciise Waxa uu ka Kooban yahay;
1. Lix (6) Kabood
2. Boqol iyo lixdan Dhagalay (160)
3. Saddex boqol iyo lix iyo Soddon (336) Sarood
4. Afar boqol iyo Afar iyo Afartan (444) Indhal

Lixda Kabood waxa ay kala yihiin: dhiig, dhaqan, dhaqaqaal, dheer, dhul, iyo dhibleh.

Hal tusaale haddii aan u soo qaadano kabta dhiigga oo dhaawacu ka mid yahay: Haddii qofka farahiisa dhaawac gaaro isku mag ma ahan. Far walba tan ay ka muhiimsan tahay oo ka wax tarsan tahay way ka mag badan tahay, sida suulka ay uga mag badan tahay faryareeydu.

**Aragtida Isbeddelka Tiirka 1aad**

**Haddii** la dhiirigaliyo olole qaran oo ku aadan bogsiin,, nabad iyo dhab-u-heshiin iyada oo la isticmaalayo warbaahinta, farshaxanka, fanka iyo hiddaha dhaqanka Soomaaliyeed iyo mabaadii'da diinteenna macaan iyo dhiirigalinteeda, waxay dhalayaan wacyigelin qaran oo ku aadan aragti la wada-leeyahay oo dadka ka dhaxaysa, **sidaa darteed,** geedisocodka "dhab"-u-heshiintu waxay aqoonsanaysaa oo saxaysaa cadaalad-darrooyinkii dhacay iyo waxa la kala tirsanayo, waxay taageeraysaa nabad waarta, waxay sameynaysaa horumar waara, waxay cusbooneysiinaysaa dareen midnimo qaran, waxayna keenaysaa in lagu faraxsanaado Soomaalinimadda.

**Hordhaca Tiirka 1aad**

Maadaama aysan dadkeennu kala maarmin ayna yihiin dad walaalo ah waa in ay si nabad iyo cadaalad ku dhisan ku wada noolaadaan si ay u gaaraan danta guud ee mustaqbal wanaagsan oo ay ummaddu wada leedahay. Markaa, su'aasha isweydiinta mudani waa "sidee loo abuuri karaa aragti fog oo mustaqbal qurxoon leh bulshada Soomaaliyeedna wada aaminsan tahay?"

Abuuridda aragtidaas qurxoon ee wadaagga ah mustqbal qurxoonna noo horseeddaa, waxay u baahan tahay in ay bulshada qaybaheeda iyo heerarkeeda kala duwaniba qayb ka yihiin si ay dhaxal-gal u noqoto. Inkasta oo dadku fikirka siyaasadeed ku kala duwanaan karo, haddana waa muhiim in la aamino in aragtidaas fog ee wadaagga ah, kala maaran-la'aanta bulshadeenna, cadliga, iyo eex-la'aanta bulshada dhexdeeda in ay dhammaan arrimahaasi lagama maarmaan u yihiin dhaqangalka dhab-u-heshiinta.

Tiirkan nuxurkiisu waa abuuridda dhaqanka ku salaysan iskaashi iyo in ay bulshadu meel uga soo wada jeedsato dadaalka loogu jiro dhab-u-heshiinta dhanka bulshada, diinta iyo siyaasadda, sida:

- In la abuuro is ogolaansho iyo in cidkastaa aqbalo isla noolaanshaha iyo daris-wanaagga;

- Dhiirigelinta is fahanka bulshada; iyo

- Fahanka iyo garowsiga in aan Soomaali kala maarmin oo is huran tahay

**Ujeeddada 1aad**
In la abuuro abaabul olole qaran oo dhab-u-heshiisiineed kaas oo horseedaya midnimo ummadeed iyo mustaqbal lagu midaysan yahay iyada oo la adeegsanayo dhaqanka iyo diinta.

**Natiijada 1aad**

1. Muwaadiniinta Soomaaliyeed oo dib u hela qabkii Soomaalinimo iyo in ay qayb ka yihiin arrimaha geedi-socodka Dhab-u-heshiinta, bogsiinta qaran iyo dib-u-dhiska dalka.

2. Dareen rajo iyo yididiilo laga abuuray dalka qaybihiisa oo dhan.

## 6.3 Tiirka 2aad: Ka heshiinta wixii dadka Soomaaliyeed dhex maray

*"Nabar Walaal, Duugmaa u Dambaysa."*
*"Soohin (sohdin) wareertay hawaraa loo celinaa"*

**Aragtida Isbedelka 2aad**
**HADDII** la kobciyo dib u cusbooneynsiinta is-aaminaada, is-dhexgalka bulshada, iyo ka bogsooshada wixii dadka hore u dhexmaray, **KADIBNA** dadka deegaanka oo tiiraanyada/cabsidu ku jirto oo ay ku qufulan yihiin is-aamin daro ayaa laga caawinayaa in ay ka bogsoodaan nabaradii xanuunka badnaa ee hore ama kuwa hadda, **SIDAA DARAADEED**, hagaajinta is-dhexgalka iyo is-aaminaada dadka kala qaybsan iyo dadka deegaanka, bedelaada dad la dhaqanka iyo dabeecadda qalafsan, isbedelka shaqsiga, iyo dib-u-soo-nooleynta xiriirad.

**Gabay**

*Wallee ama rafiiqdoo sidii, Raxan walaalowde*

*Ama rash idin tiri bawdadaan, laga rukuucaynin*

*Rufucii tol kala gala haddii, layska wada raadsho*

*Haddeydaan sidii yacay ruqsamin, dhagaxa ii raabi*

Abwaan Raage Ugaas (AHN)

**Hordhaca Tiirka 2aad**

Mid ka mid ah waxyaalaha ugu waaweyn ee hor yimaadda bulsho burburtay marka ay soo kabanayso waa sidii meel loogu tiirin lahaa dhibkii dhex maray si uu u soo noqdo xiriirkii bulsho ee burburay. Bulshada ay colaaddu ku habsatay, dhibkii dhacay oo aan la laga wada xaajoon ayaa inta badan ka daboola muhiimadda ay leedahay in la sameeyo dib-u-dhis bulsho iyo nidaam si loo sugo nabadda iyo wadajirka. Wadahadalka dadku xudunta u yahay iyo hawlaha dhab-u-heshiintu waa daruuri. Sidaas darteed, fursado dhab-u-heshiin ah waa in laga furaa oo la adkeeyaa min tuulo, degmo, gobol ilaa heer qaran.

***Sheeko: "La noolaanshaha dembiga iyo xanuunka maalin walba"***

Horaantii sanadihii dagaalka sokeeyey, habeen habeenada ka mid ah ayaa Maxamed oo gurigoodii u socda ayaa niman hubaysani jidka u galeen si daranna u dhaawaceen. Intuusan madaxaba kor u waadin, ayaa waxaa u soo muuqday saaxiibkiis ay isku dheeraayeen kaas oo isla markiiba ula cararay isbitaalka badbaadiyeyna naftiisa. Saaxiibkiis wuxuu muddo 25 sano ah dhiniciisa fadhiyey waxkastana u qabanayey Maxamed oo ay xabaddii haleeshay curyaamisay.

Labdooduba waxay imaanjireen casharada bogsiinta bulsho ee goobo kala duwan lagu qaban jiray. Maalin maalmaha ka mid ah ayaa Maxamed ka sheekeeyey dhacdadii qabsatay iyo xanuunka ay weli ku hayso, "ma garanayo cidda dhibkaan ii geysatay, laakiin waan iska cafiyey si aan horey uga socdo" ayuu yiri. Cabdi oo oohin isla celin waayey ayaa ku yiri "Waxaan rabaa in aan qirto maanta, 25 sano ka hor in aan ka mid ahaa kooxdii hubaysneyd ee habeenkaas, aniguna aan ahaa kii xabadda kugu dhuftay anoon garaneyn in aad adiga tahay. Mar allaale iyo markaan gartay in aad adigatahay, ayaan inta afduubkii iska furay oo soo orday aan ku caawiyey. Maalin kasta oo ka mid ah

25kii sano, waan kula dareemayey ciilka iyo xanuunka. Maalin kastana waxaan isku dayayey in aan waxaan ka qaban karo si ka wanaagsan uga qabto. Waxaan Kaa codsanayayaa in aad i cafiso si aniguna dib-ugu noolaado. fadlan i cafi.”

**Ujeeddada Tiirka 2aad**

In waxyaabihii dadka Soomaaliyeed dhex maray waqtiyadii kala duwanaa ee dhibka keenay laga wada xaajoodo, si looga bogsado oo looga gudbo, loona soo celiyo is-aaminaadii, kalsoonidii iyo midnimadii dhex oolli jirtay ummadda, islamarkaana laga gaashaanto in aysan mar dambe dib usoo noqon wixii dhacay.

**Natiijada Tiirka 2aad**

Qaybaha bulshada ee dhibaatadu dhex martay oo si cadaalad iyo run ah uga wada hadlay oo meel ku tiiriyey wixii dhib dhacay una sameeyey qaabab iyo nidaam lagaga hortagayo in aanay dib u soo noqon.

## 6.4 Tiirka 3aad: Soo-celinta xiriirkii wanaagsanaa iyo is-aaminaaddii colaaddu dhaawacday

*“Walaalo is neceb waa xabaala badiyaan, wayna xoolo yareeyaan.”*

**Aragtida Isbeddelka Tiirka 3aad**

**HADDII** la kordhiyo ka qaybgalka bulshada ee arrimaha a horumarinayo dhaqanka iyo nabadda, waxaa suurta gelaysa in ay diidaan dagaalada gacan ka hadalka iyo mid afka ah waxaynabulshadu taageerayaan wadahadallo kor u qaadaya wada noolaanshaha, waxay soo celinayaan xiriirkoodii, waxayna cusboonaysiinayaan heshiisyo bulsho, **SIDAA DARAADEED** ummadda Soomaaliyeed waxay ku noolaanayaan runtii nabad iyo nolol wanaagsan oo isku dhafan, baahidooda aasaasiga ahna way dhameystirmaysaa.

**Sheekada: “Waxay qaadataa hal qof oo kaliya in uu joojiyo aarsiga soo noqnoqda”**

Qiso yaab leh ayaa waxay ka dhacday tuulo yar oo ku taallo duleedka degmada Balad-Xaawo oo tusaale fiican u ah qirashada iyo cafiska. Sanadkii 1991dii, tuulo ku taalla duleedka magaalada Balad-Xaawo ee Gobolka Gedo, ayey kooxo hubeysani qabsadeen. Habeen habeenada ka mid ah, waxay guryahooda ka soo xireen 27 nin, waxayna subaxnimadii isugu keeneen meel bannaan, sidoo kale waxay dumarkii iyo caruurtii ku soo aruuriyeen hareeraha

bannaanka si ay u daawadaan marka ay raggii ay soo aruuriyeen mid mid u tooganayaan. Waxay dumarkii iyo caruurtii ku cabsi geliyeen, hadday arkaan qof ooyaya, isagana in ay tooganayaan.

Meydadkii raggii la laayey intey dameero ku rareen bay ku soo daadsheen meel qashin-qub ah, waxayna u diideen in qofna soo arko ama raaco. Halkaas bayna meydadkii bahaladu ku cuneen, kuna qurmeen iyadoo aan loo samayn aaskii Islaamku qabey. Kooxdan hubaysan ujeedadoodu waxay ahyd in ay, cabsi gelin, argagax iyo tiiraanyo ma hadho ah ku reebaan dadka tuulada degenaa ee ka soo jeeda qabiilkii ay is dagaalsanaayeen. Dadkii goobjoogga ka ahaa dhacdadaas waxaa ka mid ahaa wiil 8 sano jir ahaa waqtigaas oo indhihiisa ku arkayey dilkii aabihiis. Wuxuu wiilka yari go'aansaday in uu u aaro aabihiis iyo adeeradiis.

Labaatan sano kadib, wiilkii oo labaatan iyo siddeed jir ah, ayaa deegaankii ku soo noqday, fursadna u helay in uu isagoo dood hage ah ka qaybgalo kulan tiiraanyo-bixin bulsho oo isla tuuladii lagu qabtay. Qoyskoodu waxay qaxooti ahaan ugu noolaayeen Kenya, maalintii ugu horeysayna wuxuu dadka isku baray labadiisa magac ee hore, wuxuuna maalmihii hore ee kulanka u muuqday qof aamusan oo tiiraanyeysan.

Galabnimadii maalintii labaad, wuu is-furfuray wuxuuna si tiiraanyo leh uga sheekeeyey xasuuqii tuulada ka dhacay ee uu indhihiisa ku arkay isaga oo sideed jir ah. Wiilkii intuu dadkii dhex-istaagay ayuu yiri "aniga waxaan ahay ina hebel hebel waanad igaranaysaan midkaan ahay" dhamaan dadkii meesha fadhiyey wey aqoonsadeen waxaaana bilaabatay shux-shux, isaga oo hadalkiisa sii wadata ayuu yiri 'waad ogtihiin wixii tuuladeena ka dhacay 20 sano ka hor iyo meesha ay qubuurtii aabahay iyo adeeraday ku yaalaan. Waan necbaystay markii hore ee laygu casumay in aan ka mid noqdo kulankaan, waayo ma doonayn in aan hor fariisto dad aan ogahay oo kulankan qayb ka ah.

Haddaan runta idiin sheego, waxaan halkan u imid in aan idin dilo oo idinka aargoosto, balse casharkii halka looga hadlay ee ahaa jabinta wareegtada aarsiga iyo colaadda ayaa aad iitaabatay. U-aaridda aabahay iima soocelinayso isagii, qalbigaygana ma daaweynayso. Kaliya waxay abuuraysaa in caruur kale ay sugaan in ay dambiga aan galo ay ka gudaan caruurtayda. Waxaan ku fekeryey si aan ciilku iiga baxo in aan aniguna qolo kale dhegta dhiigga u daro,

balse waxay I xasuusisay haddaan nahay Soomaali aan maalinkasta midba midkeena kale u gowroco. Maanta waxaan rabaa in aan jebiyo wareegtada aargoosiga, aanna cafiyo dhamaan intii masuulka ka ahayd dilkii xaq darrada ahaa ee aabahay horteyda loogu geystay.

Nin waayeel ah baa geeska ka istaagey oo yiri "waa aniga midka aad wiiloow raadinayso, anaana dilay aabahaa iyo adeeradaa. Teer iyo maalintii aan sameeyey dilkaa xaq darrada ahna habeenna hurdo ma seexan. Waxaan maalin iyo habeenba dareemaa amni darro iyo gacan ku-dhiiglenimo. Berigaa aan aabahaa dilayey, waxaan ahaa nin qani ah oo ilaahay xoolo aduun u dhiibay, afar (4) xaas, caruur faraha Alle ka badiyey baa berigaa Alle isiiyey.

Maanta waxba kama hayo-xoolihii waa iga baaba'een, xaasaskii iyo caruurtiina meel cidla ah bay iiga dhaqaaqeen. Waxaan ahay caawa nin aan waxba ku oolin, waana ka xumahay in aan aabahaa dilo. Waxaan kaa codsanayaa in aad i cafiso." Wiilkii oo runtii aad uga tiiraanyeysan xusuusta xumaatada iyo xasuuqa ka dhacay tuuladiisa, balse fahansan in aarsi uusan aabihiis u soo celinayn, iyo xaaladda uu ku sugan yahay kii aabihiis hortiisa ku dilay in aduunka lagu ciqaabay, wuxuu dadka hortooda ku cafiyey odeygii qirtay dilkii aabihiis. Qoyska intii kale ayaa kadib looga yeeray xeryihii qaxootiga ee Kenya, laguna qabtay tuuladii kulan weyn oo dib-u-heshiin iyo is-cafis guud ee uu wiilkii dhalinyarada ahaa uu horseeday. Hantidoodiina halkiiba loogu ceshay.

Maantana jifadii tuuladaa deegaanka u ahayd waxay ku wada nool yihiin si nabad iyo deris-wanaag ah.

**Hordhaca Tiirka 3aad**

Dhib-u-heshiinta bulsho iyo midda koox-diimeedku waxay tiir-dhexaad u yihiin in dalka lagu soo dabbaalo xasilooni waarta. Iscaburinta, isu-xoog sheegashada iyo khilaafka ka dhexeeya kooxaha diimeed ee dalka ka jiraa, waxay kordhiyeen is-aaminaad-daradii markii horeba ka jirtay beelaha dhexdooda, waxayna caqabad ku noqdeen dhisitaanka dowladnimo dhameystiran oo awood leh.

Sida ay taariikhdu marar badan xustay, dulmiga iyo isu-awood sheegashada beelaha dhexdoodu waxay abuuraan caro iyo ciil isu roga inay u adkeysan waayaan dulmiga lagu hayo oo ay qoryaha qaataan halkaasina colaadi ka abuuranto. Arrimaha noocan ahi waxay dhaliyaan ama qayb ka noqdaan

khilaaf aan dhammaad lahayn oo soo noq-noqda.. Waxay sidoo kale abuuraan in qaybaha bulshadu isu arkaan in ay yihiin dulmaneyaal dad kalena u arkaan dulmiyeyaal, waana arrin saameyn weyn ku leh bulshadeenna.
Colaadan soo noq-noqonaysaa waxay runtii qofka uga tagtaa tiiraanyo, waxayna sidoo kale dhaawacdaa is aaminaadda shacabka dhexdiisa ah (isku beel ama kala beelba ha ahaadaane). Ugu dambayntii, colaadaha soo noq-noqdaa waxay shacabka ka hor istaagaan dib-u-dhiska noloshooda, waxayna abuuraan bulsho burburtay oo bahdilan waxna aan qabsan karin. Waxay kor u qaadaan ka mid noqoshada nabad-diidka, waxayna caqabad ku noqdaan horumarka dhaqaale. Sidoo kale waxay wiiqaan awoodda adeeg-bixinta maamulka dowladda oo ahmiyad weyn u leh horumarinta kaabayaasha dhaqaalaha, daryeelka, sugidda amniga iyo waxbarashada..

Ujeeddada Tiirkan waa boogo-dhayga dhaawacyadiii shacabka Soomaaliyeed kala gaaray ee ay keeneen colaadihii iyo burburkii dowladnimo ee soddonkii (30) sano ee u dambeysay iyo meelaha qaar intii ka horaysayba; iyo sidoo kale in la soo celiyo is-aaminaaddii, is-jacaylkii walaalnimo ee shacabka ka dhexeyn jirtay loona jeesto midnimo iyo horumar ileen Soomaalibaa horey u tiriye "Gacmo wadajir bey wax ku gooyaan". In la helo ummad Soomaaliyeed oo isu-caloolsan, Is-aaminsan, isna jecel, isla mar ahaantaana meel uga soo wada jeedda dib-u-dhiska qaranimadooda iyo wadaagga, daryeelka iyo ilaalinta waxa ay isla leeyihiin.

**Ujeeddada Tiirka 3aad**
In laga gudbo waxyaabaha soo-jireenka ah ee kala qaybiya dadka Soomaaliyeed ee isku danta ah si loo abuuro bulsho wax-wada leh oo nabad, is-aaminaad, isfahan iyo wadajir ku wada nool adeegyadii ay u baahan yihiinna si cadaalad ahna u wadaaga

**Natiijada Tiirka 3aad**
Is-dhexgalka bulshada qaybaheeda kala duwan ee tabashooyinka taariikhiga ah kala qaba colaaduhuna dhex yaalleen oo xoogaysta.

## 6.5 Tiirka 4aad: Soo-celinta kalsoonida dadweynuhu ay ku qabaan hay'adaha dowladda

**Sheekada: Hal-Guri, Hal-Qoys**
Sheekadaan, Soomaaliya waxay ka dhigan tahay hal guri, Soomaaliduna hal qoys oo halkaas guri ku wada nool oo ay muhiim tahay in ay nabad ugu wada

noolaadaan gurigooda. Soomaalidu waxay dayac-tiranayaan gurigooda iyagoo raba in ay noqdaan bulsho isku milan oo isla aaminsan qaabka federaalka. Guriga aasaaskiisu waa Dowlad-goboleedyada iyo Gobolka Banaadir, qolalkuna waa degmooyinka, sharaxaadda darbiyadu waa tuulooyinka, tiirarku waa qurbajoogta, darbiyada guriga oo dhan isku haya kalana haya waa dastuurka. Dowladda Federaalku waa saqafka (guriga dushiisa) wada daboolla guriga, dhulka uu guriga aasaaskiisu ku fadhiyaana waa cadaaladda iyo garsoorka. Fadhiga, barsada iyo qadadu way kala duwanaan karaan oo hadba si loo qurxin karaa ama si loo sharixi karaa taas oo ka dhigan habka doorashooyinka iyo qaab-dhismeedka dowladnimo oo mar walba wax lagu soo kordhiyo waxna laga bedelo laakiin kulligood waa dhisidda aasaas xooggan ee dalka. Mustaqbalka dowlad-wanaagga, daldhiska, nabadeynta iyo dhab-u-heshiinta waxay ku xiran tahay sida Halka-Qoys u wada dhistaan Gurigooda iyo hay'adaha ku dhex jira si ay nabad ugu wada noolaadaan iyaga iyo dariskoodaba.

*Maahmaah:* ***“****Ceel ninna waa qodaa, boqolna waa ka waraabtaa. “*

**Aragtida Isbeddelka Tiirka 4aad**

**HADDII** muwaadiniinta la isugu keeno wadahadallo ku saabsan arrimaha muhiimka ah ee aasaaska u ah bogsashada, nabadda iyo dhab-u-heshiinta, **KADIBNA** hay'adaha dawliga ah waxay bilaabayaan in ay horumariyaan, taageeraan ayna fuliyaan shuruuc iyo siyaasado saameyn fiican ku yeesha nolosha dadka Soomaaliyeed, **SIDAA DARAADEED** waxay hay'adaha siineysaa fursad ay ku qaabeeyaan sida kheyraadka loo isticmaalayo, in kor loo qaado dhaqanka bulshada, iyo in la abuuro dhaqaale loo dhanyahay, cadaaladd iyo in si xaqq ah wax loo qaybiyo.

**Hordhaca Tiirka 4aad**

Sida aynu ka wada war qabno, waxaa jiray xadgudubyo tiro badan oo magaca hay'adaha dowladda lagu gaystay dadweynaha Soomaaliyeed isla markaana sababay in ay dadku col la noqdaan dowladnimadii oo burburkeedii soo dadajiyaan. Waxaa kale oo la caddeeyey kalsoonida ay dowladda shacabku ku qabaan in ay aas-aas muhiim ah u tahay sharciyadda jiritaanka dowladnimada iyo siyaasad loo dhan yahay lana wada dhistay. Is aaminaaddu waxay runtii muhiim u tahay wadajirka iyo fayo-qabka bulshada maadaama ay saameyn xooggan ku leedahay awoodda ay dowladdu wax ku maamulayso adeeggana ku gaarsiinayso shacabka iyadoon xoog isticmaalin.

**Ujeeddada Tiirka 4aad**

In la soo celiyo fahamkii dowladnimada ee qaldamay lana xoojiyo sharciyadda iyo kalsoonida dadka Soomaaliyeed ku qabaan dowladnimada iyo hay'adaheeda iyo heerarkeeda kala duwan si dadku u dareemaan wada-lahaanshaha dowladda iyo in ay tahay adeegbixiye loo siman yahay

**Natiijooyinka 4aad**

Dadka Soomaaliyeed oo aamina in dowladda la wada leeyahay kuna fadhido kalsooni shacab iyada oo jiraan fursado isla-xisaabtan u dhexeeya bulshada iyo dowladda heerarkeeda kala duwan arrimahaas oo keena adeegga bulsho oo gaara qaybaha dalku ka kooban yahay.

## 6.6 Tiirka 5aad: Xoojinta kasoo-kabashada diifta iyo aafooyinkii colaadaha

*Maahmaah: "Nebedaa naas la nuugi leh"*

**Baraanbur**

*Waxoow hadafkeenu yahay oon la hurikareyn*
*Hannaan dhaba oo heshiinta qaran*
*Dhaqaaluhu u horeeyo on aan hilmaan laheyn*
*Hami inaan yeelanoon isla hawlgalnaa*
*Bulshadu hiil bay rabtaa iyo hagar la'aan*
*Hadal yar iyo hawl badan iyo hufnaan*
*Illaah baa hodane waa in aan u hagar baxnaa*
*Oo aan ku wada hergalnaa hawadii wacneyd*

**Jawaahir Axmed**

**Aragtida is Bedelka Tiirka 5aad**

**HADDII** la xoojiyo tayada dadka deegaanka lana siiyo khibrado wax ku ool ah oo ku aadan ku dhaqanka demoqaraadiyada iyaga oo bixinayo adeegyo, **KADIBNA** la helo waxtar dhaqan-dhaqaale oo taageeraya bixinta adeegga iyo hab-nololeedka kuwaas oo faa'iido u leh dadka deegaanka, **SIDAA DARAADEED** dadka deegaanku waxay gudanayaan waajibaadkooda shaqsiyeed iyo lahaanshaheeda, waxayna dareemayaan in nabadda iyo dhab-u-heshiinta ay iyagu leeyihiin.

**Hordhaca Tiirka 5aad**

Xoojinta soo kabashada bulshada iyo dhaqaalaha waa mashruucyada fidinta nabadda oo dhameystiran oo soo kabashada dhaqaalaha ay ka mid yihiin yaraynta saboolnimada iyo helitaanka adeegyada aasaasiga ah sida

dugsiyada/iskuulada, jidadka, goobo biyood, iyo hagaajinta nolosha dadka iyo shaqo-abuur ee dhallinyarada, iyo horumarinta dhaqaalaha wadanka tiirarka u ah oo ay ku jiraan xoolaha, beeraha, kaluumeysiga iyo horumarinta kaabayaasha dhaqaale. Mashaariicda nabadda lagu adkaynayo oo wata soo kabashada dhaqaale waxay saameyn xooggan oo wax ku ool ah ku yeelanaysaa mideynta dadka isku deegaanka ah ee hore dagaal u dhexmaray kuna jiray colaad soo noqnoqonaysay, waxayna hoos u dhigaysaa xasaasiyadihii dhex yaallay iyada oo adkaynaysa is-dhexgalka bulshada iyo wax wadaagga. Waxaa kale oo ay noqotaa astaamo la arki karo oo nabadda iyo horumarka.

**Ujeeddada Tiirka 5aad**
In la dhiso tayada bulshada iyada oo la siinayo khibrad wax ku ool ah, la hirgeliyo barnaamijyo abuuraya horumar dhaqaale lana koriyo garaadka siyaasadeed

**Natiijooyinka Tiirka 5aad**
In uu kordho fahamka xuquuqda iyo masuuliyadda muwaadiniintu, kaas oo ka dhasha go’aammada dadweynuhu leeyihiin ee ku aadan fidinta adeegyada iyo horumarinta kaabayaasha dhaqaalaha.

## Ujeeddo: Go'aan Gole Ansixin Magac Bedelidda Hay'adda Duulista Rayidka iyo Saadaasha Hawada Soomaaliyeed, loona bedelay Hay'adda Duulista Rayidka Soomaaliyeed

***Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS***

**Markuu Arkay**: Qodobka 99aad , (a), (b) iyo (e) ee Dastuurka KMG

**Markuu Arkay**: Qodobka 100aad , (a), iyo (d) ee Dastuurka KMG

**Markuu Arkay**: Warqadda summaddeedu tahay **MTCA/OM/384/2018** ee **09/10/2018** ee soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Gaadiidka iyo Duulista Hawada , kuna saabsan **bedelidda magaca Hay'adda Duulista Rayidka iyo Saadaasha Hawada Soomaaliyeed, loona bedelo Hay'adda Duulista Rayidka Soomaaliyeed.**

**Markuu Dhageystay**: Khubarada Soomaaliyeed ee aqoonta u leh arrimaha Duulista Rayidka

**Markuu Arkay**: Go'aanka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.67.03.19** ee **21/03/2019** kuna saabsan ansixinta "**bedelidda magaca Hay'adda Duulista Rayidka iyo Saadaasha Hawada Soomaaliyeed, loona bedelay Hay'adda Duulista Rayidka Soomaaliyeed"** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyey.

**Markuu Tixgeliyey**: Muhiimadda ay leedahay Bedelidda Magaca **Hay'adda Duulista Rayidka iyo Saadaasha Hawada Soomaaliyeed, loona bedelay Hay'adda Duulista Rayidka Soomaaliyeed.**

### *Wuxuu Xeeriyay:*

### Qodobka 1aad

Go'aanka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.67.03.19** ee **21/03/2019** kuna saabsan ansixinta "**bedelidda magaca Hay'adda Duulista Rayidka iyo Saadaasha Hawada Soomaaliyeed, loona bedelay Hay'adda Duulista Rayidka Soomaaliyeed**" oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyey.

## Qodobka 2aad

Waxa Wasaaradda Gaadiidka iyo Duulista Hawada loo igmaday in ay **Hir-geliso, meel-marisana** laga bilaabo taariikhda warqaddan magaca Hay'adda oo noqonaya "**Hay'adda Duulista Rayidka Soomaaliyeed"** .

## Qodobka 3aad

**Bedelidda magaca Hay'adda Duulista Rayidka iyo Saadaasha Hawada Soomaaliyeed, loona bedelayo Hay'adda Duulista Rayidka Soomaaliyeed",** waxa ay dhaqan-gelaysaa marka uu saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

Mudane Xasan Cali Khayre
Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
WAA LA DIIWAAN GELIYEY
DIIWAAN NO:
TAARIIKH 26/3/2019
SAXIIXA HANTIDHAWRKA GUUD